

BARBAARIYE

Farduus Cabdi Saleebaan

BARBAARIYE

Daabacaaddii 1aad

©Farduus Cabdi Sulayman 2019

Xuquuqda buuggan idilkeed waxaa leh qoraaga ku magacaaban. Dib loo ma daabacan karo si kalena loogu ma tagrifali karo iyada oo aan isaga laga helin oggolaansho qoran.

Madbacadda Hiil Press

BAAHIN DAL IYO DIBAD

Hiilpress6@gmail.com

Cairo,Egypt

Nashqadda Jaldiga :Cabdiraxmaan Maxamed

Quraaridda Buugga: Cabdiladiif Ismaaciil

Daabacaaddii 1aad 2019

HIBAYN

Waxa aan ajarka iyo abaalka dhiganahan u hibaynayaa hooyo macaan Faadumo Siciid Raygal Alle naxariistii janno haka waraabiyo, gef iyo gaabisna haka cafiyo.

Waxaan kale oo si gaar ah ugu hibaynayaa buuggan abtigay oo noloshayda tiir-dhexaad u ah Maxamed Siciid Raygal Alle haka ajarsiiyee.

Waxa kale oo buuggan ka hadlaya barbaarinta carruurta u hibaynayaa dhammaan waalideenta soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan, gaar ahaan kuwa u ooman ee u baahi qaba dhigane ka hadlaya barbaarinta ubadka.

Waxa kale oo aan dhiganahan u hibaynayaa qof kasta oo muslim ah oo waalid ah. Ama noqon doona mustaqbalka dhow, kuna hadla afka soomaaliga.

Tusmada Buugga

Hibayn	5
Mahadnaq	9
Afeef	11
Hordhac	13
Cutubka 1aad:	17
Qeexidda barbaarinta.	18
Waa kuma la barbaariye?	42
Waa kuma barbaariye?	50
Sida ugu fiican ee wax loo barbaariyo.	58
Cutubka 2aad:	75
Barbaarinta 1aad (xilliga guur-doonka).	76
Barbaarinta 2aad (xilliga guurka).	82
Aasaaska guurka.	85
Meherka iyo Aqalgalka.	92
Cutubka 3aad:	97
Barbaarinta 3aad (xilliga uurka).	98
Barbaarinta 4aad (xilliga dhalashada).	109
• Naas nuujinta.	110

- Kala korinta. 112
- U heesidda ilmaha..... 113
- Xambaaridda ilmaha..... 115
- Doorka Hooyada 116
- Xilliga dugsiga..... 127

Cutubka 4aad: 135

Waxyaabaha habboon ku barbaarinta ubadka..... 136

- Jacayl iyo naxariista. 136
- Diinta iyo run-sheegga. 158
- Samirka iyo sadaqadda 166
- kalsoonida nafta iyo akhriska. 173
- Mas’uuliyadda 178
- Xallinta dhibaatooyinka. 180
- Maaraynta wakhtiga. 180
- Qorshaha iyo qaabaynta nolosha. 181

• Dhiirigelinta ilmaha	182
• Abaal marinta ilmaha.	194
• Go'aan qaadashada.	198
• Waxdhigasho ama kaydsasho.	199
Cutubka 5aad:	203
Carruraha baahiyaha gaarka ah qaba	204
Waalidka iyo hawlaha ka reebban	217
• Cadaadin ilmaha.	221
• U kaydinta ilmaha xumaan.	224
 Caqabadaha haysta ilmaha	 238
TALO BIXIN	258
Tixraac	263

•

MAHADNAQ

Marka hore waxa mahad leh Allihii ii suurogeliyay bilowga iyo dhammaystirka buuggan. Waxa ammaan leh nebiga (N.N.K.H). Qofkii aan dadka u mahad niqin, ilaahayna uma mahad noqo e, wax aan mahad ballaadhan iska leh guud ahaan iyo gaar ahaan ba asxaabtii iga kaalmaysay hawshan adag, kuwaas oo aanan magacyadooda halkan ku soo koobi karin. Qof kaste oo i caawiyay halkan kuma soo koobi karo laakiin qalbiga iyo laabta ayaan ugu hayaa oo aannu weligii ka tirmayn; waanu mahadsan yahay kun jeer waxaase xusid gaar ah mudan.

- 1) Khadar Maxamed Axmed (kashka) oo si wayn uga qaybqaatay soo bixitaanka buuggan, kuna bixiyay wakhtigiisa qaaliga ah .
- 2) Cabdicasiis Maxamed Iiman oo wakhti dheeraad ah ku bixiyay tifaftirka buuggan.
- 3) Qoraa Cali Cabdi Coomay oo isna tifaftirka ka qaybqaatay.

- 4) Qoraa Xamda Ciise Ibraahin iyo qoraa Cabdiqani Cabdilaahi Cismaan oo iyaguna talooyin badan iga siiyay buuggan dhanka qorista.
- 5) Ilmaabtiyaashay Cabdirashiid Xuseen Cabdi iyo Maxmed Yaasiin Mire oo iyaguna iga caawiyay dhanka dhaqaalaha, sidii uu buuggani idiin soo gaadhi lahaa.
- 6) Yuusuf Axmed Yuusuf (Ex) iyo Layla Cabdi Jamac oo iyaguna si gaar ah ii caawiyay.

.

Afeef

Wax aan afeef ka dhiganayaa wixii khalad ah ee dhiganahan ku dhex jira; waa aniga iyo shaydaan wixii saxana waa xagga Eebbe (s.w.c). Soomaaliduna wax ay tidhaahdaa “Aqalkaaga hortiisana oodbaa la dhigtaa, odhaahdaada horteedna afeefbaa la dhigtaa.” Wixii odhaah ama qoraal ah ee aan meel kasoo qaatay laakiin aan ilaaway ama ka tegay ciddii tidhi oo aanan xasuusan

**Nin raggii eraygiisana
Astaan buu ku dhigtaaye
Rabbow eex ma tiraabine,
Aqoon haygu cadaabin.
“Abwaan Gaariye”**

HORDHAC

Barbaarintu bulsho walba waa u udub-dhexaad. Bulshada ay barbaarintu ka xumaato, saamayn taban ayay ku yeelataa. Bulshadeena soomaaliyeed waxa aqoon la'aani ka haysataa barbaarinta. Waxa kale oo jirta in aan qoraallo badan laga samayn mawduucan muhiimka ah. Taasi waa sababta ay qoraagu qalinka ugu qaadatay buuggan kooban si ay hage ugu noqoto bulshada baahida wayn u qabta dhiganahan.

Buuggan sida magiciisa ka muuqata wax uu ka hadlayaa barbaarinta carruurta, wax uuna sida aan filayo uu hagi doonaa waalidiin badan oo u ooman dhigane ka hadlaya barbaarinta ubadka kuwo waalid ah iyo kuwo noqon doonaba. Sidaas awgeed barbaarinta ubadku waa hawl adag qofkii uu illahay la qabto ma ahane, dhammaan waalidiintu wax ay la daalaadhacayaan, sidii ilmahoodu u noqon lahaa halyay ay berri ku faanan aakhirona manfac u yeesha

ilmaha yari wuxuu u baahan yahay xanaanayn, iyo daryeel dheeraad ah in la geliyo wakhti badan.

Ilmaha yari waa sida geed aad rabtid in aad beri intifaacsato oo aad midho macaan ka cunto, waa in aad ilmaha maskax ahaan iyo jidh ahaanba aad sida ugu habboon u barbaarisaa, ilmaha qaarbaa rabbi haybad hoggaamin u siiyay oo bulshada iyo waalidka midna ka war qabin, waxaa muhiim ah in ubadka loo fiirsado laga yaabaa in aad adigu haybaddii hoggaamineed ba aad ka disho ilmaha aqoon darro awgeed, taas oo uu tusaale xun hadhow u noqon karo bulshada.

Haddii aad aragto ilmo dhiirran oo aan biqin oo geesi ah, ilmo hadal ku hadlaya da'adiisa ka wayn wax uu hibo u leeyahay hoggaamin, waa in si gaar ah loogu tabco, ubadku waa nimcada ugu wayn ee rabbi bixiyo ilaasho oo dayaca halaga ilaaliyo carruurta.

Haddaba buuggani waxa uu iftiimin doonaa barbaarinta iyo muhiimadda ay u leedahay bulshada. Waxa uu buuggu toosh wayn ku qabanayaa meelaha ay ka qolloocsantay barbaarinta bulshadeennu isagao sheekooyin hogatusaalayn ah ku siinaya. Waxa uu buuggu soo gudbinayaa xalka ku habboon ee loo

baahanyahay. Waxa kale oo buuggu qeexay halka ay ka bilaabanto barbaarinta wanaagsani iyo heerarka ay marto.

Waxa uu buuggu ka hadlay caqabadaha haysta dadka gacantooda ay ku jirto ubad ay barbaarinayaan, taas oo ay ka mid tahay waxyaabaha keena in ilmuhu nolosha ka dhaco. Intaa kadib waxa uu akhristaha farta ka saarayaa sida loo maaraynayo mushkiladahaas. Qoraagu waxa ay Alle SW ka rejaynaysaa in uu dadka ku anfaco.

Farduus Cabdi Saleebaan

Hargeysa, Somaliland

20 January 2019.

Cutubka 1aad

Qeexidda barbaarinta:

Barbaarintu waa in shay si tartiib-tartiib ah loo kordhiyo (badiyo) illaa la gaarsiiyo dhammaystirnaan. -Heerka ugu sarreeya-. Haddii aan ka eegno dhanka barbaarinta ubadka waa in ilmaha saddex meelood oo go'aaminaya habdhaqankiisa si isu dheelli-tiran looga koriyaa illaa meesha ugu sarraysa ee suuragal ah la gaardhsiiyo. Waa in laga koriyaa ilmaha jidhka, garaadka iyo hab-fikirkaba. Waxa ay dadka qaar ku qeexaan barbaarintu inay tahay isku dhafidda qofka iyo deegaankiisa.

Qaarna waxay ku tilmaamaan ruuxa oo lagu biiriyo dhammaan waxyaabaha dhammaystiri kara

noloshiisa, qurxin kara jidhkiisa, korna u qaadi kara shakhsiyaddiisa iyo habdhaqankiisa. Haddaba barrbaarintu waa habka ay bulshadu isugu gudbiso hiddaha, dhaqanka iyo ilbaxnimada.

Waxa lagu soo koobi karaa barbaarinta in ay tahay: "u diyaarinta qofka ilmaha yar sidii uu ula qabsan lahaa noloshiisa mustaqbal, si waafaqsan habfikirka iyo caadooyinka hadba bulshada uu kasoo jeedo".

Bulsho waliba wax ay leedahay; aragtiyo, caqiidooyin, dhaqan iyo ab laga soo gaadh iyaga u gaar ah. Bulsho kastaana waxa ay aaminsan tahay in dhaqankeedu yahay kan ugu sarreeya ; waana ka ay ku barbaariso dhallaankeeda. Barbaarintaasina waa mid salka ku haysa habfekerka bulshada iyo diimaha ama caqiidooyinka ay haystaan. Barbaarintu badi waxa saamayn ku yeesha cimilada , deeganka iyo duruufaha ku xeeran bulsho kaste. Tusaale ahaan haddii deegaanku yahay mid colaadi ka holcayso ; carruurta waxa lagu barbaariyaa, wax iska dhicinta, dagaalka iyo geesinnimada. Haddii deegaanku yahay mid cimiladiisu kulushahay; waxa ilmaha lagu barbaariyaa

u adkaysiga kulaylaha iyo oonka. Kolba duruufaha ku xeerani sidaasay saamayn ugu leeyihiin barbaarinta.

Taas waxa ka dhasha mahadhooyin, maahmaayo dhirrigelinaya kolba dhaqanka iyo caqiidooyinka bulshadaasi haysato.

Barbaarinta waxa kaalin muuqata ka ciyaarta caqiidada ama diinta bulshadu haysato. Muslim ahaan barbaarinta qofka Muslimka ahi waa mid laga soo dhanbashay diinta Islaamka iyo qiyamkeeda suubban. Waxa jirta in la arko dad muslimiin ah, oo haddana aanay ka muuqan barbaarintii iyo dhaqankii diintu. Taas macneheedu ma aha in ay diintu qalloocsantahay ama ay qalloocisay, balse waa mid ka timid qofka. Mar kasta diintu waa ta wax toosisa, marnaba waxba ma xumayso.

Falsafadaha barbaarinta:

Waxa jira bulshooyin kala duwan oo aan haysan diinta islaamka. Waxa ka mid ah; sida diinta kiristaanka iyo

Yuhuudda. Isla diimahaasina dadka haysta waxa ay u barbaariyaan kuna ababiyaan si waafaqsan danohooda gaarka ah iyo diintooda .

Haddii aynnu tusaale usoo qaadanno yuhuudda iyo sida ay wax u barbaariyaan, sida ay la rabaan ilmaha yar ee yuhuudiga ahi, laba qaybood ayaynnu u qaybin karnaa:

Tan koobaad; waxa ay tahay in ilmaha lagu barbaariyo caqiidooyin ay quruumihii hore haysteen, taas oo facba fac kasoo dhaxlay. Tusaale ahaan waxa ay aaminsan yihiin in yuhuuddu tahay shacab Alle si gaar ah u doortay, dadkan kale ee aan yuhuudda ahaynina yihiin addoomo Alle ugu talo galay iyaga; loona abuuray in ay iyaga u adeegaan. Taasi waa mid laga dhaadhiciyo ilamaha yar ee yuhuudiga ah.

Tan labaad; waxay tahay in lagu barbaariyo waayaha hadda jira ee yuhuuddu ku jirto, iyo in laga dhaadhiciyo in ilamaha yar sidii uga dabbaalan lahaa. Waxa ka mid ah, in ilmaha yuhuudiga ah laga dhaadhiciyo in qof kaste oo Muslim sheegtaa yahay dilaa argagixiso ah, muslimintuna ay xoog ku qabsadeen Falastiin iyo masjidka barakaysan ee Aqsa.

Dagaallada iyo xasuuqa yuhuudduna uu yahay iska caabbin xaq u dirir. Wax aad dareemi kartaa in ay cadho, cadaawad iyo cunfi ku barbaariyaan ubadkooda. Waxa la dareemi karaa in tahay falsafad ka fog runta iyo xaqiiqada .

Haddii aynnu eegno falasadaha diinta kiristaanka iyo sida ay u barbaariyaan ubadkooda. Iyaga oo yuhuudda isaga mid islaam-nacaybka iyo u qaabaynta islaamka qaab foolxu; haddana kiristaanku waa ka dhaqan sahlana yahay, sida Alle ku sheegay Quraanka. Waxyaabaha ay ku barbaariyaan waxa ka mid ah in ilmaha yar laga dhaadhiciyo Nebi Ciise CS yahay inankii Ilaah ama inankii ilaahay -Alle ka nasahan ubad e- waxa kale oo lagu barbaariyaa in uu Nebi Ciise dhintay oo yuhuuddu dishay.

Haddii aynnu eegno tarbiyadda Islaamka iyo sida ay dhinac walba xoogga u saartay, ee aanay dhinacna ka tegin, taas oo leh ujeeddoyin fog iyo kuwo dhowba. Waxa ka mid ah in ilmaha lagu barbaariyo kawanka, cidda maamusha iyo jiritaanka Alle sw. Waxa ka mid ah in lagu barbaariyo sababta uu kawanka u yimid, ujeeddadii laga lahaa oo cibaado iyo in uu dhulka

camiro ahayd. Makhaluuqaadka kalena yihiin wax Alle u sakhiray si wanaagsanna uu uga faa'iidaysto.

Waxa uu islaamku ku barbaariyaa in dadka la baro farriinta islaamka iyo waxa uu koobsanayo oo ah in cibaadada Alle loo gaaryeelo, iyo in la barto axkaamta kala duwan ee fahanka islaamka.

Waxyaabaha uu islaamku dadka ku barbaariyo waxa ka mid ah, in la helo fac xambaari kara farriinta islaamka kaasoo islaamka ku difaaci kara aqoon iyo itaalba.

Islaamku in uu yahay diin naxariis, taasoo qof walba xaqiisa ilaalisay waa barbaarinta islaamka. Waxa ay diinta islaamku dhiirrigelisay is ixtiraamka iyo in aan qofna xaqiisa la duudsiyin.

Tarbiyadda islaamka waxa ka mid ah in uu xoojiyo aqoon oo tixgeliyo aqoonyahanka. Wax aad ka garan kartaana in aayaddii ugu horreysay ee nebiga lagu soo dejiyay ahayd (Akhri/اقرأ).

Barbaarinta Islaamku marnaba ma aha mid lala simi karo diimo kale, waayo waa mid dhinac kasta ka dhisan oo ka dhammaystiran.

Ilmuhu waa hadiyad qaali ah oo allaah ku siiyay. Waa imtixaan weyn. Waa ammaano ay tahay in la ilaaliyo. Wax uu kuu noqon karaa indho qabowsi, qurux adduun iyo camal wanaagsan oo kuu socda marka aad dhimato ka dib.

Haddii uu kaa saqiirana labo iyo wax ka badan way kuu shafeeco qaadayaan maalinta qiyaame sida uu caddeeyey nebigeenna (NNKH). Wax uu noqon karaa ilmuhu sidaas lidkeed. Ilmuhu waa seef labo af leh, oo hadba kaad adeegsatid; wax aanad kala kulmaysaa ilmaha wixii aad gashato.

Barbaarinta dadka waa shaqo adag una baahan wakhti badan iyo dulqaad. Sidaa daraaddeed waa in aannu waalidku yaraysan dadku waa noolaha qudha ee hadii noloshiisu burburto aan dib loo dhisi karin, ama si dib loogu soo celiyaa adag tahay. Haddaba hadda bilow inaad beddesho habka aad ula dhaqanto ilmahaaga. Xagga islaamka haddii aynnu ka eegno waa barbaarin ku dhisan naxariis, wax isa siin, jacayl iyo qaddarin.

Waxa waajib ah in ilmaha si hagar la'aan oo dedaal badan uu ku jiro loo barbaariyo. Soomaalidu wax ay

ku maahmaahdaa (**dhibtaad dhowrataa dhashaaduu sugaa**).

Ubadka waa in aad loogu dedaalo barbaarintooda si dhammaystiran, maxaa yeelay geedka marka aad biyayso hadba inta ay leegyihiin ayaa koritaankiisu ku xidhan tahay. Ilmuhuna waa la mid; hadba intaad leekaysiiso dedaalka barbaarintiisa ayuunbaad ka dheefsataa ama ka heshaa intaad geliso qofka iyo inta aad ka helaysaa inta badan waa isleegyihiin, inta badan wixii aad geliso wax u dhigma uun baad ka helaysaa ilmaha.

Haddii adiga oo aan ilmaha xannaanayn, u naxariisan, jacayl u muujin, runta barin, kalsooni ku abuurin, caawin marka uu garab kaa rabo, aanad isgarabtaagin, cidlo ku tuurin, hadhow aad tidhaahdid marka uu weynaado muxuu ii daryeeli waayey?!! Taas looma baahna xilligiina wuu kaa dhammaaday in aad canaanatana xaq uguma lihid. Sababta oo ah waxba maad gashan. Wax uu kugu xasuusto ama uu kugu ixtiraamo midna.

Hooyada iyo aabbaha waxa la gudboon in aanay gacantooda ku samaysan cawaaqib xumo dhaxal siisa

in uu ubadku kaga tago cidla ama uu daryeeli waayo, maxaa yeelay qof kaste sida uu waalidkiisa ula dhaqmo ayuu ilimihiisuna ula dhaqmi doonaa.

Markaa waalidku waa in aanay kaydsan inkaar waalidkaa kaaga dhacda, adiga ayay dhaxal kuu tahay weliba adduunka ayuu kuugu imanayaa cigaabtoodu oo ubadkaaga ayaa kaa jari doona.

Waxa la sheegaa, beri hore waxaa dhacay, odaybaa waxa uu dhalay wiil, kadibna wuu u darnaa wiilku aabbihii. Waxa ay ahaayeen reer guuraa. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa reerkii oo guuraya, odayguna wuu idho la'aa kadib wiilkii aan u roonayn ayuu wayddiiyay halka reerku marayo, wiilkii ayaa u sheegay, wax uu ku tiraabay odaygii halkaa igu tuur oo igaga tag!

Wiilkii baa yidhi: “oo maxaa dhacay?!” Odaygii ayaa yidhi: “halkani waa halkii aan aabbahay ku tuuray, markii uu indho beelay.” Wixii aabbihii ku dhacay ayaa odaygiina ku dhacay oo bartiibaa lagu tuuray oo lagaga tegay!

Sida aad ula dhaqanto waalidkaa uunbaa adigana ay ubadkaagu kuula dhaqmayaan.

Ubadku waa canjeled sideeda oo kale wax bu duuba. Waxayna intaa la socdaan falal kasta oo waalidkiisu samaynayo. Hadal kasta oo uu leeyahay iyo sida uu ula dhaqmayso dadka kale. Markaa ubadka waxa wanaagsan in la tuso wanaag iyo khayr ay kaga daydaan waalidka; si ay u noqdaan dad wanaagsan oo dadka la dhaqmi kara, waalidkana ay u noqdaan samafalayaal lagu badhaadho.

Carruurta qaarbaa hibooyin gaar ah illahay siiyay, oo la rabaa in hibooyinkoodaa la barbar istaago; tusaale ahaan ilmaha hoggaaminta hibada u leh carruurta kale waa uu ka duwan yahay, waa in si gaar ah isha loogu hayaa haddii aad aragto ilmo hadalkiisu da'adiisa uu ka wayn yahay, ilmo dhiiran, ilmo aan baqayn oo geesi ah, kuwaasi calaamaddu ku tusaya in ilmuhu uu hogaaminta ku fiicanyahay, ilmo walbaa waxbuu ku fiican yahay tusaale ahaan; ilmaha hoggaamiyaha ah carruurta uun bay hoggaamiye yaashu ku dhex jiraan oo hadhow ka soo baxaan. Carruur meel ku ciyaaraysa ayaa Cumar binu Khadaab soo ag maray,

markaasay yaaceen carruurtii oo dhuunteen kadib ilmo yar oo 8 jir ah ayaa carari waayey. Cumar baa wayddiiyay sababta uu u carari waayey, wax uuna yidhi: “denbi maan gelin si aan kaaga cararo, wadaddu cidhiidhi ma aha si aan kuugu banneeyo.”

Markaa awooddoodu waa in aan xaga xun loo leexin laakiin laga dhigaa halyeeyo muslimiinta u soo kacaya oo dhibka ay ku jiraan ka saari doona. Waxa kale oo jira carruur badan oo hibooyin kala duwan leh; waa in waalidiintu carruurta aanay ku dedaalin cunnadooda mooyee ay la socdaan hibooyinkooda kale ee u gaarka ah qof walba oo ka mid ah .

Qodobbo u muhiim ah barbaarinta carruurta:

1) waa in la ilaaliyaa ilmaha yar jidhkiisa, naftiisa iyo caqligiisa , oo aan loo gacan qaadin ilmaha. Sababta oo ah Nebi Muxammed (NNKH), weligii ilmayar gacan uma qaadin . Taasina wax ay ku tusaysaa naxariista uu ilmuhu u baahan yahay. Gacan qaadka aad ilmaha u qaaddaa ma keeno wanaag. Ilmaha oo aad karbaashtaa

waxa ay keentaa in uu baqo; oo ay ku sababto in uu ilmuhu been sheego ama barto beenta, kadib aad fahmi waydo dabeecadihiisa oo uu iska kaa ilaaliyo oo ku raali geliyo marka uu ku arki waayo in uu waxa uu doono sameeyo.

a) Jidhkiisa: Ilmaha waa in la siiyo cunto isku dheeli tiran iyo waxyaabaha uu ka helayo nafaqada, looguna dedaalo ilmaha in uu cabbo biyo ku filan maalintii loona oggolaado in uu ciyaaro ilmuhu.

b) Caqligiisa: iyada oo la barayo laguna dhiirigelinayo in uu ka shaqaysiiyo maskaxdiisa, markasta uu qaadan karo go'aamo faa'iido u leh, oo uu xallin karo dhibaatooyinka soo wajaha noloshiisa, oo aanu cid uun ku tiirsanaan mar walba.

c) Naftiisa: waa in laga dhisaa dareenkiisa iyo waxyaabaha uu aaminsan yahay caqiido ahaan. Ilmaha waa in lagu xidho Alle -kor ahaaye- loona sheego in uu isagu wax kasta bixiyo xaggiisana loo noqon doono oo ay geeri ma huraan tahay.

2) Ku korinta jacaylka: ilmaha waa in jacayl lagu koriyaa, loona hanbalyeeyo marka uu wanaag

sameeyo, abaal marinna waa in la siiyo. Sidoo kale waa in la dhiirrigeliyaa markasta. Haddiiba ilmuhu khalad sameeyo; waydii waxa ku kallifay oo yaan lagu canaanan oo aan lagu ciqaabin ilmaha.

Haddii uu dayn waayo waani oo wax u sheeg. Haddii uu intaa ku joogi waayo, uga dig halista naftiisa uga imanaysa. Hooyooyinkii hore waxay ilmaha u sheegi jireen halista waxa ay falayaan si uu uga joogsado waxa uu samaynayo.

3) Wax siinta marka uu wax wayddiisto: haddii loo diido wax aan dhib ku keenayn , si uu u helo waxa uu u marayaa waddo aan sax ahayn, oo aad laga qoomamayn doonto berri, taladuna faraha ayay ka baxaysaa. Yaan lagu kallifin ilmaha in uu tuugada barto.

Tusaale ahaan; waxa uu ku wayddiistay ilmuhu lacag uu **jallaato** ku soo iibsado, waa loo diiday. Waxa dhacaysa si uu jallaatadii u soo iibsado in uu lacag xado tii loo diiday ka badan. Wax kaste oo aad loo diido ilmaha hadii aan la qancin waxa uu isku deayayaa in uu dariiqa uu ku heli karo in uu isku dayo sax ama khalad tay doonto ha ahaatee.

4) La saxiibidda ilmaha: waxa wanaagsan in wakhti aad lala qaadato maalintii ama habeenkii ilmaha laguna wada sheekaysto, si loo oggaado waxa uu ku liito iyo waxa ku fiicanyahay. Caqabadaha haysta. Waxyaabaha uu la soo kulmo maalintii iyo baahiyihiisa gaarka ah. Waa in la dareensiiyaa loona sheega in la jeceshahay lagana fikiro isaga. Aabbo iyo Hooyo aan ilmaha ka war qabin looma baahna. Waa ilmaha waalidiintu ay la socdaan ogaadaan waxay jecelyihiin. Wax ay necebyihiin, iyo waxa ay ku fikirayaanba.

Si wixii khalad ah looga caawiyo joojintiisa. Laguna bogaadiyo wixii wanaagsan.

Ilmaha haddii lala saaxiibo oo marwalba isaga iyo waalidka ay ka dhaxayso xidhiidh fiican, waxa sii xoogaysanaya jacaylka ka dhaxeeya ilmaha iyo waalidka. Haddii arrinku noqdo marka aabbuhu albaabka ka soo galo in carruurtu kala yaacaan oo qolalka ay soo xidhaan, sariirta ay hoosta ka galaan suurogal ma aha in la oggaado waxa uu ilmuhu ku fikirayo ama doonayo, jecelyahay ama necebyahay. Waa in hooyada iyo aabbuhuba ilmaha xog ogogaal u

noqdaan. Waa in aan waalidku noqon arxan laawayaal balse ay noqdaan dad naxariis agtooda ay carruurto ka helaan.

Waxa aad bartaa ilmaha yar kala doorashada. Sida ma iminka ayaad seexan mise dhowr daqiiqo kadib? Kadibna uu dooran karo ta uu isagu rabo. In waalidku noqdaan la taliye fiican; oo wax kasta xumaantiisa iyo wanaaggiisa aad ilmaha tusi karto adiga oo aan amar iyo qasab midna aan ka dhigayn, ee doorashadiina weli jirto.

5) Ka ilaalinta hadallada xun: Haddii aanu ku fiicnayn meelaha qaar sida waxbarashada yaan lagu canaanan, laakiin waa in la oggaado meesha laga haysto, kadib la dhiirrigeliyaa oo laga caawiyaa sidii uu isku beddeli lahaa. Waa in aan looga sheekayn wax niyad jebiya, sida dad guul darraystay ama qof aan dedaalin oo guulastay. Markasta oo uu ilmuhu ka gaabiyo waajibkiisa waa in la dhiirrigeliyo, loona sheego in guusha lagu gaadhi karo uun dedaal iyo caqligiisa oo uu ka faa'iidaysto.

6) Dabagalka aan wanaagsanayn: ilmaha waxa ka lumaya kalsoonida. Wax uu moodayaa in aanad

aaminsanayn haddii aad mar walba la daba taagnaado. Waa in ilmaha dushaa lagala socdo inta badan, wax badan oo khalad ah marka ay sameeyaan iska dhaaf; sida qof aan arkayn oo kale. Mararka qaarna waa in laga waaniyaa wixii xumaan ah ee lagu arko.

Waa in aan la baadhin jeebabkiisa isaga oo aan ogayn ama shandadiisa. Maxaa yeelay waxa uu u arkayaa in labasaasayo basaas, haku maamulin waxa uu lacagtiisa nususaacaha ku iibsanayo, keliyaata wax aad ku leedahay talo iyo in aad ku tidhaahdo; hooyo ama aabbo waxaas kuuma fiicna waxaasaa laga qaadaa sida, iskiriinka qanjahaa kugu xanuuniye iska daa waa in aad ilmaha qanciso. Balse taa macneheedu ma aha in la iska sii daayo waxa uu doono ha falee.

7) Waaninta ilmaha yar: ilmaha yar waa in la waaniyaa, waana in la isku dayaa in la geeyo meelaha waayo'aragnimada lagaga sheekaynayo. Sababta oo ah waxa uu ku baranayaa xumaanta iyo samaanta. Waa in la baro sida dadka loo ixtiraamo; siiba dadka waawayn. Mar kaste muhiim ma aha in la waaniyo.

Waayo, wuu nacayaa marka danbe waa in wakhti loo sameeyo.

Ilmuhu lix bilood ilaa afarsano wax uu sameeyaa ficilo uu dadka ku soo jiidanayo, haddii uu arko in lagu qoslo wuu ku celceliyaa, laakiin haddii waxa uu samaynayaa uu xun yahay waxa lagu waaniyaa in laga jeedsado. Waayo, haddii la dilo ama la maago wuu ku dhegayaa, hadba sida ay waanadu warkaa ula jaanqaadi karto ayaa la rabaa in ilmaha loo sameeyo oo ay waalidku yaqaanan lana socdaan isbedbeddelka ilmaha ku imanaya.

8) Wax aan walidku samayn ilmaha yaan loo sheegin: inta badan waxaa dhaca ama aynnu aragnaa waalidka oo amraya ciyaalka wax aanay iyaba samaynayn oo ka run sheegayn. Ilmaha yar waxa uu waalidku u yahay kii ku dayanayay. Wax aad arkaysaa aabbeyaal carruurta ku canaanaya tuko salaadda, hadda isaguba food dhulka ma dhigo. Mid isticmaala waxyaabaha maanka dooriya ilmahii u diidaya isagiina wuu cunayaa! Suurogal ma tahay in uu isaguna iska daayo waxa waalidku samaynayo?! Jawaabtu waa maya.

Haddaba waxa laga rabaa waalidka in aad ubadka waxa aad u sheegayso noqdo mid waalidku ka run shegayo marka horeba.

Aan idiin soo gudbiyo dhowr sheeko oo aan qaar goobjoog u ahaa.

Maalin aniga oo maraya jid hor mara saldhig boolis wax ay in dhahaygu qabteen, oday waayeel ah; oo wiil yar oo uu dhalay kasoo xidhay lugaha iyo gacmaha. Waan eegay markaa waan dhaqaaq joogsaday si aan u ogaado xaalka wiilka oo aan da'ahaan ku qiyaasay 8-12 sano. Wiilka odaygu wuu caayayaa sigaarna wuu ku dul qiijinayaa, waxa uuna leeyahay wuu idhabaye iga xidha, hooyadii ayuu caayayaa. Abtigii ayuu aflagaadeeyay. Aniga gacan buu ila tegayaa iwm. Waan yaabay sababta uu u doonayo inuu wanaagsanaado isaga oo sidan ah ilmaha yari, isagii baa caayaya ilmaha wax uuna leeyahay adigu waxba ha caayin! Sidee ayay suurogal u tahay in uu isagu waxba caayi waayo.

Bal aan eegno sheekadan kale. Waa aabbo ilmihiisa jecel oo uu safar kula jiro. Waxa ku hayaa dhabtiisa marba wuu dhunkanayaa. Wixii dhuuni ah ee uu u

doorbidona wuu u keenayey. Wax aan fadhiyaa meel aan sidaa uga fogayn kursi ku beegan aad baan ula socdaa xaalka ilmaha yar iyo aabbaha dhexmaraya. Aabbuhu wax uu cunayaa qaad oo dhabta isna u saaran ilmuhu wuxuu isku deyayaa in uu wax ka cuno Aabbaha ayaa ku leh “Aabbo iskadaa waa ufe”, waxana uu u dhiibayaa sharaab. Ismalaha ilmaha waxbaad yeelaysaa ama aad baraysaa.

Goor danbe ayuu aabbihii degay kursigiina kusii fadhiisiyay ilmihii, qaadkiina wuu kaga dul tegay kursigii. Ilmihii ayaa bilaabay in uu wax ka cuno qaadka, qiyaastii da’ahaan waa 3-4 sano. Wax aan ku idhi “Maamo, iska daa waa wax xune.” Wax uu iigu jawaabay “ma aha wax xun, aabbo waakii cunayay.” Waa runtii wax uu u arkaa waxa aabbihii cuno wax wacan.

lamaan yaabin waan ka qabtay laakiin wuu ku soo barbaarayaa garo waxaase. Waa muskiladaha ugu badan ee ubadka haysta. Waxaana fiican waalidku inay ka digtoonaadaan waxyaabahaas oo kale. Yaan loo sheegin ubadka wax aanad samaynayn, oo aan

laga run sheegayn, haddii kale in wax laga horjoogo uun buu u qaadan oo waalidka oo aan ogayn.

Sheeko kale oo ka dhacday dal ka mid ah qaaradda Aasiya:

Hooyo leh hal wiil oo ay aad u jeclayd oo danyar ah ayaa wiilkeedu waxa qabay cudurka macaanka. Wax ayna uga taag wayday sonkorta. Way ka waanisay, way ku dishay, si kasta way tidhi laakiin arrinkaa way u maare wayday. Wiil wax uu aad u jeclaa boqorka ka arrimiya waddankaas. Hooyadu wax ay ku noolayd meel tuulo ah wax nolol maalmeedkooda dhaafsiisan ma helaan. Wax ay go'aansatay in ay u gayso boqorka si uu uga waaniyo arrinka maadaama uu aad u jecelyahay.

Way soo safareen hooyadii iyo wiilkeedii yaraa wax aynna soo gaadheen caasimaddii waddankaas. Wax ay abbaartay halkii boqorku ka deganaa magaalada. Wax ay la kulantay isaga oo rag badan la fadhiya, wayna codsatay in ay boqorka u baahantahay, wuu u soo kacay wax aynna uga sheekaysay arrinka iyada iyo wiilkeeda dhexyaala. Boqorkii wax uu yidhi: “celi ilmaha sannad ka dib ii keen”, hooyadii way

calaacashay iyada oo jeebkeeda og wax ayna ku tidhi: “wax weyn ma aha, waxa aad ku tidhaahdaa uun iska daa wuu ku maqlayaaye”, wuuna ka diiday wax uuna amray sannad ka dib in ay soo noqoto. Hooyadii oo cadhaysan ayaa iska tagtay wiilkeediina kaxaysatay. Waxa sannadkii lagaadhay isagao sidii u cuna. Wax ay isku ururisay qarash markale ayayna u soo safartay magaaladii boqorku joogay, wayna soo abbaartay halkii boqorku joogay, wuuna gartay markiiba wuuna soo dhoweeyay.

Wiilkii ayuuna waaniyey balana ka qaaday inuu iska daayo sonkorta sow ima jeclid ayuu yidhi; wax uu yidhi: “haa” iska daa hayee ayuu yidhi wuuna balan qaaday in uu iska dayn doono wiilkii yaraa. Boqorkii ayaa mamadii ku yidhi miyaad garanaysaa sababta aan kuu celiyey sannadka?! Wax ayna ku tidhi: “maya.” bal hadalka cajiibka ah eeg. Wax uu yidhi: “wax aan jeclaa sonkorta markaas wax aan rabay in aan iska soo daayo sannadkaa sonkorta, si aan qalbi daacad ah ilmaha ugu sheego, waayo haddii aan anigaba cunayo sidaan ugu sheegi karaa invuu isagu iska daayo.” Sidaas baa la rabaa in waalidku u dhaqmaan.

Yaa ka masuul ah barbaarinta carruurta ?

Waxa si toos ah uga masuul ah tarbiyadda carruurta qofka markaa gacanta ku haya; ee uu gacantiisa ku jiro, sida aabbaha, hooyada, walaalo, eeddo, habaryar, ayeeyo, awoowe, abti, adeer iyo wixii la halmaala.

Tarbiyadda uu ilamaha yari u baahan yahay wax ay martaa derejooyin kala duwan oo ah in uu marba tarbiyaddiisu ay taagan tahay marba heer. Hooyada ayaa ah ta ugu horaysa ee qaadda masuuliyadda ilmaheeda yar isla marka uu dhashaba, kadibna waxa dhici karta in masuuliyaddaasi ka wareegto hooyada oo qof ehelka ahi uu qaato; ilmihii yaraa masuuliyadii iyo tarbiyadii ilmaha waxay ku wareegtay qofka ilmaha gacanta ku haya markaas.

Marka hore waxa waajib ah in hooyadu la socoto heerka uu marba ilmuhu marayo iyo nooca tarbiyadeed ee uu u baahan yahay ilmaha yari, waxa kale oo fiican in ilmaha la baro hadallada fiican ee lagu hadlo, dadka loola dhaqmo, guriga loo joogo, carruurta loola ciyaaro, wax loo cuno, waddada loo maro, wax loo barto iyo wixii la halmaala.

Xilliga ugu habboon ee aad siin karto ilmaha casharradaas waa xilliga uu isagu gacanta ku hayo. Wax jira hooyooyin badan oo ay ka maqan tahay Aqoonta barbaarinta carruurta ama aan dan ka lahaynba. Taasina waa dhibaato si toos ah inoo saamaysay weliba dhinaca hadalka iyo ficilka uu ilmuhu samaynayo.

Waxa aad arkaysaa hooyooyin badan oo caayaya ilmihii oo yar. Ilmaha yari waxa uu duubaa oo soo celiyaa wixii lagugu celceliyo marka uu hadal barto wax uu bilaabayaa isaguna in uu hooyadii caayo iyo cidkasta; waayo caadi ayuu u yaqaanaa, ama wax ay indhahaagu qabanayaan dad guriga jooga oo odhanaya hebel ama heblaayo cay ama wax ku dhufo aniga ayaa kaa celinayee.

Wax aad kale oo arkaysaa hooyooyinka soomaaliyeed oo isticmaalaya hebel ama heblaayo iska soo celi oo waddo cad iska soo mari haddii kale ha ii iman, iyaga oo is leh wax aad ku barbaarinaysaa geesinnimo; laakiin wax ay taasi u horseedayasaa in uu ilmuhu axmaq noqdo ama qof dagaal jecel sida soomaalidu u badan tahay taasina ma hagaagsana, muhiim ma aha in

aad cuntada uun siiso ilmaha laakiin muhiimaddu wax ay tahay in ilmaha laga koriyo jidhka, maskaxda iyo ruuxdaba; la wanaajiyo akhlaaqdiisa uu bushada kula noolaanayo.

Ilmaha hadba waa sida aad ka dhigto uun buu inta badan noqdaa iyada oo ay jiraan wax saamaynaya sida deegaanka iyo saaxiibbadii sidaas oo ay tahay waa laga gartaa akhlaaq wanaagsan haddii uu ku soo barbaaray iyo haddii kaleba, waayo wax uu ilmuhu la shirtagaa wax uu gurigooda kala yimi.

Waa kuma la barbaariye?

La barbaariye waa ilmaha yar ee dhashay ama dhalan doona, sidii aad noloshiisa u dhisi lahayd una gaadhsiin lahayd halka u saraysa; si uu ula jaan qaado adduunka cusub ee la keenay. Noloshiisa cusubna aad uga dhigi lahayd mid uu liibaan iyo nolol fiican ugu noolaada adduunka iyo aakhiradiisaba.

Ilmaha yar waxa lagu timaami karaa sidii quraarad oo kale, oo u baahan in laga ilaaliyo in ay jabto ama uu dhaawac soo gaadho. Wixii lagu shubana waa laga dhex arkaa, akhlaaqad fiican ee aad ilmaha ku tarbiyadayso ama xun uun baa beri ka maalin oo ka dhex muuqanaya.

Sidoo kale ilmuhu wax uu la mid yahay geed yar oo soo biqlaya; ama soo koraya oo kale, oo u baahan in sifiican loo waraabiyo lagana warhayo mar walba xaalkiisa oo laga ilaaliyo qallooca iyo in uu si xun u koro. Sababta oo ah hadaad is tidhaahdo toosi isaga oo wayn wuu jabayaa, taasi wax ay tusaale fiican u tahay in ilmaha inta uu yar yahay sifiican loogu tarbiyadeeyo wanaagga, waayo marka uu waynaado matoosin kartid ama sidii ugu habboonad ma noqonayo hadhow.

Maxaa yeelay wuu gahaydhay (adkaaday), midhahaba lama cuno markay gahaydhaan, intay curdinka yihiin ayaa la cunaa oo ay macaan yihiin. Soomaaliduna wax ay ku maahmaamdaa “laf jabtay sideedii ma noqoto” waa run haddii ay laftu mar jabto sideedii ha ugu soo hagaagin.

Sidoo kale haddii ilmaha barbaarintu ka xumaato in aad marka uu waynaado toosisaa suurto gal ma aha. Sidoo kale ilmaha yari wax uu la mid yahay sidii waraaq cad oo u baahan ama diyaar u ah in wax lagu qoro, ogowna oo hadhow wixii aad ku qortay uun baa laga akhriyayaa.

Haddaba hooyada iyo aabbahu ha oggaadaan in ay ka masuulyihiin tarbiyaddiisa waana waajib saaran. Waana in lagu barbaariyo ilmaha yar wax kaste oo wanaagsan. Waa in la baraa diinta, naxariista, ballan fulinta, run-sheega, cafiska, samirka, wax akhriska iyo caawinta bulshada taagta daran iwm.

Madaama oo hadhow laga arkayo qofku wax uu ku soo barbaaray marka uu waynaado, Waa in ilmaha laga dhex arkaa jacaylka uu u hayo diinteena suuban ee islaanimada.

Qiso dhacday xilligii uu Cumar bin Khadaab amiirka u ahaa umadda islaamka.

Wakhtigii Cumar binu Khadaab “RC” uu xukunka islaamka hayay, ayaa saddex qof wax ay hor keeneen Cumar nin dhallinyaro ah: “Cumarroow ninkan wax aan rabnaa in aad noo qisaasto waxa uu dilay aabbahayo.”

Cumar baa ninkii ku yidhi: “maxaad u dishay aabbahood?!” Ninkii wax uu yidhi: “wax aan ahay nin geeljire ah; oo geel iyo ari ayaan meel daajinayay, neef geel ah oo ka mid ah kuwayga ayaa waxa uu daaqay geed ku yaalla dhul uu leeyahay. Odaygu dhagax ayuu qaatay markaas buu ku dhuftay neefkii geela ahaa, wuuna dhintay, aniguna isla dhagixii baan qaatay oo ku dhuftay markaasuu isna dhintay.”

Cumar baa ku yidhi: “haddaba wax aan kugu qaadayaa xadka.” Ninkii baa yidhi: “saddex casho isiiya, waayo aabbahay ayaa dhintay, wax uu nooga

tegay hanti, aniga iyo waalaalkay oo iga yar, haddii aad i disho hantidaasi way lumaysaa.”

Cumar baa ku yidhi: “yaa ku damiinanaya?” Ninkii baa eegay wejiyada dadka joogay goobta markaas buu yidhi: “ninkaas”, oo farta ku fiiqay saxaabigii weynaa ee Abuu Dar. Cumar wax uu yidhi: “Abuu Dar, ninkan ma damiinanaysaa?” Abuu Dar waxa uu yidhi: “ Haa, Amiirkii mu’miniintoow.”

Cumar waxa uu yidhi: “adigu ma taqaanid, haddii la waayo adiga ayaa lagugu qaadayaa xadka(dilka)” Abuu Dar baa yidhi: “aniga ayaa damiinanaya amiirkii mu’miniintoow.” Ninkii waa la fasaxay, wuuna baxay, saddexdii maalmood waa dhammaadeen, dadka oo dhan wax ay u cabsoonayaan Abuu Dar, si aan loogu qaadin xadka(dilka).

Haddaba wax uu waqtigu isguroba waxa la gaadhay xilligii ay qorraxdu dhacaysay, oo Abuu Dar ayaa la sugayaa in xukunka lagu fuliyo ileen ninkii lama hayee. Balse mar alle markii goortii ay qorraxdu dhacayso oo ay maqrib tahay ayaa waxaa meel aad u fog, oo saxare ah ka soo muuqday ninkii la wada

sugayay isaga oo uu ka muuqdo daal iyo safar dheer oo uu soo galay.

Wax uu soo hor istaagay amiirkii mu'miniinta ee Cumar binu Khadaab "RC" isaga oo odhanaya: "wax aan u dhiibay hantidii iyo walaalkayba abtiyaashiis. Haddana waan kuu imid si aad iigu qaadid xadka (dilka), amiirkii mu'miniintow!"

Cumar wuu yaabay! Wax uuna su'aalay ninkii: "maxaa ku soo celiyey? Waxa suurtagal ahayd in aad baxsato." Ninkii baa ku jawaabay: "Waxa aan ka baqay in la dhaho dadka islaamka ah dhexdooda waxa ka dhammaaday oofintii ballanta."

Cumar wax uu haddana su'aalay Abuu Dar oo uu ku yidhi: "maxaad u damiinatay ninkan, adiga oo aan wax aqoon ah u lahayn Abaa Dar?" Abuu Dar wax uu ku jawaabay: "wax aan ka baqay in la dhaho dadka islaamka ah dhexdooda waxaa ka dhammaatay khayrkii iyo naxariistii."

Intaas ka dib waxaa qisada layaabay wiilashii aabbahood la dilay oo wax ay yidhaahdeen: "waanu cafinay ninkan, waxna uma qabno." Cumar ayaa mar

kale su'aalay wiilashii oo ku yidhi: "maxaa sababay oo aad u cafiseen ninkan aabbihiin dilay?" Wiilashii ayaa ku jawaabay: "waxa aan ka baqanay in la dhaho dadka islaamka ah dhexdooda waa ka dhammaaday cafiskii." Cumarna markaa waa ooyay!

Sheekadana wax ay ku tusaysaa qofka wixii lagu barbaariyo uun buu ku dhaqmaa hadhow, oo laga arkaa marka uu waynaado .

Sheeko ka dhacday wadan ka mida waddamada Yurub.

Waxaa ka dhacay dal ka mid ah dalalka Yurub, gabadh yar oo ku barbaartay qoys wanaagsan oo carruurta lasiiyay barbaarin fiican. Gabadha way is asturi jirtay dhar asturana way xidhan jirtay.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa macallimadii wax u dhigi jirtay oo gaalo ahayd, ku tidhi: "waa in aad iska soo bixisaa dharkan oo aad isa soo qaawisaa."

Kadib gabadhii yarayd ayaa ku soo laabatay gurigii iyada oo murugaysan oo wejigeeda laga dareemayo,

hooyadeed oo ahayd hooyo fiican oo ah hooyo lasaaxiib ah gabadheeda oo u sheegta wax kasta oo ay lasoo kulanto, ayaa ku tidhi: “hooyo maxaa ku helay ee aad la murugoonaysaa?”

Gabadhii yarayd oo hooyadeed ku kalsoon ayaa ku tidhi: “hooyo macalimaddii ayaa igu tidhi maryaha iska soodhig.” Hooyadii baa ku tidhi: “hooyo ma waxa aad maqlaysaa illaahii ku abuuray, mise wixii uu Rabbi uu abuuray?”

Gabadhii yarayd oo kalsooni ka muuqato ayaa tidhi; “may, waxa aan maqlayaa oo aan addeecayaa Allihii i abuuray.” Subixii danbe ayay ku tagtay iyada oo dharkeedii wadata dugsigii. Macalimaddii ayaa xanaaqday oo qaylisay oo tidhi: “ima maqlaysid miyaa?, oo dharkii baad weli xidhan tahay.” Gabadhii yarayd ayaa oyday oohin aad loola yaabay oo aamusi wayday.

Kadibna macalimaddii ayaa u timi oo ku tidhi: “maxaa ku helay?” wax ay ku tidhi: “ma waxa aan addeecaa oo maqlaa Allihii i abuuray oo sidaa ii abuuray mise waxa aan addeecaa Alle wixii uu abuuray ee uu gacantiisa ku abuuray?”

Macalimaddii way yaabtay wax ayna ku tidhi: “waxa aad addeecaysaa kii ku abuuray.” Wayna ku islaamtay macalimaddii isla goobtii ayaa tawxiidka loogu qabtay. Marka qofka yari waa wixii aad ku barbaariso uun iyada oo Alle lala kaashanayo.

Dhinaca kale waxa aad arkaysaa marka qurbaha la joogo ciyaal la odhanayo iyaga ayaa waalidkood soo dacweeyay, kadibna ilmihii ayaa laga qaaday.

Barbaariye waa kuma?

Barbaariyuhu waa qof uu ilmuhu ka agdhow yahay markaas uu ku jiro xaaladda barbaarineed, oo ay ugu horeeyaan hooyo iyo aabbo, ayeeyo, abti, adeer, eeddo, habaryar iyo awoowe. Intaba wuu noqon karaa. Qofka wax barbaarinaya waxa laga rabaa waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin:

- 1) **Aqoon:** in uu yeesho qofka wax barbaarinayaa cilmi diimeed, mid barbaarineed iyo mid maadiya intaba. Haddaba hooyada iyo aabbaha aqoonta lihi wax ay soo saaraan jiil qurux badan; sababta oo ah ilmaha ayaa wixii uu waydiiyo cilmi diini ah ama maaddi ah way uga jawaabaan si uu ku qanco. Cilmigu muhiim buu u yahay waalidka wax barbaarinaya, waayo hooyo iyo aabbo jaahiliin ah waxba ma barbaarin karaan.
- 2) **Awood:** waa in ay jirtaa awood jidheed, maskaxeed iyo muruqba oo uu ilmaha ku barbarin karo. Waayo go'aamada uu qaadanayo xilligooda waxay qayb

muhiim ah u tahay ilmaha. Barbaarinta ubadka waayo waxyaabo badan ayuu kaaga dayanayaa ilmahaagu yaanu kuu malayn qof waxkasta la marsiin karo..

3) **Aamin:** waa in aad markasta amaano iyo run-sheegga leedahay waayo ilmaha yari barbaariyaha ayuun buu ku dayanayaa, waxkasta oo aad amartidna haddaanu adiga kugu arkin adiga oo samayn waxba kaa dhegaysan maayo ilmuhu. Tusaale haddii aad ku tidhaahdo; aabbo qaadka iska daa adiga oo adigu cunaya, dee muxuu kaa maqlayaa hore ayaa loo yidhi “awrka danbe awrka hore socodkiisa ayuu leeyahay” markaa adiga hakaa arko ilmuhu ficilka wanaagsan.

4) **Naxariis:** naxariistu wax ay fure u tahay in ilmuhu sifiican u qaato barbaarinta wanaagsan. Waayo Nebigu (NNKH) weligii ilmayar gacan uma qaadin. Bal naxariistaa fiiri; qiimaha naxariistu leedahay ayey ku tusaysaa, waa kii markale Rabbi lahaa “hadii aanad naxariis lahayn way kaa kala carari lahaayeen oo agtaadana way ka fogaan lahaayeen.”

U naxariiso ilmaha yar oo tus jacayl iyo maxabbada aad u hayso ilmaha waa in aad naxariis u muujisaa. Marwalba maca kuwa aanad dhalin sida aynnu ku

arki doono hooyadan cajiibka ah qisadeeda oo aynnu soo qaadan doonno.

Hooyo u dhalatay dalka sucuudiga ayaa waxa shaqaale loogu keenay haweenay u dhalatay waddan ku yaala isla qaaraddaas. Gabadhu xilliga ay suuliga ama xamaamka gasho ayey aad ugu raagi jirtay.

Hooyadii loo shaqaynayay ayaa u fiirsatay; garanna wayday xaalka haweenaydan, ilaa ay muddo ka aamusnayd ayna wayddiisay markii ay muddo kasoo wareegtay, ayaa markii gabadhii ay suaashay sababta ay suuliga ugu raagto mudada dheer? Way oyday muddo ayay ooyaysay iyada oo aan jawaabin. Hooyadii loo shaqaynayay ayaa garatay in dhib ay haysato gabadhan.

Markii ay oohintii joojisay ayay tidhi: “waxa aan ahaa hooyo umulanaa afar casho markii ay safaaradda wadankayagu ila soo hadashay iina sheegtay inay shaqo iiga soo baxday waddanka sucuudiga, halkaas oo aan mar hore gaystay CVga shaqada lagu raadsado, markaas baan soo baxay si aan uga faa’iidaysto fursadda maadaama anan muddo shaqo helin, sidaas awgeed baan ugu raagaa suuliga oo wax aan iskaga

lisaa caanaha naasahayga buuxdhaafiyay ee aan ka soo irdheeyey ilmahaygii.”

Hooyadii loo shaqaynayay oo aad u naxariis badnayd ayaa damqatay una naxariisatay oo u diir naxday ilmaha yar ee dhowrka maalmood jira ee hooyadii baahidu kasoo irdhaysay, kadib bay ku tidhi gabadhii: “wax aan ku siinayaa labada sanno ee aad jaqsiinaysay wixii aad ku noolaan lahayd, mushaharkaagii, lacagta aad ku safrayso iyo shaqadaada oo aad usoo noqon doonto labo sanno ka dib, noqo oo ilmahaaga soo jaqsii, labo sanno kadibna igu soo noqo.”

Hooyada loo shaqaynayay wax ay qabtay cudurka cancerka oo meel walba la mariyey oo waxba laga qaban kari waayey oo dhakhtar kaste uu ku dhaho waad u dhimanaysaa.

Muddo bil ah markii ay sii maqnayd haweenaydii ayay hooyadii loo shaqaynayey caafimaaday markaasay dhakhtar u tagtay loona sheegay in ay cudurkaa ka bogsatay. Bal u fiirso fadliga illahay; kaas oo ay ku heshay naxariista ilamaha yar ee aanay dhalin ay u gashay iyo sadaqadda ay alle dartii ula

baxday baa ka kaxeeyey cudurkii ay muddada dheer la daala dhacaysay.

6) Caddaalad: ubadkaaga **u** caddaalad samee oo sin ubadkaaga. Tusaale ahaan haddii aad siinayso mid \$1 inta kalena wada sii sidaasay ku jirtaa cadaaladuye. Nebigu (NNKH) wax uu yidhi: “ubadka sima oo u caddaalad sameeya” waad kale jecleen kartaa waayo qalbiga ma maamushid adigu, ubadkuna iyaga ayaa iskaa kala jecleysiiya, laakiin haw muujin ubadkaaga in aad kala jeceshay.

Tusaale ahaan haddii aad mid markasta aad u muujiso weji farxad leh waa caddaalad darro, markaa dhammaantood la farax oo laqaybso waxkasta oo ay qabaan. Sidii qisadii nebiyulaahi Ayuub carruurtiisii ayaa tusaale kuugu filan. Soomaalidu wax ay leedahay dhaqan iyo caado xun oo ay is ticmaasho oo in ilmaha ugu yar ama guridanbayska loogu jecel yahay reerka, oo isaga wax walba kooto loogu xidho, oo waxay indhahaagu qabanayaan qof yaroo wax walba ku haysta kuwii ka waynaa, hooyaduna waxay leedahay uun hooyo sii wuu kaa yaryahay e. Waa in ubadka qof

kasta waajibkiisa loo sheegaa oo lagu yidhaahdaa u daa walaalkaaga wayn wixiisa, runtii waa dhaqan aan fiicnayn, wuxuu sidaa ku baranayaa in uu isagu wax walba uu leeyahay, marka lageeyo melaha carruuraha lagu ciyaarsiiyo ee qurbaha wax ay indhaagu qabanayaan dhaqankii oo uu qofkii yaraa layimi meesha oo ciyaalkii meesha joogay wax walba ku qabsanayo, gabadha meesha joogtaana wax ay leedahay malihid, laakiin waa wuxuu ku soo barbaaray oo uu ilaa intuu yaraa lagu soo rabeeyey in uu sidaa yeelo.

Waxa kale oo ay isticmaalaan soomaalidu dhaqan kale oo in ay kala godbaan wiilasha iyo hablaha oo ay wiilka inanta ugu shaqayso sidii boqor oo kale. Taasi waa dhib ka jirta soomaalida dhexdeeda, waayo waa isku mid wiilka iyo gabadhu oo way u siman yihiin wax walba, markaa in wiilka inanta laga saraysiiyaa sida marka wax loo iibinayo ama wax lasiinayo waa caddaalad darro.

Xilligii nebigeena ayaa ninbaa u yimi nebi Maxamed markaas buu ku yidhi: “wiilkayga hebel ayaan siinayaa hantida intaa leeg.” Markaas buu nebigu ku

yidhi: “kuwii kale ma siisay intan oo kale.” “may”, ayuu ugu jawaabay. Nebiguna waa ka diiday arrinkaa ninkaas. In aad ubadka aad dhashay aad u cadaalad samaysaa waa wajib ku saaran waalidow.

7) Samir: waa in aad waalidow ku samirtaa ubadka barbaarintiisa oo aad u dhabar adaygtaa, oo aad u samirtaa wixii kaaga yimaadda oo aanad ku degdegin natiijada kaaga soo baxda oo aad u samirtaa oo hadaad aragto isaga oo kaaga dhaga adayga ama sidii aad rabtay aan u tarbiyadaysmin.

8) Qof maskax badan: waa in aad noqotaa qof maskax badan oo aan ubadka ka maskax badnaan, oo aad si sarbeeb ah aad ula socotaa ilmahaagu hawlulhuu ku foogan yahay ama uu qabanayo hawdhowna aad u ogaysiisaa si aannu kuu dareemin in aad basaas tahay.

Wax aad hurtid baad heshaaye

Ogow hawl qabashadaada

Hadhow iyo nafeceeda

Hadaad geed hawd ku beerto

Haraadka intaad ka dhowrto

**Harada biyo uga dhurayso
Hoostiisa nadiifinteeda
Intaad haramayso maalmo
Hadana toostoosintiisa
Habeeno intaad u guusho
Hagaag ugu taag tidhaahdo
Hadhowbaad naaficiisa
Hadhkiisa intaad timaaddo
Adoo hoostiisa jiifa
Hadana hohobta iyo madheedhka
Midhaha soo hoobanaaya
Haraadkaad soo martiyo
Hamuunta ku reebtaa meesha
Humaagaa waxaa la cayna
Ilmaha hana qaadistiisa
Habkii loo soo barbaarsho**

Hadaad hana-qaadka guusha

Hadaaqiyo erayo barista

Hogaanka intaad u hayso

Jidkiyo hilinka u tilmaanto

Halyey lagu dhaato iyo

Hal-door buuxuu noqdaaye

U hiili intaanu heermin

By Abwaanad Faadumo Huruuse

Qaabka ugu fiican ee barbaarinta carruurta

- Waan in ay tahay mid waafaqsan diinta islaamka iyo dhaqanka suuban.
- Waa in ay tahay mid guud oo bulsho weynta ka dhexaysa.
- Waa in ay tahay mid koobsanaysa dhammaan dhinacyada nolosha oo dhan.
- Waa in ay tahay mid furfuran oo la jaanqaadi karta dhammaan duruufaha nolosha ku xeeran.

- Waa in ay tahay mid suurogal ah .
- Waa in ay tahay mid ilmuhu fahmi karo kuna dhaqmi karo.
- Waa in ay tahay mid wanaaggu ku badan yahay oo aan qofka xumaan lagu tarbiyadayn.
- Waa in uu bulsho waynta ku dhex noolaan karo.
- Waa in waalidku u debecsanaadaa ilmaha.
- Waa in xidhiidh fiican ka dhexeeyaa.
- Ilmaha yar in lasiiyo mar walba hadal u qalma, xanaanayn u qalanta iyo qaladka qabasho u qalanta
- Waa in ilmaha aad siisaa kalsooni ku filan si uu waalidkii ula hadli karo.
- In ilmaha loo edbiyo si togan.

Barrbaarinta ugu wanaagsan ee ubadku waa in lamaraa dariiqii uu NEBI MOHAMED(NNKH) wax u barbaariyay in loo barbaariyaa lana maraa dariiqiisii.

Ubadka waa in laga dhisaa dhinac walba oo noloshiisa ah. Waa in labaraa akhlaaqda wanaagsan iyo ku dhaqanka diinta islaamka. Ubadku waa hantida islaamka haddii si aan habboonayn wanaagsanayn loo bar-baariyo, dhibaatooyin badan ayay keenaysaa oo dhinac kasta oo nolosha ka mid ah.

Waa in ubadka aad ka saaciddaa dhinaca waxbarashada. Waa in aad ubadkaaga la qaybsataa farxadda, ku abuurtaa jacaylkaaga, ka diinta iyo dalkaba. Far ubadkaaga wax ay diinta islaamku fartay. Waa in aad dareensiisaa in uu masuul yahay oo aad marmar talada reerka ka qayb gelisaan. Waa in aadan ilmaha ku korin cadaadis ee uu bartaa in wax layeelo waxna la diido, haddii kale kalsoonida ayaa ka lumaysa ku aamin waxyaabo uu masuuliyadda ku barto.

Qof kaste oo jiraa kolba sida ay u habaysanyihiin xagga dhaqanka iyo aqoonta labadaba waalid ayay carruurta ay barbaarshaan u kala dhanqan iyo ficil duwan yihiin wax ayna ku xidhantahay labada qof.

Wax uu **nebigu** yidhi (NNKH): “ku barbaariya ubadkiina salaadda, amra marka ay toddoba jir yihiin, ku garaaca marka ay toban jir gaadhaan, jiifkana ku kala geeya wiilasha iyo hablaha si dhaqankoodu u fiicnaado.” Bar ubadkaaga salaadda, soonka, sadaqada iyo caawinta dadka liita ee muslimiinta ah dareensii in uu yahay halyay u soo kacaya muslimiinta una sheeg in waajibaadyo badani sugayaan oo ka saaran umadda

muslimiinta ah. **Nebigu** (NNKH) isaga oo barbaarinaya midka mid ah asxaabtiisa kuwii ciyaalka ahaa wax uu ku yidhi: “marka aad cuntada cunayso; bismillaahi dheh, midigtana ku cun dhinaca ku xigtana ka cun.”

Waa in aad bartaa ubadka waxyaabaha wanaagsan. **Nebigu** (NNKH) waakii markale kulahaa wiil yar: “maku baraa kelmado; illaahay ilaali haku ilaaliyee, marka aad cid wax wayddiisanaysid alle waydiiso, marka aad cid magan gelayana alle magangal.” Ubadka waxa la rabaa in allohooda lagu xidho si ay kuu anfacaan adduun iyo aakhiroba.

Nebigu (NNKH) wax uu yidhi: “saddexdii sadaqatul jaariyada ah waxa ka mid ahaa; weled saalixa oo kuu soo duceeya marka aad dhimato.”

Gabay abwaan Faarax Murtiile oo ka hadlaya barbaarinta toosan ee ilmaha:

Quruumaha midoobay iyo dadka qaradaha buuxshay

Qoys iyo waxa lagu unkamay labo qof weeyane

Waxa qaarna qangaadh ka dhigay qaybna dib uriday

Waa in qeexday nolosha iyo in aan qalad kawaynan
Waa qaali awlaadu iyo qiime saayida e
Marna ubax qurxoon oo ishu qabato weeyaane
Marna waa qurub laga jaray quruun bermayso
Qoomam ka hadhaya Qalad iyo wareer laguma dhaqo
Qoys aad leediyo qorshe iyo waxa loo dhiga qodob ay raacaan
Qacda waaga ilmaha waalidkii qaylo hurinaayo
Oo hadal qadhaadh iyo afxumo laysu quudhaayo
Ilmo qaabaddaa lagu korshay oo qaxar ku waynaaday
Isaguna qalqaalu noqdaa laga qatoobaa
Ilmo qab lagu korinin oo aan qiimo lagu sheegin
Oo cay qadhaadh lagu bahdilay quuqle iyo liite
Naanays qariban loo baxshoo lagu qasoobaaye
Ilmo qaabada lagu korshay oo quudhsi laga buuxshay
Ilmo haduu qalad gayso waano loo qoraynin
Qunyarna aan wax loo sheegin qawda laga saaray
Ilme qaabadda lagu korshey oo ciil qanjaha buuxshey
Ilmo qalinka iyo buugga aan loo qorshaynin

Oo meesha uu qalad ka galo qayb fahansinin

Oo macalinkiiisii qawado oo khayrkii wada dhaafo

Isna tacab qasaarbuu noqdaa quus mid laga joogo

Umad yahay qor oo hubi waxay qirayso laabtaydu

Ilmo qaniya wuu dhali karaa qos hagaagsaniye

Mid qaribana wuu beerayaa kii qaloocaniye

Dhowr arrin oo dhaawaci kara mustaqbalka ilmaha:

1. In la caayo ilmaha:

Ilama haddii lacaayo isaga ama mansabkiisa wax wayn ayay u dhintaa waxa idhahaagu qabanayaan hooyooyin ilmahooda caynaya iyo weliba aabahood. Taasi wax ay saamayn balladhan ku leedahay ilmaha yar maskaxdiisa iyo arrimaha la xidhiidha mutaqbalkiisa nololeed. Qaar baad arkaysaa odhanaya doqon yahow ama aabbahaa waxaa ku same. Haddii aad xataa ninka ama islaanta is haysaan ama is furtaanba waa in ilmaha yar la dhowraa oo wixii dhaawacaya laga ilaaliyaa. Runtii marka aad ku celceliso wuuba noqonayaa shaki la'aan.

Hooyo ayaa la arkaa ilmaheeda uun leh goortii walba nacas baad tahay; marka wax uu noqday sidii ay ugu celcelinaysay, hadhow murugo ayuu ku reebay hooyadii markii ay ogaatay in ilmuhu hadalkeedii saamayn weyn masxadiisa uu ku yeeshay hadalkii ay ku odhan jirtay yaraantiisii.

2. In ilmaha intiisa hoos looga dhigo:

In aad ilmaha hoos uga dhigto waxa uu yahayna wax ay maskadiisa saamayn ku leedahay halisna uu ugu jiraan in mustaqbalkiisu uu dhaawac soo gaadho

3. In aad cid barbar dhigto:

Weligaa ilmahaaga cid ha barbar dhigin, waayo cidna isku mid ma aha qof kasta waxa la abuuray isaga oo ka duwan dadka kale, waxyaabo badan ayey ku kala duwanyihiin dadku; markaa ilamah haka doonin in uu la mid noqdo ilmayow kale, sida kuwa kale ee aad dhashay ama kuwa deriska kula ah.

Wax aad maqlaysaa hooyooyin leh; hebelbaa kaa fiican ama inan jaarka ayaa kaa fiican, adigu waa lagaa fiican

yahay arrintaa marka aad ku celceliso maskaxdiisa qaybta caqlubaadinka layidhaah ayaa la gaynayaa weligiina ka bixi maayo, hadhowana ficiladiisa iyo dhaqankiisa ayay ka muuqandoontaa, wax uuna noqon doonaa ilmo aan isku kalsoonayn oo dareemaya in laga fiican yahay oo laga caqli badan yahay wax aanad dhaawacday mutaqbalkiisa nololeed, weligiisna meel gaadhimaayo. Weligii waa laga horayn doonaa uun ileen wuu aaminsanyahay, wuunu ku soo barbaaray.

4. Jacayl shardi wata:

Ilmaha jacaylka aad u qabto shardi ha u yeelin. Wax aad arkaysaa hooyooyin badan oo isticmaalaya erayadan “hooyo waxaa ii keen waan ku jecelahay e.” ilmaha si aan shardi lahayn ugu sheeg in aad jeceshay, haddii kale wax uu aaminayaa in shaygan uun lagu jecelyahay oo aan isaga la jeclayn.

5. Macluumaad qalad ah in la siiyo:

Carruuta yaryari wax ay jecelyihiin markasta in ay su’aalo ku wayddiiyaan si ay u oggaadaan xogo ka qarsoon oo anay iyagu ogayn. Marmar wax ay ku

wayddiin karaan su'aalo aad la yaabto oo jinsiga ku saabsan, taas macnaheedu ma aha in ay qaldan yihiin ama edeb xun yihin, laakiin waa su'aalo maskaxdooda ka guuxaya oo ay u baahan yihiin cid u xalisa.

Hal yaabin hana xanaaqin, macluumaad qaldanna ha siinin, beenna ha u sheegin, laakiin suaalaha uga jawaab si xikmadaysan adiga oo ilaalinaya sida aad u dhigayso. Tusaale; waxayba ku wayddiiyeen oo kale aabbo ama hooyo maxay wiil iyo gabdho isku mid u noqon waayeen? Ama ay gabadhg iyo wiil u kala noqdeen? Marka hore isdeji hana ku nixin su'aasha si deganna uga jawaab. Metelan wax aad odhan kartaa gabdho hooyo ayey u egtahay halka wiilkuna uu aabbo u egyahay. Isku day mar walba in aad su'aalaha si xikmadaysan oo kalsooni ka muuqato uga jawaabto.

6. Erayga xun ku tidhaahdo:

Ilmaha oo aad eray xun ku tidhaahdaa ama aad u muujin waydo farxdda xilliga uu faraxsanyahay, wax ay dhaawac u gaysataa mustaqbalkiisa, wax ay hoos u dhigaysaa han uu lahaa, wax ay ka qaadi kartaa farxad uu ku jiray, u horseedi kartaa murugo joogto ah.

Aan idinla wadaago qisadan xanuunka badan. Wiil ayaa muddo dheer arki waayey aabbihii oo ku faraxsan. Ilaa muddo, wax uu ku dedaali jiray in uu mar uun aabbihii ka farxiyo. Wax uu isku deyay in uu jaamacadda kaalinta koowaad galo, si uu aabbihii uga farxiyo. Wax uu dedaalaba, wax uu galay kaalintii koowaad ee jaamacadda. Aabihii ayuu soo wacay isaga oo aad u faraxsan. “HALLOW! Aabbo, kaalinta koowaad ayaan jaamacaddii u galay.”

Aabbihii ayaa ku yidhi: “waan mashquulsan ahay, shir ayaan ku jiraa waa innoo markale.” Wiilkii maskaxdiisa ayay saamayn wayn ku yeelatay eraygaasi uu sida fudud afkiisa uga soo saaray ilaa uu nolosha ka dhacay, kuna biiray derbi jiifta iyo kuwa daroogada isticmaala ilaa maalintii danbe cusbitaalka la dhigay lana wayddiiyay waxa ku dhacay. Wax uuna ku tiraabay: “wax aanan la’ahay aabbo i garab taagan oo faraxaddayda jecel.” Wiilkii maalmo ka dib wuu geeriyooday. Halkaa eray ayaa sabab u noqotay geeridiisa. Hadalku waxna wuu noolayn karaa, dilli karaana ee hadal hala wanaajisto. Waxa aynnu kula

hadlayno ubadkeenana aynnu u fiirsano in uu dhaawac u gaysan karo iyo in kale.

7. Hanjabaad joogto ah:

Ilmaha ka ilaali markasta hanjabaada iyo waan ku dilayaa iyo sidaasaan kuu gelayaada badan, waayo wax uu ka qaadayaa kalsooni daro baahsan iyo cabsi badan ayaa soo wajahaysa ilmaha yar, marka danbe heer buu gaadhayaa in uu isagu dadka u hanjabo ama uu sameeyo oo uu dadka laayo, wax ay inta badan ilmaha ku abuurtaa in uu wax walba ka cabsado idhuhu waa lagu maagi.

8. In ilmaha wuxuu jecelyahay loo diido:

Ilmaha yar ha u diidin waxa uu jeclaado waayo haddii kale wax uu u mari doonaa sifo ama talaabo aanad mahadin doonin, ilmaha waxaa fiican in aanad wixi aan qalad ku ahayn diinta in aad u oggolaato laga yaabee macal haddii aanu ku maqli jirin in uu ku jeclaado, waxa uu jecelyahay awgiis, aynnu siinta amar joogtada ah.

9. Inla habaaro ilmaha:

Ilmahaaga ha habaarin waayo ma ogid in samadu furan tahay oo lagaa aqbalayo hadhowna aad ka qoomamayn doontid. Ilmaha u ducee macal haddii uu ku dhibo waa laga aqbalayaaye, in alle soo hadeeyo ayaa badane, allena waa ka qalbiyada dadka gedgediya ee marba si ka dhiga.

Qiso yar ayaynu ka tibaaxi doonaa oo dhacday habaarka. Wiil ayaa ka warramaya walaalkii. Wax uu ahaa walaalkay aan tukan aabbahayna aan maqlin, aabbana waa habaari jiray marwalb,a aad ayuuna u necbaa. Wax uu ku odhan jiray: “ilaahayow ha i dilin aniga oo aan arag wiilkayga oo uu gaadhi madaxa ka maray.” Oday caalim ah oo aanu daris nahay ayaa markasta waanin jiray walaalkay.

Maalmihii danbe wax uu noqday mid baariya oo ka wanaagsan carruurtii kale oo dhan, aabbana aad buu u jeclaaday, halkii uu markii hore aad u necbaa, wax uuna inta badan u adeeggaa aabbo oo waayeel ahaa. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa walaalkay salaaddii subax soo tukaday. Wax uu kaxaystay gaadhigiisii. Gaadhigii ayaa ciladi ku timi. Wax uu doonay in uu

hagaajiyo, wuxuuna isku deyay in uu xagga hoose ka galo, amarka rabi iyo habaar waalid midna ma hadhaan e, wiilkii gaadhigiisii ayaa ku dhaqaaqay oo madaxa ka maray. Waa habaarkii aabbihii isaga oo ashahaadanaya ayuu dhintay!.

Waxaa warkii la gaadhsiiyay aabbihii oo markii loo sheegay si xun u naxay oo aad u murugooday oo ooyay, kana qoomameeyay habaarkii uu wiilkiisa habaaray. Maxay se qoomamo maanta u taraysaa? Waa waxba! Ilmaha in la habaaro si kasta oo uu u dhib badan yahay waxa ka fiican in aad u ducayso rabbina waa kii quluubta rogroga.

10. In aan ilmaha la dilin mar walba:

Ilmaha xalka u danbeeya ee dawo lawaayo waa in ilmaha la dilaa, marka natiijo kale la waayo uunbay suurogal tahay inta kale maya. Aynnu eegno sida aad ilmaha u ciqaami karto, inta aanad dilin ka hor.

- B) Wax uu jecel yahay in loo diidaa marka loo digo ee uu mar labaad ku celiyo waa loo diidaa.
- T) Wax la siin lahaa in laga joojiyo.
- J) Wax ilmaha kale la siiyay in aan isaga la siin marka aad ilmaha ciqaabayso waa in uu sababta garanayaa,

marka u horaysa ee uu qalad sameeyo waa la waaniyaa.

X) Wax aad kale oo ku ciqaabi kartaa in qaladkiisa loo sheego oo aan laga aamusin ee marka hore loo sheego marka saddexaad ee uu ku dhaco qaladkii waa in la ciqaabo oo aan wakhtigeeda la dhaafin, waayo wuu ilaawayaa hadhowna magaranayo sababta waxan loogu samaynayo wuuna is ciilkaan biyayaa maxaa lagu ciqaabayaa tolow ayuu is waydiinayaa.

KH) Ciqaabta iyo abaal gudka waa in la is barbar dhigaa u sii sheegtaa si uu u ogaado haddii aad waxaa samayso waxaas baan ku siin haddii kale ciqaabtaas.

D) Tilmaan ilmaha yar waa in aad ilmaha gacmaha iyo farta ugu fiiqdo, metelan marka uu fagaare qalad ku sameeyo oo kale, waa in uu wejigaaga ka fahmaa qaladka uu sameeyay. Ma habboona in fagaaraha ilmaha lagula hadlo ama lagu canaanto.

R) Sax marka uu qaldamo ilmaha yari ee uu khalad ku dhaco.

S) Ha ciqaabin ilmaha marka uu illaawo ka dib sababta oo ah; ilmaha yari wuu ilaawaa khaladkii uu galay in yar ka dibba, hadii aad mar uu ilaawo aad ciqaabto

sababtuu garan waayi, wax uuna moodayaa in aad bilaa sabab ciqaabayso. Laakiin isla markaa uu khalad sameeyo ciqaab sida ugu habboon haddii uu wanaag sameeyana abaal mari.

Ilmaha maskaxdiisu way madhantahay sida xaashida marka aan waxba lagu qorin oo kale. Ma yaqaan waxaas baa saxa ama khalad ah, waxa loo bahanyahay waalidiintu in ay ugu gudbiyaan si qibradaysan ilmaha yar maskaxdiisa oo uu qaadi karo. Ciqaabta ilmaha haku badin waayo wax walba wuu samayn kolayba waa lagu ciqaabi ayuu leeyahay, markasta oo aad disho wuxuu ilmaha yari u samaynayaa wax walba badheedh kolayba waa lagu diliye sameee ayuu odhan. Khalad ay galaan hooyooyinku maantaba wax ay ku hayn ilmihii aabbo ayaa ku dili, marka uu yimaado. Ilmihii waa kaa aabihiiba sas ka qaaday, ileen umuu baran aabbo, laakiin wax uu u bartay in uu yahay mid wax dila uun. Waa kaa aabbihii ka fogaaday ee nacay.

Hooyooyinka waxa la rabaa in ay ilmaha si wacan u barbaariyaan waayo iyaga ayaa inta badan gacanta ku

haya oo ka warqaba xaaladdooda, aabayaashana waa in ay carruurta jeclaysiiyaan si xidhiidhkoodu u fiicnaado aabaha iyo ilmaha yar. Looma baahna aabbo iyo carruurtii oo kala fogaada ama kala dida, taasi wax ay dhib ku tahay aabbaha iyo ilmahaba. Isku day in aad toosiso ilmaha marka uu khalad ka dhaco isla goobtaa ku toosi, ha is odhan dib u dhig inta badan waayo wuu ilaawayaa.

Waxa ay indhahaagu qabanayaan waalidiin ilmaha ku garaacaya denbi uu shalay galay maanta, taasi waa khalad waayo isagu wuu ilaaway waxa aad ku garaacaysaba ma oga, wax uu moodayaa inaad bilaa sabab ku dilaysid. Waxa wanaagsan in aad xaliso wixii markaa xal u baahan oo aanad dib u dhigin, waa in aad waaniso marka uu khaldamo ha kula degdegin cigaabta badanka soomaalidu carruurta way garaacaan ama canaantaan, laakiin waxa fiican in ilmaha wax loo sheego in uu khalad yahay ama sax, laakiin isaga oo aan ogayn shaygan wuxuu yahay khalad, sax ama aan digniin la siiyo ilmaha, cigaabta waa in ilmaha aad uga dhigtaa badanka wax aan garaacid ahayn laakiin aad u diidaa wax uu jecel

yahay ama wax aad ugu balan qaaday in aad ka joojisid iyo wixii la hal maala.

Mar kaste oo aad ilmaha uga digto ama u sheegto wax khaldan, wax uu isku deyayaa in uu ka fogaado, haddii aad aragto in uu ku celcelinayo waa in aad ciqaab kale u raadisaa. Ciqaabtu ma aha garaacid oo keli ah, laakiin waa marka aad xal kale waydo oo aad ka fursan waydo. Haddii aad mar walba garaacdo wax uu ka sii qaadayaa cadaawad iyo in uu wax walba isaga oo og khalad in ay yihiin uu ku celceliyo, waayo wuu og yahay in kolayba la garaacayo.

Cutubka 2aad

Barbaarinta koowaad (xilliga guurdoonka)

B)Guurso qof diin leh:

Talada ugu horaysa ee barbaarinta carruurtu waa in aad marka horeba guursataa qof diin leh. Diintu waa waxa ugu muhiimsan ee qofka lagu doorto. Waxa farxad iyo xusid mudan doorka ay diinta islaamku ka qaadata barbaarinta ubadka, iyo halka ay iska taagtay. Ubadka oo sifiican loo barbaariyaa waa ahmiyad, mustaqbalka iyo rejada umadda islaamka ah.

Haddaba hooyo iyo aabbo waxa waajib ku saaran ah xaq uu ubadkaagu kugu leeyahay iyo dhammaystirka barbaarintiisa. Barbaarinta ubadku wax ay ka bilaabmataa xilliga uu ninku guur doon yahay ama gabadhuba. Soomaalidu wax ay tidhaahdaa “wiilkaagu mar buu hiil kaaga baahan yahay oo ah mar uu hooyadii dooraynayo gabadhuna dooranayso aabbahood” taasi wax ay tusaale u tahay waalidka wanaagsani waxa uu si buuxda uga qayb qaataa soo saarista jiilka wanaagsan ama ubadka wanaagsan.

Xilliga guurdoonka dadku ahmiyad badan masiiyaan doorashada hooyo wanaagsan ama aabbo wanaagsan, kamana fikiraan ubadkooda mustaqbalka aayahooda

guurkana inta badan kama fiirsadaan, waxa keliya ee ku xisaabtabtamaan sidaad u guursan lahayd. Gabadh qurux badan ama nin lacag leh taasi ma aha in aad ka fikirtay ubadkaaga aayahooda ee waa dantaada. Quruxduna ma aha ta korkaaga ka muuqata waayo berri markaad gabowdo way dhammaanaysaa laakiin quruxda dhabta ah ama rasmiga ahi waa dabcigaaga wanaagsan iyo la dhaqanka wanaagsan ee dadka dhexdooda aad ku joogtid. Waxa la yidhaahdaa “quruxdu waata ka hoosaysa qolofaada sare.”

Quruxda runta ahina wax ay soo baxdaa marka aad qof la dhaqanto oo aad is dhex gashaan. Lacagtuna waa shay marna la helo marna lawaayo, waayo waa adduunyoo maalina adiga ayaa haya maalina dadka kale, shay kasta oo dhammanaya lama yidhaahdo waa qurux ama wax wanaagsan wixii waara uunbaa qurux ah. Ka fikir ubadkaaga mustaqbalkooda iyo hooyo caynkee ah ayaan u dooraa ubadkayga is wayddii taas xilliga aad guurdoonka tahay.

NEBIGU wax uu yidhi (NNKH) “AFAR ayaa dumar lagu guursadaa; maalkeeda, quruxdeeda, mansabkeeda reerka ay ka soo jeedo iyo diinteeda.

Dooroo ayuu yidhi nebigu ta diinta leh gacantu ku go'adaye." Dooroo xaas ku dhaqmaya mabaadi'ida islaamka, wuxuu maalinta ugu horaysaba kula aasaasayaa guri ku dhisan diinta islaamka, ilmuhuna dhaqan xumo kama baranayaan. Hooyo fiican oo aad ubadkaaga u doortaa wax ay ka qayb qaadanaysaa barbaarinta carruurta.

Nebigu waxa kale oo uu yidhi (NNKH): "haddii uu idiin yimaaddo nin diin iyo akhlaaqdiisu idin raaligeliso u guuriya hablihiina."

T)Xulashada lammaane wanaagsan:

In aad xulato gabadh wanaagsan wax ay qayb ka tahay in ilmuhu sifiican u barbaaro. Waayadii hore guurka waa la hida raaci jiray, gabadha la rabo in la guursadana muddo aad u dheer baa la baadi goobi jiray si loo helo gabadh fiican. Gabadhuna sidoo kale iyana sidaa uun bay ahayd, waa tii ay lahaayeen, "NAADHUDIYEEY DHAR LAMA RAACEE RAGGA WAA LA DHUUXAA DHUDHUMADAA LA JEBIYAA NINKII DHALADA AYAA LA RAACAA."

Markaa labada dhinacba wax ay door bidi jireen sidii ay u heli lahaayeen qof nolosha la wadaaga oo u qalma. NEBIGUNA waa kii lahaa: “dumarka afar ayaa lagu guursadaa diinteeda, quruxdeed, nasabkeeda iyo xooleheeda” wax uu yidhi: “gacantu ku go’adaye guurso ta diinta leh.” Xagga ragga haddii aynnu jaleecno waa kii NEBIGU lahaa: “haddii uu idiin yimaaddo nin ay idin raaligeliso aqlaaqdiisa iyo diintiisu u guuriya gabdhihiina.”

Haddii kale waxa dhacaya fasaad rabbi ha innaga badbaadiyee. Lama odhan maal ama xoolo uu leeyahay ku raaca laakiin waxa la xusay diin iyo akhlaaq, waa jicsinka u wanaagsan ee uu qof qaato adduunka dhexdiisa, waana lagu liibaana aakhiro iyo adduunba.

J) Hasaawaha ama shukaansiga:

Hasaawaha, shukaansiga ama sheekada guurka ka horaysa ee ay wadaagaan labada ruux ee doonaya in

ay guri wada yagleelaan waa in ay wanaajiyaan arrinkaas. Nebigu wax uu yidhi: “hasaawuhu ha noqdo mid cad sida laba qof oo wax kala iibsanayaa ay u wada hadlaan oo kale.” Waa in laga fogaadaa wax kasta oo u soo jiidaya xumaan labada ruux, guurkana waa in ay dedejiyaan si ay uga fogaadaan xumaanta.

Waa in aan haweenaydu hadal jilicsan ninka kula hadlin sidii uu alle yidhi kor ahaaye “ha jajebinana hadalkiina ama ha jilcinina si uu idiin damco kii qalbigiisu buko, kuhadla hadal layaqaano ama macruufa.” Markale alle waa kii uga digayey dumarka oo uu yidhi: “ in ay lugahooda dhulka ku garaacaan si ay u muujiyaan qurux dooda ku qarsoon.” Markale waa kii nebigu yidhi: “nin iyo gabadhi kuma keliyoobaan meel cidlo ah, ilaa shaydaanbaa ku saddex noqda.” Waxaa soo dhan halaga fogaado xilliga lagu guda jiro haasaawaha si uu guurkeenu u noqdo mid fiican oo ay ka soo baxaan ubad wanaagsan. Haddii aan ku yara noqdo haasaawihii hiddaha iyo dhaqanka aynnu u lahayn ee soomaalida, wax uu ahaa runtii mid wanaagsan waayo wiilka iyo gabadhu isku may soo dhowaan jirin marka ay kulmaana geed ayay hareeraha ka kala mari jireen si

ayna ugu soo dhowaanin. inkaste oo aan amaanayn qaabkii meherkoodu ahaa ee ahaa in la is kaxaysto ama la is masaafaysto, wakhtigan lajoogo ee casri ku sheega ah waxaad mooddaa in uu haasaawuhu majarihii hore uu iska beddelay oo uu yeeshay wejiyo cusub oo faro badan oo aan lamahadin badan kooda.

Waxa kale oo batay fusuqii iyo xumaantii kolay taasina saamayn ayay ku leedahay, waana isbeddel adduunka oo dhan saameeyay, guurkii oo yaradayna kolay saamayn ayuu ku leeyahay isaguna. Waalidka waxa la rabaa ama qof walba oo dhallinyaro ah in ay sameeyaan wax wanaag ugu jiro mooyee waxkale aanay samayn, sidaas awgeed waa in haasaawaha la wanaajiyaa si uu guurkeenuna u hagaago oo ay u hagaagaan ubadkeenu si ay inoo anfacaan adduunka iyo aakhiroba.

Barbaarinta labaad (xilliga guurka):

Guurku waa nimco illaahay sharciyeeyay kaasoo la sameeyo marka labada qof ay heshiiyaan , labo qof oo

muslim ah kuwaas oo raba in ay is guursadaan. Guurka islaamku wax uu baneeyay in uu ninku guursan karo afar dumar ah gabadhuna ay guursan karto uun nin qudha. Guurku waa nolol run ah oo dhex marta labada qof ee is qaba.

Guurku waa sunaha anbiyada nebiguna (NNKH) wax uu yidhi “kulanka dhallinyarooy guursada, kiinii awooda biilka reerka ha guursado, guurku wax uu u laabid badan yahay aragga, wax uuna u ilaalin badan yahay xubinta taranka, kiinii aan awoodin in uu guursado ha soomo. Waayo wax uu u yahay dhufaan.”

Nebigu (NNKH) waxa kale oo uu yidhi “ waxa la i jeclaysiiyay dumarka (guurka xalaasha ah) iyo udgoonka.” Guurka waa in la badiyaa si umadda nebi Maxamed uga badato umaddaha kale. Guurka waa in la isku dhiirigeliyaa waana sune soo socday weligeed si aan ummadi u dabar go’in.

Barbaarinta ubadku wax ay bilaabantaa ilmaha oo aan calool gelin, wax ayna ku bilaabataa labada waalid oo ku ducaysta allow naga ilaali shaydaanka annaga iyo ubadkayagaba.

Inbnu-aadanka waxa saldhig u ah in uu waaro taranka. Si ay noloshiisu usii socoto waa in laga shaqeeyaa, tarankana waxaa saldhig u ah hooyo iyo aabbo caafimaad qaba. Guurka waa in loo maraa marin sax ah oo diinta islaamka waafaqsan.

Waalidnimadu wax ay bilaabantaa marka uu meherku dhaco, wadanoolaansha wanaagsan labada qof wax ay kobcisaa in ubadku sifiican u barbaaraan laakiin haddii labada qof marwalba ay is haystaan, murmayaan ama ay is dagaalayaan taasi wax ay caqabad ku tahay ubadka soo koraya. Waxay ku abuurtaa ubadka werwer iyo farxad la'aan marmarna wayba isku buuqaan waayo maskaxda ilmaha yari waa mid nadiif ah ama xariir ah.

In tartabiyadda carruurta oo hagaagtaa marka hore waa in la helaa qof wanaagsan, si qof wanaagsan loo helaana waa in marka hore la helaa qoys wanaagsan, markaasaa la helayaa bulsho wanaagsan, si loo badbaadiyo jiilalka dhalandoona waa in wax laga beddelaa labo arrimood oo kala ah:

a) habka la isu guursanayo.

b) habka loo barbaariyo carruurta.

Guurka muslimka waa saldhig u ah aayadda qur'aanka ah ee (20) ee suuratu RUUM oo alle sheegay in uu u dhaxeeyo labada qof xasilooni, jacayl iyo naxariis. Qoyskii intaa laga waayo dib ha isugu noqdaan waxbaa ka khaldan e. Barbaarinta carruurtuna waa in loo maraa hab waafaqsan diinta islaamka lana ilaaliyaa xeerarka barbaarinta carruurta iyo xaqooda.

Labada qof ee nolosha ku mataanobay waxa wanaagsan in ay barbaarinta ubadka ka leeyihiin hadaf cad iyo qorshe meel mara, waxaynnu taa u leenahay hadii labada waalid midba barbaarin kan kale ka duwan wato carruurta waxa ka lumaya majaraha waayo mid ay raacaan oo saxsan ma garanayaa, hooyadii iyo aabbihii hadaanay meel uga soo wada jeedin, laakiin haddii arinku noqdo ku xumayn midka mida ama labadooduba waa dhib.

Hooyo sidaas ma aha haddii ay tidhaahdo aabbuhuna dhaho sidaas weeye, waa qalad aan hadhow cidhibtiisa la mahadin doonin. Waa dhib ka jirta guryaha soomaaliyeed waana qaabdarrada iyo bilaa

shaqshaqa gudigoodu ku bilaabmayo marka u horaysa iyo waalidkii oo aan isaga laftiisu isku sanbannaanayn ama colaadiba ka dhaxayso.

Waxaa aasaas u ah guurka:

- Is fahanka labada qof waa halkay u dhimatay.
- In la is ku doorto diinta.
- In ay ogaadaan labada qof guurku in uu cibaado yahay.
- In ay dhisaan qoys daacadnimo iyo kalsooni hadhaysay laga dheeraado beenta, shakiga iyo wax is dabo marinta.
- In ay labada qof gartaan, mid kasta xaq ay isku leeyihiin oo mid waliba ka soo baxo xaq lagu leeyahay oo masuuliyadda uu qaaday sideeda uga soo baxo.
- In ay dhisaan qoys ku dhisan kalsooni iyo wadatashi oo aan qof uun amarka bixin.
- Waxa iyana jirta isku haboonida labada qof ee is guursaday, haddii ay is guursadaan labo qof oo kala barbarin duwan waxay caqabadda is fahanka labada isqaba, mid ku soo koray guri dhaqan wanaagsan,

jacayl, xishood, ixtiraam, sinaan ama cadaalad, garanayana xaq saaran iyo masuuliyada qoyska iyo mid aan intaa midna garanayn. Waxay caqabad ku tahay is fahankooda iyo habka ay carruurta u barbaarinayaan, guriga cusubi wuxuu ku salaysan yahay dhaqankoodu tarbiyaddii ay gurigoodii kala yimaaddeen.

Berigii hore dadku way tijaabin jireen gabadha uu ninku soo guursaday waayo ninba ninkuu ka gabadh fiican yahay ayuu ka wanaagsan yahay, horaa loo yidhi “ **nin kaa socod horeeyana maalin ma gaadhid, nina kaa faras fiicana sannad ma gaadhid, nin kaa gabadh fiican na weligaaba ma gaadhid**”

TUSAALE: beelo meel wada degan ayaa doonay in nin boqor u cimaamadaan, ka dibna waxa la tilmaamay in saddex nin oo beesha ka soo jeeda beelaha in mid uun laga dhigo boqor, kadibna waxa lagu tashaday in la tijaabiyo nimankii, tijaabadii ayaa bilaabantay iyaga oo aan ogayn kadibna saddexdii nin ayaa loo sheegay in ay beelaha u sahan tagaan meel aad u fog oo reeraha loo raro ayna is raacaan ayna soo noqon ilaa ay soo helaan meel reeraha loo

raro meelo kala fogna way yaaleen nimanku, kadibna habeenkii ayaa la is balansaday si la isu raaco, xilli horena ay tagaan saddex farasna way kaxaysanayaan, waagii ayaa beryay.

a) ninkii koowaad ee ugu gabadha fiicnaa waxay kacday saqdii dhexe si ay u diyaariso odaygeeda sahan tegaya, kadib wax ay u diyaarisay wixii uu sahay ka dhigan ama jicsinka lahaa, biyo kulula way u diyaarisay oo uu ku sii maydho iyo quraacdii wuuna soo anababa baxay wakhti hore si uu usii maro nimankii kale.

b) ninkii labaad gabadhiisii ayay isku mar kaceen, oo waxay sii siisay caano qabo oo baryooda mana sii siin wax jicsina ama sahay ah wuuna soo anbabaxay oo soo raacay ninkii kale.

c) ninkii saddexaad gabadhii waxa nimankii kale yimi iyadoo markaa kacday oo aan ninkeediina toosin, kadibna waa la toosiyay, wuu raacay isaga oo aan waxba cunin oo safraddii hayso, kadibna nimankii way is raaceen, markii xoogaa in badan la socday, ayaa ninkii aan soo quraacan socon waayey, nimankiina wuu u sheegay; iska taga ma tegi karee dibna wuu soo

noqday, markii xoogaa kale lasii socday ayaa ninkii labaadna socon waayey waayo waxaa ka baxay caanihii yaraa, isna wuu socon waayey dibna wuu iskaga soo noqday, ninkii saddexad jicsinkiisiina sitay ayaa sii socday gaadhayna meeshii loo diray soo noqday reerhiina raray oo geeyey meel barwaaqo ah.

Kadibna waraysi miidhan iyo isku tashi kadib isagii ayaa loo doortay in uu noqdo boqorka beesha, saddexdan dumar ah, waxa lagu magacaabay markaa in ay yihiin. “ **Iskeed u toosa, ninkeeda la toosa, iyo kaadideed la toosa**” gabadha wanaagsani ninkeeda iyada ayaa ragga ka reebta, ama asaagii ayay gaadhsiisaa ama way dhaafisaaba.

TUSAALE KALE: waxa jirtay hooyo dhashay saddex wiil. Saddexdii wiilba way guursadeen. Hooyadii way duqowday, waxayna qaadatay go’aan ah in ay imtixaan ka qaaddo saddexdeeda wiil si ay xoolaheeda iyo nafteeda ugu aaminto midka ku guulaysta imtixaankeeda. Wax ay ka bilowday midkii ugu weynaa. Wax ay timi xaafaddiisii, wax ayna la hoyatay habeenkii, aroortii ayay xaaskiisii ku tidhi hooyo

wayso ii keen, markii ay biyihii u keentay bay ku waysaysatay, ka dib intii soo hadhay ayay ku shubtay firaashkii ay xalay ku seexatay, ka dib gabadhii ay u yeedhay, waxayna ku tidhi: “hooyo gogosha waan ku kaadshay, waxaan ahay waayeel markaa iska dulqaado.” Gabadhii way canaanatay soddohdeed aad bayna uga xanaaqday, wax ayna ku tidhi: “mar danbe haku kaadinin gogosheyda!”

Hooyadii way baxday wax ayna aaday gurigii wiilkeedii labaad ee kii hore ku xigay, wax ayna samaysay intii ay gabadhii hore ku samaysay, waxay tan danbe dheerayd way ceebaysay oo wax ay u sheegtay ninkeedii, isaguna kama uusan xanaaqin oo ma canaanan.

Hooyadii way baxday waxayna aaday kii wiilasheeda ugu yaraa gurigiisii, wax ayna samaysay isla intii ay ku samaysay kuwii hore. Markii ay gabadhii u yeedhay ee ay ku tidhi: “hooyo waayeel baan ahay oo wax aan xalay ku kaadshay gogoshii ee raali ahaada”, ayay gabadhii ku tiri: “hooyo dhib ma laha, see kuugu xanaaqnaa immisaad nasoo koriseen, immisaan dhabtiina ku kaadshaynay, immisaad noo samirteen,

dhib ma laha hooyo gurigaagii iyo carruurtaadi baad la joogtaa.”

Haddaba hooyadii wax ay isugu yeedhay wiilasheedii, wax aynna u sheegtay in ay imtixaan ka qaaday saddexdooda, ayna heshay gurigii ay nafteeda iyo xoolaheeda ku aamini laheyd, waxayna hantideeda, dhibkeeda dhammaan ay ku wareejisay wiilasheeda midkii ugu yaraa, halkaas bay kuwii kalena ku baraarugeen fursaddiina ku dhaaftay hantidii hooyadoodna wiilkii ugu yaraabaa la wareegay. Wax aan ka qaadanaaynaa qisadan; ninka gabadh wanaagsan waa halka ragu isku dhaafay (NINKAA NAAG FIICAN WELIGAA MA GAADHID).

Aan soo qaadano gabaygii Abwaan Hadraawi ee habla geeska Afrika:

**Kuma galo adduunyada
Ninna goonisocodkoo
Marwo garasho dheer baa
Ninka rag ah u gudinoo
Iyadaa guddoonkiyo
Gadh-hayaa naftaadiyo
Gaadiidka reerkiyo
Gurgurshaaga noqotoo
Arrin kula gorfaysee
Haddaan gaari kula jirin
Illeen noloshu guul ma leh**

Meherka iyo aqalgalka:

Meherka:

Waa in meherku si sax ah u dhacaa si aad u hesho ubad xalaal ah oo ku anfaca adduunka iyo akhiroba. Wax aan kaaga digayaa waalidow in aad samayso meher aan waafaqsanayn shareecada islaamka, waayo ilmuhu haddii uu ku dhasho meher aan sax ahayn wixii aad ka filaysay kama helaysid marnaba. Ku dedaal waalid sidii aad u samayn lahayd meher xalaal ah si aad u heshid ilmo xalaal ah oo ku anfaca labada daaroodba (adduun iyo aakhiroba).

Meherka saxda ahi wax uu aasaas u yahay bar-baarinta wanaagsan ee ubadka, wax aad arkaysaa oo indhahaagu qabanayaan oo aad ka naxaysaa waalid lagu odhanayo, way is meher xadeen, way is ka xaysteen iyo carruur ku dhalatay bilaa meher ama sida soomaalidu u taqaano garac ah, waxaas oo dhami waa dhibaato uu gaysto waalidku oo saamayn balaadhan ku yeelata ubadka barbaarintooda iyo noloshooda danbeba.

Waakii **Abwaan haadraawi** lahaa :

Gocashada xanuunka leh

Wax aan uga gon leeyahay

Godob aabbo falaybaa

Ubadkiisa gocondhiyo

Gumar shidan ku noqotee

Gabi dheer ku dumisee

Ninka inan ma geydo ah

Golqaniin ku maalee

Gurrac kaga danaystow

Waxaad gaax sanaysiyo

Gashigaad cunaysiyo

Xumahaad galeysaa

Ruuxay ka go'an tahay

Gabadhaada weeyee

Gefka aad geysanaysaa

Galab kale ayaad ka sheekayn

Wax kasta oo aad samayso ilmaha cidhibtiisa danbe wax ay u tahay xumaan aad u sii kaydisay oo ka go'an noloshiisa, waalid kasta wax aan ku boorinayaa in uu ka fiirsado waxa uu samaynayo, isaga oo u tudhayo ilmihiiisa cawaaqibka kaga iman kara oo ilmaha dhaxalsiin karta xumaan, qofku intuu dhallinyaro

yahay waa in uu is dhowraa oo aanu dhayalsan xumaanaha uu samaynayo.

Bayd gabay soomaaliyeed ah ayaa ahaa: **“nin yaraan ku loo faray wuxuu lumiyay raacdee”** maahmaah soomaaliyeed ayaa iyana ahayd: **“ hadal aan fiirso loo odhan iyo caano aan fiiqsi loo dhamin feedhahaaga ayay wax yeelaan oo way kula fogaadaan”**. Kafiirso inta aanad falin waalid, oo ka feejignow waxa aad samaynaysid ubadkaaga wax mayeelayaan cidhib danbeedkooda waa in aad ka fekertaa mar walba oo aad maskaxda ku haysaa , meherku waa in uu noqdaa mid sax ah oo sida diintu qabtto si ka duwan waa in aanu u dhicin.

Aqalgalka:

Aqalgalka waa in shareecada islaamka la waafajiyaa, guriga haddii macaasi lagu dhiso ma hagaago. Si uu gurigeenu u noqdo mid tiirar adag ku taagan waa in aynnu ku dhisnaa diinteena suubani sida ay ina fartay.

Aqalgallada qaar ayaad arkaysaa, iyaga oo tumanaya ama samaynaya wax aan munaasib ku ahayn reerka cusub. Waa in labada qof marka ay guriga isugu yimaaddaan tukadaan laba ragcadood oo sune ah, ducaystaan oo ay alle ka baryaan in uu gurigoodu noqdo mid ay ku waaraan, ku nastaan, kuna negaadaan, ummad wanaagsan uu rabbi ka beero dhexdooda ducadii rasuulkana in aanay ilaawin ee ahayd “rabiyoow ka xijaab wixi aad nagu arsaaqdo shadaan.”

Gurigii la dhisayo waa in khayr lagu dhisaa iyo wanaag uun, guri kasta oo aan khayr lagu bilaabin inta badan ma waaro. Waxa fiican in reerka cusub loo duceeyo weliba waalidka iyaguna waan in ay ducaystaan, oo anay ku bilaabin wax macaasi ah qoyskaa cusub ee ay aasaaseen

Cutubka 3aad

Barbaarinta 3aad (xilliga uurka):

Hooyada uurka leh waa in mar walba lala socdaa xaaladdeeda caafimaad iyo nafaqaynta ilmaha uurka ku jira, waana xuquuq uu leeyahay ilmuhu marka uu uurka ku jiro, si aanay u soo wajihin dhibaato ilmaha ku timaada ilmaha oo ay ka midyihiin; in uu dhasho isaga oo aan dhammaystirnayn, ama ay soo wajahaan

cudurro kale sida dhiigkarka, iyo dhiig la'aan sababta oo ah waxa ay dhibi soo gaadhaysaa ilmaha uurka ku jira.

Waa in ay hooyadu la xidhiidho dhakhtar si loola socdo xaaladdeeda caafimaad iyo ta ilmaha uurka ku jira. Sida in la nafaqeeyo hooyada uurka leh oo la siiyo cuntooyinka barootiinka leh ama isku dheelitiran sida:

1. *Kalluunka.*
2. *Caano.*
3. *Ukunta ama beedka.*
4. *Baradhada macaan.*
5. *Khudaarta cagaaran.*
6. *Liin bambeelmada.*
7. *Digirta.*
8. *Yogur-ka dufanku ku yar yahay.*
9. *Canbaha.*
10. *Afakaadhada.*
11. *Muuska.*
12. *Tufaaxa.*
13. *Liin dhanaanta.*

Iyo dhammaan cuntooyinka jidhka koriya.

Si aanay hooyada u soo wajihin dhiig la'aan iyo nafaqo darro ba'ani, waa in ay hooyadu tagtaa xannaanada si xaalkeeda loola socdo iyo ta ilmaha yarba, waa in hooyada uurka leh xaalad kasta oo ay ku jirto loola socdaa si aad ah iyo ilmaha yar ee uurka ku jira, dhinac kasta waa in hooyada uurka leh loo daryeelaa lana caawiyaa marwalba.

Wax ay idhahaagu qabanayaan in aad aragto hooyooyin badan oo uurleh, oo dayacan dhinac walba xag caafimaad iyo nafeedba, la daalaa dhacaya nafaqo darro ku nool werwer iyo welbahaar. Saas looma baahna in ay hooyada uurka lihi ku noolaato.

Haweenka xilliga ay uurka leeyihiin kalluunka cuna waxaa la ogaaday in ay u dhow yihiin in ay dhalaan ilmo maskax badan oo bulshaawi ah.

Xilliga uurka waxa lagama maarmaan ah in hooyada ay cunto cuntooyin nafaqo u leh iyada iyo uurjiifka. Cuntada fudud ama ay ku badan tahay baruurtu ayaan haboonayn in aan la badsan xilliga uurka taas oo ay beddelkeeda ay hooyadu joogtayso cunidda miraha iyo cunooyinka ay ku badan tahay maadada faybarka. Midhaha ama khudaarta cagaaran ayaa faa'iido u leh hooyada iyo uurjiifka yarba

in ay ka hesho fitamiin iyo macdan ka caawinaysa in aan calool istaag ku dhicin hooyada oo ay inta badan ka cawdaan hooyooyinka uurka leh. Waxa kale oo habboon in hooyada uurka lihi aanay dareemin qalayl la xidhiidha biyo la'aan. Biyaha ayaa hooyada ka caawiya samaysanka madheerta kaasoo ay cuntada ilmuhu ka qaato wixii khashinana kasoo saarta, waxay kaloo biyuhu u wanaagsan yihiin koritaanka uurjiifka ah.

Hooyada uurka leh dhibka haysta maanta:

- Shaqo adag.
 - In ay ku nooshahay werwer iyo walbahaar nololeed.
 - Aqoon-darro ku saabsan caafimaadkeeda guud.
 - Xanuunno ku dhaca xilliga uurka ama ka hor.
 - Dhaqaaale xumo iyo nafaqa darro.
- Iyo dayac fara badan oo dhankasta oo noloshooda ka mid ah.

Wadhato ayay ku noolyihiin hooyooyinka uurka leh. Wax aad arkaysaa hooyo sedkeedii go'ay oo u shaqaynaysa qoys dhan taas oo ay keentay sababo badan oo ay ka mid yihiin hooyada oo haysata carruur agoon ah. Ama in uu qabo nin masuuliyaddii qoyska

dayacay ama in carruurta lagu soo furay oo ay keligeed ku tahay, oo ay maaraynayso wixii ay carruurtu quudan lahaayeen kuna noolaato nolol cidhiidhiya, ama wadata werwer iyo walbahaar. Haddaba isku soo wada duuboo, waxyeellada ugu weyn ee ilmaha soo uurka ku jira soo gaadhaa saddexda bilood ee ee hore oo ah xilliga ilmaha xubnihiisa muhiimnka ah ay samaysmayaan, marka laga reebo xanuunnada la kala dhaxlo, dhibaataada ugu weyn waxaa ilmaha uurka ku jira u gaysta daawooyinka hooyadu qaadata xilliga uurka ama cudurro ku dhaca xilliga uurka ama ka hor uurka intaanay yeelan, waxaanad inta badan arkaysaa carruurtii oo dhalanaysa, ilmihii oo soo qubta, ilmo mayda oo dhasha, mid aan dhammays tirayn ama ilmihii oo la kowsada xanuunno xun xun.

Hooyada uurka leh waa in ay ka fogaataa dhowr arrimood:

1. Cunto aan dheelli tirnayn:

Waa in hooyadu quudataa cuntooyin isku dheellitiran. Waayo, wax ay korinaysaa oo kobcinaysaa ilmaha oo hagaajinaysaa qaab dhismeedka ilmaha yar.

2. Duugista khaldan:

Waxa dhacda in duugis uu sameeyo qof aan wax aqoon ah ulahayn taasina wax ay sababaysaa in uu makaanka hooyada uu cadaadis ku yimaaddo oo fool aan xilligeedii gaadhin in ay dhacdo.

3. Sigaar cabista:

Sigaar cabistu wax ay keeni kartaa in ilmaha miisaankiisu hoos u dhaco, ogsajiinta oo ku yaraata, qaan gaadhis degdeg ah oo ilmaha ku timaada mustaqbalka. foosha oo xilligeedii ka soo horaysa, sabab u noqoshada ilmaha oo si sahlan daroogada u barta mustaqbalka, inkastoo aan sigaar cabistu soomaalida ku badnayn haddana xilliyadan danbe way soo kordhayaan.

4. Werwerka iyo walaaca:

Werwerka iyo walbahaarku wax ay sababana xaalad caafimaad darro oo soo wajahda hooyada iyo ilmaha

yarba khatarna u noqon karta in ilmaha yari uu cabsi ku noolaado markuu dhasho, hooyada oo ka qaada fikirka badan cudurro halis badan sida dhiig-kar, macaan iyo iwm.

5. Cadhada badan:

Cadhada badani waxay saamayn wayn ku yeelan kartaa hooyada caafimaadkeeda iyo ta ilmaha yarba. In hooyada dhiig-kar ku dhaco ayaa suurogal ah, ilmaha yarna mustaqbalkiisa saamayn ayay ku reebaysaa, laga yaabee in uu noqdo qof dabeecad kulul. Cadhaduna sideedaba ma fiicana waa kii nebigu xaddiiska kulahaa ” **hacadhoon**” saddex jeer. Alle waa kii yidhi “kuwa cadhadooda qarsadaa waxay ka mid yihiin kuwa Alle ka cabsada.”

Cadhaduna sideedaba waa camal shaydaan. Haddii aad cadhooto wax ay leedahay dariiq la iskaga baabi’iyo. Haddii aad taagnayd waa la fadhiistaa. Haddii aad fadhidayna waa la istaagaa. Xaaladaadu sidii ay ahayd baa la beddelaa waana la soo waysaystaa sida sunnada ku cad.

6. X-ray da:

X-ray-du wax ay ku keeni kartaa ilmaha yar ee uurka ku jira, in uu dhasho isaga oo aan dhammays tirnayn, hiddasidayaashiisii in ay khalkhalaan iwm.

7. Taagnaanta badan:

Hooyada uurka leh uma fiicna taagnida badan sababta oo ah waxa barar xad dhaafi ku imankaraa lugaha hooyada .

8. Jimicsiga faraha badan:

Jimicsiga badan ee hooyada ee ka badan 160 garaaca wadnaheeda wuxuu saamayn weyn ku yeelan karaa in ilmaha yar ay ogsajiintu ku yaraato isla markaana dhaawac xagga maskaxda ah soo gaadho ilmaha.

9. Wax culus in ay qaaddo:

Hooyada ma fiicna in ay culays xad dhaaf ah qaaddo wax ay sababi kartaa waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin in makaanka hooyadu wax noqdo iyo in ilmaha yar ku yimaaddo cadaadis, ka dibna xilligii foosha uu ka soo horreeyo ama dhasho isaga oo aan noolayn.

10. Jugta:

In ay hooyadu ka feejignaato weeye in uu soo gaadho nabar weliba caloosha iyo halka ilmuhu ku jiro. Wax ay sababaysaa in uu dhaawaca hooyada soo gaadhay uu khatar ku yahay hooyada iyo ilmaha yar.

Hooyada uurka leh waxaa la soo darsa raaxo la'aan iyo in ay wax badan dhibsato xilliyada ay uurka leedahay. Wax aana u sii dheer hawsha guriga iyo haddii ay leedahay carruur kale oo uga baahan xannaano iyo daryeel. Hooyada uurka leh waxa laga rabaa in ay la xidhiidho dhakhtar ama kalkaalisada joogta xarunta dhallaanka iyo hooyada si loo la socdo xaladdeeda caafimaad. Hooyada uurka leh waa in ay ka fogaataa dawooyinka la iska cuno iyo kuwa dabiiciga ah ee aan dhakhtar u qorin.

Astaamaha iyo calaamadaha hooyada uurka leh: Jamasho:

Hooyada uurka leh waxa ku dhaca wax la yidhaahdo jamasho, oo ah in ay iska jamato cunto ay jeceshahay ama ay jamato qof ay jeceshahay in ay aragto; waalidkeed, ninkeeda ama saaxiibteed.

Wallac:

Waa calaamadda koowaad ee lagu garto hooyada uurka leh. Wallaca waxa la arkaa inta u dhexaysa 1-3 bilood ee ugu horeeya bisha ay uurka qaaday. Astaamaha lagu garto wallaca waxa ka mid ah matag, cuntada qarkood oo aad u nacdo iyo cuno qaadashada hooyada oo hoos u dhacda.

Dhabar xannuun.

Hooyada uurka leh waxaa lagu arkaa dhabar xannuun saa'id ah xilliyada ay ku jirto bisha 5aad ilaa 9aad.

Barar:

Qofka dumarka ah marka ay gaadho bisha toddobaad ilaa sagaalaad waxaa ku soo baxa barar dhanka gacmaha iyo cagaha hoose waxaana sababa misaanka oo kordha ama fadhiga badan.

Laab-jeex:

Laabjeexa waa mid saamayn wayn ku leh hooyada uurka leh xilliyada cuntada ka dib iyo markay seexan rabto habeenkii ayay isku arkaan laabjeexa.

Calool xannuun:

Calool xannuunku waa mid markasta lagu arko hooyada uurka leh. Waxaana keena caloosha maqaarkeeda oo kala baxa iyo minka oo is balaadhiya sababta oo ah ilmaha ayaa ku kora minka dhexdiisa.

Babaasiir:

Babaashiirtu waxa ay ka soo baxdaa qaybta danbe ee ugu hoosaysa ee malawadka. Malawadka gudihiisa iyo banaankiisa waxaa ku yaala xididdo iyo muruqyo jilicsan xididdadaas ayaa is xidha oo dhiig ka soo buuxsama xilliga ay hooyadu uurka leedahay. Waxaana keena in calool istaag ama in minku cadaadis ku soo sameeyo malawadka.

Sidoo kale astaamaha lagu arki karo hooyada uurka leh waxa ka mid ah:

- ✓ Madax xannuun.
- ✓ Lugaha oo xidido waawayni kasoo baxaan.
- ✓ Daal joogto ah.
- ✓ Kaadi badan xilliga habeenkii.
- ✓ Xanaaq iyo dabeecadda oo lunta.
- ✓ Hurda yari.
- ✓ Cabsi.

Xogtan waxa aan kasoo xigtay **Dr: Cadceed.**

Barbarbaarinta 4aad (xilliga dhalashada).

Ilmuhu marka uu dhasho wax uu ku dhashaa diinta islaamka laakiin waalidkii ayaa ka dhiga yuhuudi ama nasaari sida uu suubbanuhu inoo sheegay. Waxa ku waajib ah waalidka ilmaha yari u dhashay wax walba oo ilmaha yari u baahan yahay. Waxa la suneeyaa in qofka yar loo wanqalo loona bixiyo magac wanaagsan. Waxa kale oo sunne ah in ilmaha yar lagu eedaamo marka uu dhasho timir yarna dhanxaragga loo geliyo.

Ilmaha yari marka uu dhasho badanaa wuu ooyaa sababtuna wax ay tahay ilmaha yar oo u soo baxay deegaan ka duwan kiisii hore ee hooyadii caloosheeda taas oo ahayd meel ilmaha yar loogu talagalay oo aan kulayl iyo qabow midna aan ahayn, cuntadiisana ay u soo mari jirtay mandheerta, laakiin marka uu addunka yimaaddo waxa uu bilaabma in uu la qabsado hawada cusub ee leh kulayl iyo qabowga, sidaa awgeed buu ooyaa marka uu soo dhashoba.

Inta badan ilmaha aan ooyin in uu xanuunsanayo ama xab cunay ayay aaminsanyihiin hooyooyinka soomaaliyeed. Waxa fiican saacad ka dib dhalashada ilmaha in naasnuujinta loo bilaabo ilmaha yar, taas oo faa'iido badan u leh hooyada iyo ilmaha yarba. Hooyada waxaa la rabaa in ay ilmaha ku dedaasho marka uu yar yahay ay ka ilaaliso wixii dhib soo gaadhaya sida; in uu dhaco, wax isku baqtiyo iwm. Feejignaan dheeraad ah ayaa laga rabaa hooyada ilaa inta uu kala garanayo wixii dhibaya iyo wixii kale.

B) Naasnuujta:

Naasnuujintu waxay u fiicantahy hooyada iyo ilmahaba. Wax ay u leedahay faa'iidooyin badan. Waxa wacan in ilmaha muddo saacad dhalashadiisa kadib loo bilaabo naasnuujinta. Waa in la nuujiyaa ilmaha yar muddo labo sanno ah oo xidhiidh ah, sida uu illaahay qur'aanka inoogu sheegay suuratul Baqra.

Waxa fiican in ilmaha caanaha ugu horeeya ee loo yaqaano danbarka lasiiyo. Waa caanaha ugu horeeya ee midabkoodu huruudda u eg yahay ee adag. taas oo la ogaaday in ay ilmaha wax badan u tarto sida in ay ka difaacaan cudurro badan oo ku dhici lahaa ilmaha yar, laakiin mudooyinkan badan hooyooyinku wax ay caadaysteen in ay ilmaha siiyaan caano boodhe ama biyo sonkor lagu kariyay oo fax loo yaqaano.

In kaste oo magaalada iyo miyigu kala duwan yihiin, ilmaha lasiiyo caanaha naaska wuu ka cudur qaad yar yahay ama ka caafimaad badan yahay ilmaha lasiiyo masaasadda ama caanaha kale. Waxtar bay u leedahay hooyada iyo ilmahaba naasnuujintu, waxaana ka mid ah; waxay ay hakisaa ama yaraysaa dhiig-baxa hooyada dhalmada ka dib. In aan hooyadu hore uurkale u qaadin. Wax ay ka difaacdaa hooyada kansarka ku

dhaca naasaha. Wax ay soo ururisaa ilma-galeenka hooyda. Dhaqaale ma sababayaan caanaha naasku. Ilmahana wax ay ka difaacdaa cudurrada, wax uuna ka helaa nafaqo joogto ah oo la koraysa jidhkiisa iyo is beddelka ku imanaya ilmaha.

Ilmaha oo naaska nuuga ugu yaraan sannad waxa la oggaaday in ay kor u qaaddo garashada iyo caqliga ilmaha marka uu waynaado. Waxa kale oo kordhisaa xidhiidhka ka dhexeeya ilmaha yar iyo hooyadii oo kalgacal xooggan uu dhexmaro. Waa cunto jaban oo aan kaaga baahnayn diyaarin ama in aad meel ka raadiso wakhti walba oo ilmaha yari u baahdo wuu heli karaa. Waxa muhiim ah in hooyooyinka lagula taliyo in ay carruurta nuujiyaan. Caanaha naaska hooyada ilmuhu wax uu ka helayaa waxa uu u baahanyahay sida biyo iyo sonkor intaba, waana u fududyihiin dheefshiidka ilmaha.

T) Kala-korinta ilmaha:

Kala-korinta ilmuu wax ay muhiim u tahay hooyada, ilmaha yar iyo qoyskaba. Waa lagama maarmaan in carruurta la kala koriyo, si ay xilliyo macquul ah u kala waynaadaan. Faa'iidooyinka ay kala-korintu hooyada u leedahay waxa ka mid ah:

- ✓ In ay nasato hooyadu si ay uur danbe u qaadi karto.
- ✓ In ay masuuliyaddii guriga sida ugu habboon uga soo baxdo.
- ✓ In ay fursad fiican u hesho sidii ay u korin lahayd ilmahan hore.
- ✓ In ay dhibka carruurta aadka isugu dhow ay ka nasato.

Faa'iidooyinka ay kala-korintu carruurta u leedahayna waxa ka mid ah:

- In uu helo daryeel ku filan.
- In uu helo naas-nuujin ku filan.
- In ay hooyadu si wacan u xanaanayso.

J) U heesidda ilmaha:

Hooyooyinkii hore ilmaha way u heesi jireen xilliyada uu gaajoonayo, ama hurdadu hayso oo kale; laakiin hooyooyinka casrigan joogaa inta masaasad afka u geliyaan ayay hawlahooda qabsadaan, xoolna ku ridaan. Kollay hooyooyinkii hore dhib ilmaha yar ayay iskaga fududayn jireen marka ay xoolaha maalayaan ee ay waayaan cid ay uga tagaan bahalana uga baqayaan waa in ay xanbaaraan oo ay u heesaan ilmaha si uu dushooda ugu seexo, ama xilliga uu gaajoonayo ee wax ay siyaana aysan jirin ay ku maaweeliyaan ama hooyadu ay doonto in ay ilmaheeda amaanto oo ay tilmaamto in uu carruurta kale ka fiican yahay kollay inahaas ayaynu odhan karnaa heestu way ku iman jirtay, bal aynnu so qaadano qaar ka mid ah hees carruureedka.

Heesta markuu ilmuhu ooyo:

Hobeeya habooye habeeya
Oo yaa dilayoo dagaalay
Oo yaa durkulul ku jeexay
Dagaal baa naga dhexeeya
Ciddii dishay ee dagaashay.

Heesta markuu gaajoodo

Ma naaskiibaa gabloolay
Gablooloo godol ka wayday
Ma geelibaa arooray
Arooroo oon ku raagay
Ma aabbaa ka socdaalay
Socdaaloo socod ku raagay.

Kolay iminka way yar tahay ama ma jirto ayaan odhan karaa in ilmaha yar loo heeso xitaa miyiga ayaan laga soo helayn ayaa laga yaabaa, magaalana hadalkeedaba daa, laakiin wax ay ahaayeen wax ilmaha yar lagu madadaalin jiray afkana uu ku baran jiray, iminka se wax badan oo kale ayaa halkeedii beddelay.

X)Xanbaaridda ilmaha:

Mudooyinkan danbe ubadka lama xanbaaro, sababo badan awgood, laakiin waayadii hore ubadka waa la xanbaari jiray, wax ayna u leedahay ubadka iyo hooyadaba faa'iidooyin badan, sida in uu ka qayb qaato isu dhowaanshaha iyo xidhiidhka ka dhaxeeya hooyada iyo ilmaheeda oo uu kor u qaado.

Hooyada oo la socota xaaladda ilmaha sida marka uu luloonayo ama gaajoonayo. Sidoo kale in hooyadu ay xilliga ilmuhu ooyo, hurdoodo iyo gaajoonayaba ay ku sabaalin jirtay. Laakiin hooyinka hadeer xool iyo wax badan oo kale ayay ku beddesheen, kolley duruufta iyo wakhtiga la nool yahayna way ku xidhan tahay, wax aynnu halkan ugu xusnay uun wax ay xoojin jirtay xidhiidhka ka dhaxeeya hooyada iyo ilmaheeda oo labadoodaba faa'iido u ahayd.

KH) Doorka hooyada:

Hooyadu waa macallinka koowaad ee ilmaha, waa meesha uu afka ka barto marka u horraysa, ilmuhu wax uu hooyada ka helaa naxariis, jacayl, daryeel, dugsi iyo in ay u tahay meel uu wax walba oo dhiba ka dugsado . Waa dhabta hooyadii uu indha ku kala qaaday tan iyo intii uu garaadsaday.

Hooyadu waa halka ay u dhimatay marka la eego barbaarinta carruurta. Waayo, aabbuhu wax uu inta

badan qabtaa hawlo guud ee reerka ah. Laakiin masuuliyadda ugu badan wax ay saran tahay hooyada. Hooyadu waa in ay ilmaha si dhow iyo si dheerba ula socotaa xaalkiisa, waayo inta badan agteeda ayuu ku qaataa. Marka waxa loo baahanyahay hooyadu in ay noqoto qof il-dheer wax ku eegaysa oo maskax badan si ilmaha yar ay ula socoto xaalkiisa.

Waa in aan hooyada ilmaha yari ka caqli-badin. Hooyadu waa ta soo saarta halyeeyada iyo hal-doorrada aynnu ku dayano. Hooyo kaste si ay ilmaha ka dhigto ayuu noqdaa inta badan in kaste oo ay saamayn ku leeyihiin saaxiibbadii iyo dhammaan deegaanka uu ku nool yahay ilmuhu. Hooyadu keligeed kama gayoon karto toosinta iyo talo siinta ilmaha yar laakiin waa in aabbuhuna uu ka siiyo gacan wayn si ay u soo baxaan jiil la mahadiyo. Dardaaranka hooyada waa ka ay ku soo saarto gaari iyo geesi ay dadku wada jeclaystaan. Hooyadu waata la talisa lana dardaaranta gabadheeda xilliga la guursado si ay u soo saarto carruur wanaagsan.

Ilmaha yari door wayn bay ugu jirtaa hooyadu haddii uu waayona wuu daranyoobaa noloshiisa wax badan baa ka dhinnaada dhibka uu ku soo korona waa laga dareemaa. Hooyada doorkeeda buuggaag badan iyo sugaan badan ayaa lagu cabbiray. Hooyadu waata ilmaha barta hadal iyo wax walba oo uu u baahanyahay. Waxa ka mid ah suugaanyahanka sida wayn hooyada ugu cabbiray suugaantiisa abwaan Maxamed Ibaraahin Warsame (Hadraawi) Maansadiisii “ Hooyooy la’aantaa”

**“Hooyoy la’aantaa
Higgaad lama bartenoo
Hooyooy la’aantaa
Hadal lama kareenoo
Ruuxaanad habinoo
Hawshaada waayaa
Hanaqaadi maayee
Hoygii kalgacalkee
Naxariistu hadataay”.**

Hooyadu door muhiim ah ayay ka qaadataa korriinka iyo kobcinta ilmaha ilaa heerkiisa mustaqbal wax ay ku leedahay saamayn muuqata iyo mid qarsoonba xumaan iyo samaanba. Waa sababaha ay hooyadu uga xaq wayn tahay aabbaha waakii ninkii nebiga u yimi ee lahaa xaq koowaad yaa igu leh nebi allow wakii rasuulku ku yidhi (NNKH) hooyadaa, hooyadaa hooyadaa saddex jeer ayuu ninkii ku celiyay, saddex jeer ayuu rasuulku ku celiyay hooyada, markii afarraad ayuu aabbaha yidhi. Markaa hooyada waata halkaa la gaadhsiiyay xaqeeda arrinkeedu ma sahlana, hooyadu waata wax walba kuu ah ee agteeda lagu dareemo xasilloonida. Isaga oo Abwaan Hadraawi ka hadlaya wax uu yidhi:

**Hooyooy dushaadaa
Nabad lagu hubaayoo
Hooyoy dhabtaadaa
Hurdo lagu gam'aayoo
Hooyoy taftaadaa
Dugsi laga helaayoo
Waxa lagu hal-maala
Hooyo ababintaadee**

**Hayin lagu badhaadhaay
Hogol lagu qaboobaay
Gogol lama huraaneey
Dugsigii hufnaantaay
Hidda lagu arooraay”.**

Ma soo koobi karo hooyada doorka ay ku leedahay ilmaha yar iyo sida ay u saamayso, qoraal laguma soo koobi karo hooyada doorkeeda iyo abaalkeeda labadaba. Hooyadu waa macallinka koowaad ee ilmaha yar, xilliyada adag waxa la xasuustaa hooyada waata dhibka laga dugsado inta badan. Mar kale Hadraawi ila dhugo:

**“Marka aad nin hiilloo
Laga baqo hashiisiyo
Halyey diran dhashaabaa
Hooyo lagu xasuustaa
Marka aad nin hoo-loo
Marti hagar ka gelinoo
Gurigiisa habaqluhu
Isku soo halleeyoo
Hayntiisa quudhoo
Hor illahay geystoo**

**Lama hure dhashaabaa
Hooyoy lagu xusuustaa
Marka aad nin himilada
Hillin toosan mariyoo
Hir markii la gaadhaba
Ku labaad hilaadshoo
Haga maatadiisoo
La higsade dhashabaa
Hooyo lagu xusuustaa”.**

Aynnu eegno hooyada dhashay gabadh wanaagsan ee
hadhow lagu xusuusto iyadana:

**Dumar iyo haween baa
Nolol lagu haweystaa
Kuwa lagu hammiyayee
Sida hawd caleen weyn
Rag u wada hammuume
Ishu halacsanaysaa
Hablahaaga weeyee
Marka guur la haybshee
Gabadh heego dheeroo
Hoobaan la moodoo
Karti iyo hubqaadloo
Quruxdana ka hodaniyo
Hufan laga aroostaa**

Hooyo lagu xusuustaa”.

Hooyada hadal laguma soo koobi karo ilmuhu waa halka uu ka hanaqaado ama ka curyaamo. Hooyooyinka waxa la gudboon in ay karti, aragti, dedaal iyo u hurid wakhti waa in ku bixisaa si loo helo jiil qurux badan si umaddana mustaqbalkeedu u hagaago, bal aynnu soo qaadano maanso tilmaamaysa hooyo ilmaheedii hoga tusaalaynaysa wiil iyo gabadhba. Waxa tirisay halabuur Shukri Nuux Jamac.

**Dhamow hooyow mid dhowrsan
Samaanta midkii ku dhiirran
Wanaagga u dhego nuglaada
Xumaanta ka dhowrsanaada
Midaan weligii is dhiibin
Midaan dhaawicin hankayga
Dhigii midka aan ka leexan
Adduunyadu waa dharaaro
Habeen weeyaan dhammaday
Hilaac weeyaan ku dhaafay
Marbaan dhinaciyo bogayga**

Marbaan gaajadu dhibaynin
Dartaa dhuuniga u diiday
Dharaartaad timi aduunka
Dhibtiibaan kugu ilaaway
Dhexdaydaan xidhoo adkaystay
Xanjeer iyo dhabar ku saaray
Dhabtana kugu seexshay waayo
Waxaad ku dhawaaqday weedho
Dhalaanbaad noqotay doora
Waxaad ila doontay dhaanka
Dheelkiibaad ila jarmaaday
Waxaan dhaxlay ciidankaaga
Dhegtaanse wax kuugu sheegay
Dhisma xeradii dhamayso
Dhacami oo yaan dhurwaagu
Dhufays ka samaysan meelna
Hadhaafin buuxinkiisa
Markay talo dhaabad beesho
Adoo shaalkii ku dhowrsan
Intaad ku dhowaato geedka
Garaadkaagana ka dhiibo
Dhamooy hooyoy mid dhowrsan
Dhismaha udubkaaga dhaado
Ku dhaadhici ciida hoose

Markay dhedo soo dhacayso
Dharabku ku fadhiisto cawska
Dhirtaa u garaacis fiican
Markuu dhuunigu yaraado
Kuwaro qadhaabsigaaga
Gabraar noqo dhiiran hooyo
Dhismaha qoyskiyo dhexroorka
Wixii rabi kuugu dhiibo
Xilkoodii wada dhammayso
Ducaan kugu dhowrayaaye
Dhabeel iyo gaari dhowrsan
Xishoodkoodii ku dhaado
Dheg iyo dhabankii ilaasho
Ha biirsanin dhuunigiina
Dhexdaada xidhoo adkayso
Dhaankaaga raroo kaxayso
Intaan dhaalacada waagu
Dhafoorkaaga abaarin
Xilkaagii wada dhammayso
Dhig iyo udubkii saymayso
Aloolkii dhinac ka raaci
Dhagaatiyadaada sooho
Dhabeel iyo gaari dhowrsan
Dhacliyo boqorkii ku gaadhan

**Subeeciyaddii ku dharsan
Dhaqmaatina hooyo yeelo
Dhibaadaadiina qaado
Dhalaankaaga dadahayso
Cidaad u dhaxayso hooyo
Intay dhalashada bahowdo
Amaba ay dhuux wadaagto
Xanjeerkiyo dhabarka saaro
Af iyo adinkaaga dhowro
Ducaan kugu dhowrayaaye
Dhagtaydana ii wanaaji”.**

Maansadan waxay ina tusaysaa hooyadu sida ay mar walba qofkeeda ula rabto in uu noqdo qofka ugu hal-doorsan adduunka, sida ay u tilmaamayso ee ay u hogo tusaalaynayso ayaad ka aragtaa sida mid walba gabadha iyo wiilkaba ay ugu baraaruinayso hawlahooda sugaya, iminka iyo mustaqbal koodaba.

Hooyada wanaagsan waa ta ilmaheeda u horseeda in uu noqdo qof guulaysta adduunka iyo aakhiradaba. Haddii hooyada uu hamigeedu sarreeyo, qorsheheedu uu fiicanyahay, aabbe fiican oo caawinayana ay hesho waxa hubaal ah in ay soo saarayaan jiil fiican. Laakiin

haddii labada waalid ay kala daadsanyihiin sida aynnu inta badan aragno oo aanay qorshaha carruur barbaarinta ka midaysnayn, waa midda inta badan carruurta ku ridda dariiq aan la mahadin.

Hooyada caaqiladda ah waata agteeda ay carruurtu ka helaan daryeel, dedaal, xog ogaal iyo dayactir joogto ah. Inta badan hooyooyinka soomaaliyeed waa kuwo aan helin carruurtooda daryeel aabbo illaa intii dalku burburay. Taasi wax ay ku tusaysaa in hooyooyinka soomaalidu ay ka qiimo badan yihiin hooyoyinka kale ee adduunka. Waana karti ay dheeryihiin runtii.

Hooyinka soomaaliyeed wax ay la xarbinayaan ama ay labo waalid u noqdeen carruurtii agoomoobay iyo kuwo kale oo qadar ku dhacay sida ay dhaleen raga qayila ee nolosha ka dhacay wayna ku amaananyihiin taas. Hooyinka soomaaliyeed wax ay buuxiyeen labo kaalmood oo cid buuxin kartaa ay yar tahay. Ma aha hooyadu haddii ay aabbaha is qabtaan in ay carruurta dayacdo oo ay noloshooda u horseeddo guuldaro. Waa in ay intay dhibka ka saari karto ee karaan keeda ah dedaashaa aabbuhuna waa sidaa si leeg.

Hooyayinku waa in ay ku daydaan Haajara nebi Ismaaciil hooyadii oo keligii soo korisay markii aabbihii Ibraahim illahay amray in uu saxaraha Maka geeyo oo uu halkaa kaga dhaqaajiyo, meeshaas oo aan lahayn hoy, biyo, baad(cunto) iyo dad toona, wax ayna ahayd hooyo karti badan illaahayna talada u dhiibatay soona saartay nebi illahay, taas oo tusaale u ah hooya walba oo ilmo keligeed korinaysa, sifo walba aabbuhu haku maqnaadee. Wax ay bartay Ismaaciil oo ay jeclaysiisay aabbihii Ibrahim(c.s). Hooyadu ma aha in ay ilmaha aabbihii ku dirto ama nacsiiso yuuna waxba tarin e, waxa hooyada ku waajib ah in aanay ilmaha yar aabbihii nacsiin haddii uu dayaco iyada iyo ilmaha sababta oo ah ilmaha yar niyad jab iyo murugo ayaa ku dhacaysa aabbihiiina wuu nacayaa.

D)Xilliga Dugsiga:

Xilliga ilmaha yar ay maskaxdiisu u diyaar garowdo in uu wax baran karo; waa in dugsii la geeyaa. Wax aan odhan karaa madarasadda ugu horaysa ama iskuulka u horeeya ee ilmuhu galo waa ka hooyada, taas oo marka u horaysaba afka uu ku soo barto. Hooyadu

waa macallinka kowaad ee ilmaha yar barta afka uu ku hadlayo. Ilmuhuna inta badan wax uu wax ka qaataa labadiisa waalid gaar ahaan hooyada oo ah ta uu inta badan wakhtiga la qaato.

Waxa waajib saaran ah in waalidku ubadka geeyaan goobo waxbarasho xilliga uu waxbaran karo. Waa in la baraa sida uu u tukan lahaa salaadda, isku nadiifin lahaa, qur'aan u akhrin lahaa, qorista iyo aqriskana waa in la baraa. Ubadka waa in lagu barbaariyaa in ay wax bartaan si ay uga fogaadaan daroogada iyo mukhaadaraadka, in ay noqdaan mashaqaystayaal ama kuwo aan anficin naftooda iyo in ay wadankooda ka socdaalaan.

Macalimiinta waxa waajib ku ah in ay carruurta u debecsanaadaan oo aanay dilin mar walba. Waa in ay xaalkooda la socdaan marwalba si aan loogu gefin ilmaha yar. Waxa la rabaa in ay feejignaana la yimaaddaan marka ay carruurta waxbarayaan.

Bal aan qisadan idinla wadaago ku socota macalimiinta; waa hooyo danyar ah oo dhashay labo wiil oo agoon ah. May haysan wax ay labada wiil waxbarasho uga bixiso. Keliyata wax ay awooddaa in

ay mid uun ka bixisho fiiga iyo qalabka uu wax ku baranayo. Wax ay sameeyeen sheeko xikmad badan oo aad loola yaabo. Wiilka lagu daray waxbashada maalin kasta wuu ka habsaamaa iskuulka maalin walbana macallinku wuu garaacaa ilmaha yar isaga oo aan ogayn xaalkiisa.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa macalinkii arkay wiilkii yaraa oo ordaya xilliga ardayda kale ay qaataan bareega iyo nasashada macalinkii ayaa u kuurgalay xaalka wiilka yar wuuna dabagalay ilaa uu gurigoodii ka galay wiilkii yaraa. Wax ay ku jiraan guri yar oo xoosh ah. Wax uu macalinkii isha ku dhuftay hooyadii oo soo ordaysa iyana ilmo kalena gacanta haysa isla markiiba wax ay bilowday in ay dharka u kala beddesho si uu isna u soo dhigto dugsii gelin oo uu qalabka iyo dirayska la isticmaalo walaalkii, maadama labada wiil aad isugu ekaayeen oo aan la kala garan. Kii kale ayaa bilaabay in uu isna soo ordo ilaa iskuulkii isaga oo habsan ah ushiina diyaar u tahay madaama dugsigu ka durugsanaa gurigooda. Waxa layaab ku noqotay macalinkii arrinka uu arkay ee cajiibka badan iyo gefka uu ku samayn jiray ilmaha yar isaga oo aan

xaalkiisa ka warqabin, ma nususaaceeyo, ma nasto, xiisadahana badhbuu dhigtaa ulna waa u diyaar.

Arrinkii wuu xejin waayey macalinkii dhankii dugsiga ayuuna u soo dhaqaaqay. Markii fasalkii soo galay wiilkii yaraa oo ushii u diyaar ah ayaa macalinkii wuxuu sameeyay arrin aanu ka filayn macalinka maadama oo uu mudo dheer usha la soo qabsaday; diyaarna u yahay. Macalinkii ayaa jilbaha dhulka dhigay oo wiilkii yaraa dhunkaday, kuna dul ooyay cafisna ka wayddiistay denbiga uu ka geli jiray isaga oo ka qoomamaynaya wixii uu samayn jiray. Wax uuna u oggolaaday in ay labdooduba dugsiga dhigtaan wax qarash ahna aan la wayddiinayn.

Qiso kale:

Caasha iyo Geedi waa labo carruur ah oo u xoogsada nolol maalmeedkooda iyo kuwan ka yar-yar walaalahood. Wax ay caashi dhaqdaa baabuurta halka Geedi uu baalashle yahay. Labaduba wax ay dhigtaan iskuulka ee dugsiga hoose waana fasalka afarraad iyo saddexaad. Noloshoodu waa nolol adag. Hooyadood

ma noola halka aabbahoodna uu qaadka cuno aannu xaalkoodaba ka war hayn.

Caasha iyo Geedi maalin walba wax ay ka soo habsamaan xiisadaha, halka maalin walbana macalinmiintu ay garaacaan si ay habsanka isaga daayaan. Marka ay soo socdaan Caasha iyo Geedi way soo ordaan isla markaana wax ay dhiibtaan gacanta si loo garaaco waayo way la qabsadeen, xaalkoodana cidi kama warqabto.

Ardaydu marka ay wayddiiyaan Caasha ama Geedi sababta habsankooda? Jawaab qancisa ma siiyaan. Waayo, wax ay ka baqayaan in lagu caayo shaqada ay qabtaan wayna ka xishoonayaan. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waddada waxaa soo maray mid ka mid ah macalimiinta wax aanu arkay arrin ka yaabiyay oo uu liqi waayay. Wax ay idhihiisu ku dhaceen Caasha oo baaruurta yar-yar mid ka mid ah dhaqaysa. Wuu soo fiiriyay macalinkii si uu u habsado waxa ay indhihiisu sheegayaan in ay run tahay iyo in kale. Meel aan Caashi ka arkayn ayuu ka daawanayaa, wuu rumaystay xaalka meesha ka jira wax uuna galay fikir-

dheer oo uu kaga fikirayo sidii uu u garaaci jiray
Caasha isaga oo aan xaalkeeda war ka hayn.

Subixii ayay Caasha iyo Geedi sidii caadada u ahayd u
soo ordeen una yimaaddeen dugsigii iyaga oo diyaar u
ah in ay gacanta dhiibtaan si loo garaaco laakiin saaka
xaalku waa uu ka duwan yahay sidii hore waayo waxa
la ogaaday xaqiiqadu waxa ay tahay. Markii Caasha ay
soo gashay fasalka wax ay is la markiiba bilowday in
ay gacanta dhiibato laakiin maxaa dhacay?

Macalinkii inta uu ushii iska dhigay ayuu xabadka
geliyay, isaga oo ilmaynaya kana xun wixii uu samayn
jiray isaga oo aan ka warqabin arrinka Caasha iyo
Geedi, wax uuna cafis wayddiistay Caasha iyo Geedi
oo ka yar oo ay kala galas ahaayeen, wuxuuna u wada
sheegay maamulkii iyo macalimiintii oo dhan
waxaana laga dhaafay lacagtii iyo ushii daashatay
mudadii ay iskuulka dhiganayeen.

Wax aynnu sheekadan ka qaadanaynaa in ay jiraan
carruur badan oo ku dulman daafaha caalamka
kuwaas oo ay ku dhacaan tacadiyo kala duwan, kuwo
badheedh loogu kaco iyo kuwo ogaansho la'aan ay

jirto labadaba. Sida aynnu sheekadan ku cabbirnay oo kale, waxaa fiican xaalka ardayga in uu macalinku la socdo oo u fiirsado xaaladaha ku soo noqnoqda ama dhibaatooyinka haysta ardayda qaar, waa in uu noqdaa macalin xogogaal ah, intaanu ku kicin falal aan la mahadin.

Ilmaha yari xasuusta xun ma ilaawo ama qof xumeeyay markii uu yaraa, raad bayna maskaxdiisa kaga tagtaa siiba macalimiinta marka ay ardayga dilaan bilaa sabab ama isaga oo u dilay in uu soo habsaamay iyo wixii la mid ah. Isaga oo aan ogayn sababta aynnu sidan soo qaadano.

Haruun Rashiid wax uu lahaa wiil yar wax uuna u qabtay macallin wax uuna ku yidhi: “xor baad u tahay in aad dishid, wax aan rabaa in uu noqdo qof edeb badan.” Maalin ayaa macalinkiisii garaacay bilaa sabab. Suun buu ku garaacay iyo dhirbaaxo. Ilmihii yaraa baa wayddiiyay sababta uu u garaacayo, wuuna sii garacay isaga oo leh “aamus.”

Wiilkii yaraa markii uu 20 jir gaadhay ayaa aabbihii dhintay wax aana loo dhiibay boqornimadii dalka.

Wax uuna markii u horaysay codsaday in loogu yeedho macalinkiisii garaacay markii uu yaraa. Wax uu wayddiiyay: “maxaad ii dishay 20 sanno ka hor anigao yar, oo aan denbi samayn?” macalinkiibaa yidhi: “weli miyaad xasuusan tahay?!” Wax uu yidhi: “maalin qudh ah ma illaawin, waanan dhadhamiyaa xanuunkii suunka iyo dhirbaaxada aad ila dhacday.” Macalinkii baa yidhi: “wax aan kuu dilay, si aad u garatid qofka la dulmiyaa xannuunka uu dareemo, si aad u garatid qofka la dulmiyaa in aannu weligii ilaawin iyo si aad u garatid marka aad boqor noqotid ee aad xukunto in aad qof u dulmin.”

Cutubka 4aad

Waxyaabaha habboon ku barbaarinta ubadka.

Jacaylka iyo naxariista:

B) Jacayl:

Ilmahaaga jacayl u muuji tusina in aad jeceshahay. Nebigu(NNKH) wax uu yidhi “ kiinii qof idinka mid ah jeclaada ha u sheego.” Ilamahaaga u sheeg in aad

jeceshay. Ku dheh: “ waan ku jecelahay hooyo ama aabbo”, iyo erayo kale oo la mid ah. Jacayl aan wax ku xidhnayn ilmahaaga jeclow. Sababna u noqo in uu ilmahaagu ku jecelaado kuuna adeego marka aad weynaato.

Waxa kale oo muhiim ah in ilamaha yar aad dhunkatid si uu u dareemo naxariis iyo kalgacal. Nebigu(NNKH) waa dhunkan jiray carruurta yar yar gaar ahaan kuwii uu awoowga u ahaa ee Xasan iyo Xuseen. Kuwa agoonta ah madaxa ayuu u taaban jiray, ubadku waa hadba sida adigu aad ka dhigato. Wixii aad ku kaydsatay uunbaanad hadhow ka dheefaysaa. Bal aynnu jaleecno dhinacaa iyo qisaska iyo dhacdooyin dhacay waaye hore.

Dalka Armiiniya waxa ku noolaa nin beeroole ah oo miskiin ah, xaakiisii iyo wiil yar oo qudha oo uu dhalay. Subax kaste inta uu u yimaado wiilkiisa ayuu ku odhan jiray aabbo waxkasta oo dhaca waan ku barbar taagan ahay. Sanadkii 1989kii Armiiniya waxa ka dhacay dhulgariir xun kaa soo sababay dhimasho 25kun oo qof. Markii uu arkay aabbihii reerkii intii

kale oo nabad qabta ayuu u cararay dhinacaa dugsigii inankiisa. Wax uuna arkay in uu burbursan yahay. Wax uu xasuustay in wiilkiisa ku odhan jiray wax kaste oo dhaca waan ku barbar taagan ahay. Dhinicii fasalkiisu xigay ayuu tegay wuu qoday gacmihiisa.

Dadkii oo quustay oo ooyaya ayaa ku yidhi: “waxa aad samaynayso jooji.” Wax uu ku yidhi: “ama i caawiya ama i daaya.” Waxa lasheegay in muddo 37sacadood oo xidhiidh ah uu gacmihiisa ku qodayay. Dalool ayuu sameeyay. Magicii inankiisa ayuu ku dhawaaqay. 37 arday ayuu badbaadiyay miskiinkii. Wiilkii ayaa ku yidhi ardaydii: “ha werwerina aabbahay ayaa ina badbaadinayee.” Sababta oo ah aabbihii ayaa ku yidhi wax kaste oo dhaca waan ku barbar taagan ahay.

Odaygii waxa la dawaynayey labo isbuuc. Iminka odaygii miskiinka ahaa isaga oo waayeel ah ayuu ku nool yahay wadanka Armiiniya, isaga iyo wiilkiisii ayaana subax kaste ku dheha aabo waan ku barbar taaganahay wax kasta oo dhaca.

Wax ay ku tusinaysaa sheekadani in aan ubadka balanta aad u qaaddo aanad kaga bixin. Taasi wax ay sababaysaa in uu beenta iyo khiyamada ka fogaado, kana digtoonow waxkasta oo ubadka ku keenaya dhibaato ama dhaawac.

Siyaabo badan ayaad ilmaha yar ku kasban kartaan, in aad jeceshihiina aad ku tusi kartaan, inaad u sheegtidna waa muhiim.

Haddaba aynnu soo qaadano dhowr qodob oo uu ilmuhu jacayl ku dareemi karo, door wayn bay ka ciyaaraysaa in ilmaha yari uu jeclaado waalidkiis iyo dadka kaleba:

La qaybso farxada ilmaha:

Ilmaha waa in aad la qaybsataa farxada iyo guulaha uu soo hooyo. Waa in aad la qayb sataa murugo iyo farxadba ilmaha aad dhashay ama aad gacanta ku hayso. Farxaddu waa waxyaabaha saamaynta balladhan maskaxdooda kaga taga xasuuso badan.

Beri baa oday da'ah iyo wiil uu dhalay oo 25 jir ah ay soo wada raaceen tareen. Wiilka ayaa wajigiisa waxa

ka muuqatay farxad iyo raynrayn, wuxuuna xigay dhinaca daaqadda. Wiilkii ayaa waxa uu gacantiisa dibadda uga saaray daaqadda, waxaana uu dareemay dabaysha iyo xawaaraha uu jarayo tareenku, kadib ayaa uu kor u dhawaaqay isaga oo leh “aabbo eeg dhammaan geeduhu (dhirtu) way ina daba ordayaan.”

Aabbihii ayaa inta uu dhoolacadeeyey la wadaagay farxaddii wiilkiisa, waxaana dhinac fadhiyay nin iyo gabadh oo dhagta u raaricinayay hadalkan iyo farxaddan ay aabbaha iyo wiilkiisu is wadaarsanayaan. Ka dib waxa ay la yaabeen sida uu ninkan dhallinyarada ah ee 25 jirka ahi u dhaqmayo sidii uu yahay ilma yar oo carruur ah! Haddana si lama filaan ah ayaa marlabaad uu wiilkii dhallinyarada ahaa isaga oo leh: “aabbo eeg daruuruhu waa ay ina dul ordayaane.”

Ka dib ayaa labadii lamaane ee dhinac fadhiyay lasii yaabeen wiilkan dhallinyarada ah. Intaas ka dib ayaa waxa soo da’ay roob, kadib ayaa dhibcihi roobku ku soo da’een wiilka gacantiisa, isaga oo farxadi buuxisay wajigiisa ayuu markale kor u dhawaaqay oo uu yidhi:

“aabbo cirku wuu da’ayaa, biyuhu waxay taabteen gacantayda, eeg aabbo.”

Halkaas markii ay maraysay ayaa lammaanihii is hayn kari waayeen, markaas bay waddiiyeen odaygii: “xaaji maxaad wiilkan ugu gayn wayday dhakhtar oo aad caafimaad ugu raadin wayday?” “Hadda ayaan ka soconaa cusbitaalka, isaga (wiilka) waxay u tahay markiisii ugu horaysay ee uu indhaha wax ku arko, waayo waxa uu ahaa indhoole.” Ubadka waa in lala farxaa marka ay ku jiraan xaaladda farxadeed. Sheekadan waxa aan kasoo xigtay Yuusuf Axmed Yuusuf (EX).

Su’aal aan wayddiiyay 400 oo qof oo aan u dhigay hab cilmibaadhis bartayda aan ku leeyahay Whatsapp-ka ayaa wax ay u dhignayd sidan: ma aragtay ama goorma ayaa kuugu danbaysay waalid kugu dhaha waan ku jecelahay ama waan ku garab taaganahay ? Jawaabtaa oo aan xogteeda ka soo ururiyay dadkaas waxa ay u dhignayd sidan; 55.5% laguma yidhaahdo. 19% hooyada qudh ah ayaa ku tidhaahda. 17.5% labada waalidba way ku yidhaahdaan. 5% mar kasta

waa lagu yidhahdaa. 2% mar mar bay maqlaan. 1% aabbaha qudha ayaa ku yidhaahda.

runtii halkaa waxa aad ka arkaysaa in aan soomaalidu jacaylka ay ubadkooda u qabaan aanay macal u muujin. Inta danbe ayaan kula talin lahaa in ay is daba qabateeyaan.

- 1) Waa in reerka dhan marmarka qaar sida jimcaha ay cuntada si wadar ah u wada cunaan. Ilmaha yari wax uu dareemayaa jacayl iyo xasilooni marka uu arko hooyo , aabbo iyo walaalo oo hareero fadhiya.
- 2) In ay waalidku si wada jir ah ilmaha dugsiga u geeyaan; haddii ay wakhti hayaan kana soo wada celiyaan. Wax uu dareemayaa jacayl saayid ah iyo in uu laba garab haysto, kalsoonidiisa ayaa sii badanaysa uu naftiisa ku qabo.
- 3) Waa in ilmaha si wadar ah waalidku ula ciyaaaro si uu farxad u dareemo. Wax ay inta badan indhaheenu qabtaan hooyada uunbaa ilmaha iskuulka geysa, ka war haysa xaalkiisa, aabbuhu haddii uu wakhti hayo waa in uu la wadaago hooyada si ilmuhuna u noqdo ilmo labada dhinacba ka dhisan. isku mid ma aha ilmo

labada gacmoodba lahayo oo iskuulkii lagu wado iyo ilmo hooyo qudhi gacanta hayso isku dareen ma aha runtiii.

- 4) Waa in xilliyada uu fasaxyada kujiro si wadar ah loo geeyo goobaha dalxiiska ama gobol kale. Wax uu dareemayaa in la jecel yahay mooralkiisa ayay kor u qaadaysaa.
- 5) Waa in si wadar ah waalidku ilmaha ugu sheekeeyo ama buug xiiso u leh ilmaha looga aqriyo haddii ay wakhti hayaana ay la sameeyaan aqris wadareed si aqriska loo jeclaysiiyo.
- 6) Waa in si wadar ah ama wadajir ah ilmaha xanuunka loola qaybsado oo cisbitaalka loo wada geeyo, wax aynnu inta badan og nahay, hooyada uunbaa habeenkii u soo jeeda ilamaha yari haddi uu xanuunsado cisbitaalkana keligeed ayaa geysa. Waa in aabbuhu isku dayaa in uu hooyada marmar ka nasiyo ilmaha xilliga xanuunka cisbitaaladana uu la geeyaa.

Waddooyin 5 ah oo jacayl carruurta loogu muujiyo, kuwaas oo aan kasoo xigtay buugga (**the 5 love languages for children**), waxa qoray nin lagu magacaabo Gary Chapman.

1. Xidhiidhka jidhka:

In waalidku marka uu ilmihisa arko uu laabta saaro, uuna dhunkado waa nooca koowaad ee luuqadda jacaylka waalidku ugu muujiyo carruurtiisa. Waana waddada ugu badan ee ay carruurtu ku fahmaan dareenka jacaylka ee waalidku u qabo

2. Erayada dhiirigelinta ah:

Waxa muhiim ah in carruurta ay waalidkooda ka arkaan dhiirigelin, si ay u oggaadaan in waalidkood agtooda ay qiimo ku leeyihiin, laakiin waxa muhiim ah in aad ka fiirsato erayada dhiirigelinta ah ee aad carruurta u isticmaalayso, si ilmuhu akhlaaq wanaagsan ugu koro. Carruurtu marka ay wax wanaagsan sameeyaan haddii ay waayaan dhiirigelintii ay u baahnaayeen wax ay moodaan in mushkiladi jirto.

3. In wakhti lala qaato:

Ogow wakhtiga gaarka ah ee aad ubadkaaga la qaadanayso in uu ka dhigan yahay maalgelin aad u samaynayso mustaqbalkooda, muhiim ma aha intaad la joogto in aad muxaadirooyin sarsare u jeediso, waxa

se muhiim ah in aad wakhti la qaadato oo ay arkaan waalidkood oo si gaar ah xaaladooda u danaynaya.

4. U adeeg ubadkaaga:

Marka ilmahaagu uu hawl gacanta ku hayo aad aragto xitaa haddii uu keligii qabsan karo kala qaybqaado adiga oo u muujinaya in aad sidaa u samaynayso jacayl aad u qabto dartii. Isku dheellitir in aad ilmahaaga yar barto in uu naftiisa ku tiirsado, adeegyada aad u qabanayso u muuji in aad jacayl aad u qabto dartii aad ugu qabanayso.

5. Hadiyad sii carruurtaada:

Hadiyaddu kama tarjumayso qiimaheeda. Ha ka xishoon in aad hadiyad qiimo jaban carruurtaada u geyso, adiga agtaada ayay raqiis ka tahay mooyaan e carruurta agtooda waa wax wayn. Ku dedaal in hadiyaddu noqoto xilliyo gaar ah iyo xilliyo munaasabado gooni ah, iyada oo muhiimaddeedu sii badanayso marka ilmuhu uu guulo dhanka nolosha ah gaadho.

In badan oo ka mid ah waalidiinta soomaaliyeed wax ay ka arradanyihiin dareensiinta ubadkooda in ay jecelyihiin. Waxa dhacda in ubadka qaar iska

dhaadhiciyo in aan waalidkood jeclayn kana raadiya meelo kale oo ay ka buuxin lahaayeen.

T. Naxariista

Naxariis waa u mihiim ilmaha yarka ah taasina waxay dhaxalsiisaa in uu baari kuu noqdo ama uu ku jeclaado. Sidaas si la mid ah uu kuugu naxariisto. Mar kaste oo uu adayg kaa dareemana, ilmuhu wuu kaa fogaanayaa; mar kaste oo naxariistaada uu dareemana wuu kuu soo dhowaanayaa.

Mar kaste oo aad ilamaha ka waydo wax naxariis ah ha habaarin e u ducee si rabbi qalbigiisa kuugu soo jeediyo. Xikmad baa tidhaahda: “qof ha wada nicin in aad jeclaan doontid ma ogide, qofna ha wada jeclaan in aad nici doontid ma ogid e.” Waayo, qalbiyada dadka illaahay ayaa sidii oo doono ka dhiga. Laga yaabee ilmo caasi kugu ahaa in uu berri ka maalin kuu noqdo baari, wayna dhacdaa inta badan.

Waakii uu illaahay ku lahaa Nebiga(NNKH) “haddii aad ahan lahayd mid qalbi adag agtaada way ka carari lahayeen, cidkuusoo dhowaatana lama heleen.” Waakii markale Nebiga lahaa (N.N.K.H) : “kuwiina yar yar u naxariista kuwiina waaweyna ixtiraama.” Wax uu ahaa rasuulku mid u naxariista carruurta. Si gaar ah carruurta agoonta ah ayaa uu madaxa u salaaxi jiray una dhunkankan jiray.

Rasuulku wax uu ahaa mid marka uu maqlo oohinta ilmaha yar, soo gaabiya salaadda. Wax uu ahaa rasuulku mid aan kicin marka ay carruurta uu awoowkaga u ahaa dusha ka fuulaan, ilaa ay muraadkooda ka dhammaysanayaan. Markaa maxaad mooday ilmo yarna? Naxariistu waxbay qurxisaa laakiin waxba ma xumayso. Haddii aynnu eegno dhowr qiso oo muujinaya waalid u naxariistay carruurtoodii oo dhibtay markii danbena naxariistu ka dhigtay baariyaal waalidkood u naxariista inta badan aabbayaasha soomaalidana in aanay ubadka dhalin wax naxariis ah ma tusaan, taasi waata ubadka ka dhigtay in ay noqoto carruur qalafsan oo naxariistu ay ka dheer tahay, wax aad arkaysaa hooyooyinka oo

cisbitaalada dhooban oo wada ubad buka. Wax aad mooddaa in aabayaashu ubadka aanay dhalin marka aad si dhab ah ugu fiirsato, bal aynnu eegno aabbe duq ah cadaana ah qiso ku dhacday. Aabbuhu wax uu dhalay hal gabadh oo qudh ah, qisaduna waa tan:

Kani waa mid ka mid ah aabbayaasha dunida ugu wanaagsan. Wax uu ka fikiraa markasta gabadha keliya ee uu dhalay. Inantiisu masiiso wax ixtiraam ah ama wax wanaag ah, dibna uma soo eegto. Aabbaheed wax uu leeyahay mooto, taas oo uu dugsiga ku geeyo. Marka uu dugsiga geeyo subixii aabbaheed taasi waxay ku noqotay mid xanuun badan iyada oo raacaysa asxaabteeda. Aabbaheed marka ay ka degto dib umasoo jaleecdo hawlaheeda ayay toos u gashaa.

Markuu ka soo noqdo wax uu bilaabaa in uu soo xammaalo si uu u kaafiyo nolol maalmeedka inantiisa qudh ah ee uu dunida ka eegto. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa looga yeedhay dugsigii ay dhigan jirtay, waxaana lagu yidhi: “inantaadu waxba ma barato”, isaga oo la yaaban sida uu ugu dedaalayo ayay maantana taasi ugu darsantay. Aad ayuu aabbihii uga

xumaaday ugana murugooday runtii aad bayna u damaqday arrintaasi.

Maalin maalmaha ka mid ah ayay ku tidhi: “telefoonka aan wataa ma aha mid wanaagsan, wax aan ahay gabadha aduunka ugu liidata, waxaana idhalay aabbo aan waxba iisoo iibinayn, bal moobaylka aan wato fiiri, inta ay ku tuurtay oo ay qaylo na raacisay.” Aabbuhu uma jawaabin murugo ayuu meel la fadhiistay. Wax ay tustaa dharka ay xidhato oo meesha saaran oo ay leedahay: “bal waxa aan xidho day nasiib xumiyaa.”

Aabbuhu murugo ayuu la ooyaa oo meel la fadhiistaa, isaga oo aan hayntiisu fiicnayn awgeed oo aanu inantiisa waxba u gadi karin. Habeenkii wax uu ka shaqeeyaa meel uu ka xamaalo. Isaga oo markasta ka fikiraya inantiisa horumarkeeda, isla markaana qayladeedii maskaxdiisa ayey ku soo noqnoqotaa. Isaga oo ka fikiraya siddii uu inantiisa moobayl casri ah ugu iibiyo, wax ayna ku abuurtaa fikir iyo walaac joogto ah. Wuu ku faraxsan yahay shaqadiisa wax uu qaataa lebiska iyo mootadiisa si uu ugu shaqotago

inantiisana ugu geeyo iskuulka. Laakiin inantiisu kuma faraxsana aabbaheed oo dugsiga geynaya.

Marar badan iyada oo la fadhida asxaabteeda oo moobillo casri ah sita, wax ay ka fikirtaa moobilkeeda wayna layaaban tahay, iyada oo aan marnaba ka fikirayn dhibka aabbaheed haysta. Waa duq gaboobay shaqadiisuna ay tahay in uu xammaalo. Wax ay u haysataa in uu dhalay aabbaha adduunka ugu xun. Habeen habeenada ka mid ah ayaa aabbaheed meel shil ku galay, wax ay soo martay iyada oo asxaabteedii la socota, uma debcin oo may caawin e way iska dhaaftay.

Aabbaheed waa mid marwalba iyada uun ka fikira, lacagta uu qaatona wax uu markasta meel u dhigaa qayb, si uu moobilka ay inantuusu rabto ugu iibin lahaa. Inantiisa wuu ku faraxsanyahay. Araggeeda ayaa ka farxiya. Habeenkii danbe ayuu ogaaday in lacagtu gaadhayso moobilka ay inantiisu rabtay wuuna u soo iibiyay, markaa wuxuu yimi guriga isaga oo aad u faraxsan xilli danbe. Inantiisii ayaa eegtay iyada oo dhibsanaysa, xilliga uu albaabka ku tumay, wayna iska sii seexatay, miiskii ayuu u saaray si ay u

aragto subaxii. Wax uuna isaga oo aad u faraxsan tegay sariirtiisii isaga oo aad u daalan.

Subixii ayay soo baxday, waxayna aragtay moobaylkii oo aanay filanayn. Aad ayayna ugu faraxday iyada oo eegtay maalin walba lacagtii uu u biirin jiray si uu inantiisa moobeelka ugu soo iibiyo, waxaana aabbaha caado u ahayd in uu qoro maalinta uu in lacag ah meel ugu ridoba si uu moobeelka ugu soo iibiyo. Wax uu uga shaqeeyaa xamaal iyaduna ma oga. Wuu ka fikiraa markasta iyaduna ma oga. Wuu ku farxaa aragdeeda iyaduna wayba necebtahay araggiisa. Illaahay ayaa qalbiyada dadka rogrogee, wax ay ula tagtay moobeelkii iyada oo faraxsan, oo lehna: “aabbo moobeelkii ayaad iisoo iibisay”, aabbaheed wax uu sameeyey umuu jawabin si ay u mooddo in uu dhintay! “Aabbo kac waan ku faraxsanahay moobeelkii aad iisoo iibisay”, wuxuuna is yidhi bal waxay samayso eeg, iyada oo soo xasuusatay in ay mar kaste ku qaylin jirtay iyo canaantii kulalayd ee ay mar kaste ku tuuri jirtay isaguna aanu uga jawaabi jirin.

Way ku dul oyday iyada oo leh: “ma rabo moobeelka ee maxaad adduunka iigu cidlaysay aabbo?” Oohin ayaa ka dhammaatay, wax ayna ogaatay in aabbaheed aduunka uu ku hayey. Madaxavayuu ka taagtay aabbaheed: “aabbo ma dhiman e aamu” ayuu ku yidhi. Aad ayay u faraxday, wax ayna tidhi: “aabbo ha iga tegin, dunida adiga ayaan kaa haystaa.” Aad ayuu u farxay inantiisii oo ka naxday maalintii dunida ugu horaysay, waa kale ayaa u beryay.

Sidii caadada u ahayd mootadiisii ayuu ku qaaday si uu dugsiga u geeyo, gabadhii yaraydna way is beddeshay, wayna ku faraxsantahay aabbaheedii ay ka xumaatay markii uu dhimashada metelay. Dugsigii ayuu geeyay iyada oo u mahadcelinaysa iyada oo asxaabteedii la joogta. Aabbaheed aad buu ugu faraxsanyahay is bedelka ku yimi inantiisa oo isagu u sabab ahaa, iyada oo ay shalay ahayd markii ay aabbaheed dhibsan jirtay axsaabteedana la joogi jirtay, iminka wax weynbaa is beddelay, markasta iminka aabbaheed ayay la qososhaa oo la faraxdaa isaga oo isaguna horumarkeeda aad u sii jeclaanaya,

iskuulkiina way ku fiicnaatay aabbaheedna iminka way caawisaa.

Carrurtu waa iska sidaa uun ee waalidka uun baa laga rabaa dedaal in ay geliyaan ubadkooda.

Qiso kale oo idinka oo yaab badan.

Sheekadani wax ay ku dhacday wiil carbeed wax ayna ku bilaabmaysaa:

Wax aan ahaa arday dhigta iskuul, waxaanan lahaa hooyo. Hooyaday wax ay lahayd il qudha ta kalena way la'ayd, waan dhibsan jiray marka ay meel aan joogo soo istaagto, sidaas oo ay tahay wax ay ka shaqayn jirtay iskuulka aan dhigto si ay nolol maalmeedkayga iiga soo saarto, oo macalimiinta ayay shaaha u soo samayn jirtay xilliga nususaacaha, taasi wax ay igu sii beertay nacayb daran oo aan iyadii oo dhan naco.

Maalin maalmaha ka mid ah ayay markay hawshii soo dhammaysay, iigu timi fasalkaygii, si ay ii salaanto kadib markii ay aad iigu xiistay, aad baan uga xumaaday, ciyaalkii kale ayaa bilabay in ay ugu caayaan hooyo oo il qudha leh oo ay aad iigu jeesjeesaan. Wakhtigaas wax aan dhigan jiray dugsiga dhexe, markaan gurigii tegay ayaan qolkeedii ugu

galay aad aniga oo aad u xanaaqsan, si aan ugu sheego waxa aan tebayo ee culayska. Hoodayna aad bay ii jeclayd markasta in ay i aragto ayay xiisayn jirtay, halka aan aniguna dhibsan jiray kana xishoon jiray in la igu arko. Markii aan u tegay baan ku idhi: “waad i ceebaysaa. Wax aan ku sigtaa in aan nafta kaa jaro, marka aad iigu timaadid fasalkayga, waan ku karhay ardaydii baa igu kaa caayay. Waa in aan kaa tagaa oo kaa fogaadaa, si aanan u fadeexoobin.”

Wax aan hooyo kula hadlay erayo culus oo aanan ogayn saamayntooda inta ay qalbigeeda ku reebi karaan. Ma garanayn, waayo hooyo waxyaabo badan oo ay dareensan tahay waayo waxaan ahaaan ogayn, waaqica dhabta ah xitaa ee hooyo isheedu sidan u tahay. Sida dhabta ah maan ahayn qof fikira oo xaqiiqda raadiya, wax aan isku arkayay nasiiblaawe, maadama oo ay hooyaday leedahay il qudh ah.

Intii aan erayada kulkul iyo canaanta isugu jira aan kula hadlayay hooyo dhulka ayay eegaysay, wax jawaab ahna iima celin. Bal hooyadaa dulqaadkeeda iyo nariisteeda fiiri, may habaarin, mana caayin,

manay canaanan, wax badni kama soo wareegin in aan nasiib u yeesho jeer aan helay safar u baxay magaalo kale si aan hooyaday uga libdho. Maan ogayn in aan indhaheedii ahay mana dareemin, waayo waan yaraa markaas welibana waa fududaa, waxna ma aan fahmi karin. Diinteena suubban aqoon sidaasa uma lahayn, mana garanayn wax la yidhaado ixtiraam iyo xaq waalid toona, dhibkase iigu wayni wax uun buu ahaa in ay idhashay, oo ay wiilasha facayga ahi igu caayaan. Muddo kadib waan guursaday, wax aan noqday oo aan yeeshay carruur, wax aan helay nolol cusub iyo farxad, waanan ilaaway hooyaday kana nastay. Soomalidu wax ay ku maahmaahdaa “ **nin aad dhashay kuma dhalin.**”

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa hooyo timi gurigayga si ay ii soo booqato maadama oo anay waqti dheer i arag. Wax ay ii qabtay hammuum iyo xiiso gaar ah, wax ayna dartay u soo jartay masaafo aad u dheer iyo tilmaan aad u dhib badan. Markii ay timi albaabka gurigayga oo ay soo garaacday, markay ciyaalkaygii arkeen wax ay bilaabeen in ay ku qoslaan hooyo, aad baan u xanaaqay dhulka ayaana ila

wareegay, aniga oo cadhoonaya ayaan inta aan dib u laabtay haddana dib u soo noqday, markaasaan erayadan kulul kula duldhacay, wax aan ku idhi:

“Maxaad iigu timi adiga oo aan isoo ogaysiin? Maxaad carruurtayda uga cabsiinaysaa, halkan ka tag inta aan kuu jeedo.” Inta ay hadal debecsan oo naxariis hooyo ka buuxdo igu la hadashay ayay igu tidhi: “ii cudurdaar, waayo waan qaldamay in badan, waayo waxa dhcaday in aan jid qaldan soo qaaday oo aan ku hungoobay.” Wayna iska baxday. May habaarin, bal u fiirso hooyadan. Maalin danbena maan arag hooyaday warkeedana ma arki jirin, ilaa ay farriin iiga timi saaxiibaday aanu saaxiibvnahay oo casumaad ii fidiyay magaaladii hooyaday joogtay, markii aan magaaladii imi waxaa si heersare ah ii soo dhowaayey asxaabtaydii hayeeshii mid ka mid ah ayaa ii sheegay in hooyaday dhimatay.

Wax oohin ah uma ooyin umana murugoon, waanba ku farxay, wax uuse intaa ii sii raaciyay in uu fariin ay hooyaday ii reebtay uu ii hayo. Wax ayna qortay maalmo yar ka hor dhimashadeedii oo isla isbuucan

gudihii ayay dhimatay. Wax uuna markiiba ii keenay dhanbaalkii. Wax aan si degan u furay dhanbaalkii hooyo iigu talo gashay. Wax uuna u dhignaa sidan:

“Wiilkaygii qaaliga ahaayow; hooyo muddo warkaaga ma aanan helin, mana doon doonin waa aan ka xumahay hooyo in aan gurigaaga imid oo aan carruurta kaa argagax geliyey. Wax aan kaa codsanayaa in aad iska kay saamaxdo wax aanan kuu rejaynayaa farxad waarta, aad baan u farxay markaan maqlay inaad imaanayso magaalada, balse sariirta ayaan ka soo dul kici kari waayey, waanan ku dhici waayey in aan wejigaaga hor istaago, wax aan wiilkaygiyow kaaga warramayaa ilmo nimadaadii markii ilmo yar adiga oo la ciyaaraya isha lagaa dhaawacay, dabeetana ay ku soo dhacday. Markaasaan ishaydii midig kuu siibay, sidaas oo ay tahay waan ku faraxsanahay, oo aan aad ugu qancay waayo wax aan noqday wixii ay hooyo ahayd. Waxa i farxad gelin jirtay mar walba wiilkayga quruxda badan ee lawada hawaysto, in uu ishaydii qiimaha badnayd ku xaragoodo inkaste oo ilay la ii arkaayey, haddana waan ku faraxsan ahay arrintaas waana ku

faani jiray, waayo wax aan ahaa hooyo wax dhashay sidaa oo ay tahay, waan ku jecelahay hooyo ku waar farxad”

Halkaa waxaa innooga muuqata qiso cibri qaadasho mudan inkaste oo ay dhibtootay hooyadani, haddana halmar kama ay tegin naxariistii hooyonimo ilmaheedii, sidaas oo dhan u xumeeyay marna may habaarin wax ayse ugu dartay duco.

Diinta iyo run sheegga:

B. Diinta:

Ilmaheena yar madaama oo aynnu nahay bulsho muslim ah waxa waajib ina saaran ah in aynnu

ilamaheena waxa ugu horreeya ee aynnu baraa ay tahay in aynnu diinteena suuban barno, waxa ugu horreeya ee uu ku ababo ha noqdaan diinteena suuban, diinta ilmaha bar wixii xumaan ah ka reeb, wixii wanaagsan na u sheeg. Diintenu waa fudayd, waa kii Nebigeennu(NNKH) yidhi: “diintenu waa nasteexo.” Waa lagu celiyay oo waxa la yidhi: “yay u tahay?” waxa uu yidhi: “illaahay, rasuulkiisa, madaxda muslimiinta iyo dhamaan umadda muslimka ah”.

Markaa ilmaha u sheeg wax kasta oo diintiisa dhaawici kara, kuna barbaari afkaana iyo dhaqankeena qaybta wanaagsan, waa in arrintaasi ay waalidku hormuud ka yihiin oo ay iyagu yihiin kuwii lagu dayan lahaa. Wixii waalidku ka dhaqaaqo ayaa ilmuhuna ku dhaqaaqayaa. Sidaas daraaddeed marka uu ilmuhu yar yahay waa in uu maqlaa, arkaa waalidkii oo ku camal falay diintii, sida salaaddii oo la rabo in uu isaga oo yarba lagu tarbiyadeeyo, ka warran haddii aan waalidkuba tukan? Waa sidee xaalka ilmahaasi?

Waad qiyaasi kartaa in aan talaabo aan lamahadin ay ka dhalan doonto. Wax uu yidhi Nebigeennu (N.N.K.H) “ilmuhu marka uu toddoba sano jiro salaadda ku fara, toban haddii uu gaadhona ku garaaca, hurdadana ku kala geeya ilmaha.” Bal qiyaas masaafada fogaan ee ee u dhaxaysa toddoba sanno ilaa toban sanno imisa salaadood ayaa u dhexaysa, waxa u dhexeeya tiro aad u badan oo salaadood oo la rabo in uu ilmaha yari ku tababarto, illaa dahaaradii maalina uu saxo maalina uu qaldo, uu ilaawo marna xasuusto. Marka intuu iska kaa eego kaala baxsado marna aad ku qabato, waxaas oo dhan isku soo xoriyoo wax aad halkaa ka arkaysaa in ilmaha yari markuu in badan wax ku celceliyo ama loogu celceliyo ay midho dhal-keenayso.

Marka uu leeyahay Nebigu hurdada ku kala kaxeeyana waa in ilmuhu ay akhlaaqdii wanaagsanayd bartaan. Wiilasha iyo hablaha qol kala gooni ah la seexiyo si ay akhlaaqda ula qabsadaan oo aanu hadhow isdhexgalka ragga iyo dumarku aanu u fududaan. Waa in aad ilamaha yar ka ilaalisaa wixii xumaan u soo jiidaya, si in aad ilaaliso maqalkiisa iyo

araggiisa, taasi wax ay suurogal ka dhigaysaa marka uu wax wanaagsan arko ama maqlo in ay ka dhalato midhodhal la mahadiyo.

Nasiib xumo wax ay indhahaagu qabanayaan oo aanad eegmadooda ku raaxaysanayn, carruur la daawad siinayo waxyaabo aan fiicnayn, ama la dhegaysiisiiinayo heeso iwm. Waa in aad ilmaha yar diinta bartaa haddii aanad garanayna aad u geysaa macallin si fiican wax u baraya, oo akhlaaqdiisa iyo diintiisuba toosan tahay, isaga oo yar ku tabababar salaadda, soonka, sadaqada, runsheegg iwm.

Waalid marka hore waa in aad adiguna barataa diinta si aad u noqoto ka ugu wanaagsan ee ilmuhu ku daydo, dhiniciisa wanaagsan, meeshii uu cilmi kasoo korodhsanayo waa in ilmaha loogu dedaalaa.

Aynnu soo qaadano qisadii Axmed ibnu Xanbal iyo sidii loo soo barbaariyay: “imaamu Axmed ibnu Xanbal wax uu ka dhashay reer cilmi leh, laakiin sabool ah. Aabbihii isaga oo yar ayuu dhintay. Bal hooyadan cajaa’ibaadka ah ila eeg. Hooyadii habeenkii ayey kaxayn jirtay Axmed isaga oo sebi ah, salaadda subax ka hor ayey gayn jirtay masjidka, si ay

wiilkeeda ugu tarbiyadayso salaadda jamaca lagu tukado una tusiso ilmaheeda qiimaha ay leedahay, xagga ragga ayay fadhiisin jirtay iyana qaybta dumarka ayay tegi jirtay.

Ilmaheeda salaadda subax ayay kula sugi jirtay masjidka. Marka uu tukado ayay sheekha ku odhan jirtay u dhig haddaba wax. Waxa la soo weriyaa in uu isaga oo toban sanno jir ah qur'aanka xifdiyay. Markii uu yara koray wax ay hooyadii ku odhan jirtay wiilkeeda, guriga adigaa u nin ah, adigaa u imam ah, adigaa u sheekh ah, sidii nin masuul ah u hadal, sidii nin caalim ah noola dhaqan iwm. Salaatu laylka ayay ku odhan jirtay adigu natuji illeen adigaa guriga ka imaam ah, iyada oo hooyo iga cilmi badan iga qur'aan badan ayay i odhan jirtay hooyo adigu salaadda innoo bilow, markii aan yara waynaaday marxaladdeedii hooyo gaadhay ayaan dhaafay markaa waxay markii danbe i odhan jirtay hooyo waan daalaye waan seexanayaaye sii wad, markii uu 16 jir gaadhayna cilmi doono hooyo ka tag meeshan, wux uuna ku soo noqday hooyadii isaga oo imam Axmed ah." Waa taa tarbiyada fiicani.

T. Run sheegidda:

Runtu wax ay ka mid tahay waxyaabaha ilaahay loogu dhowaado. Waxa muhiim ah waalidku in ay runta ku dedaalaan oo aanay marnaba been sheegin. Kollay xilligan la nool yahay waa qarnigii beenta ayaan u malaynayaaye. Wax ay indhahaagu qabanayaan beeno badan oo la sheegayo oo aan loo aabbo yeelayn. Ilmahii oo been lagu ababinayo. Runtii waa afooyin ina haysta oo si wayn inoo saameeyey. Waa in waalidku runta ku dedaalaan oo ay ilmihii yaraan run u sheegaan si uu ugu barbaaro, isagaaba is kala qabsanaya markaad adigu run uun u sheegtid.

Wax aad arkaysaa ilme yar oo la leeyahay runta sheeg ama lagu garaacayo maxaad beenta u sheegtay. Aabbihiina marka uu moobaylkii ku soo dhaco ayuu odhanayaa aabbe ka qabo oo waxaad ku tidhaahdaa ma joogo aabbo! Bal arrinkaa ka warran?! Weligaa wax aanad adiguba samaynayn cid ha uga digin, haddii aad rabto in aad uga digto, marka hore adigu is ka daa waxaas ka dibna sheeg. Waa kii rabbi ku

canaantay reer binii israa'iil oo yidhi: "Ma dadka ayaad wanaagga faraysaan idinka oo naftiina ilowsan." Oo aan waxaad sheegaysaan aan idinku samaynay, bal aynnu eegno sheekooyinkan.

Nin boqor ah oo run badan ayaa wuxuu caado iyo dhaqan xun u lahaa in uu khamriga cabbo. Hayeeshee shacabkiisu may ogayn, aadna way u jeclaayeen una ixtiraami jireen. Wax uu ahaa nin dadka ka qosliya oo marka uu hadlayo ay dadku in badan ku qoslaan. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa u yimi aabbo dhibaataysan oo safar dheer soo galay wiil dhallin yaro ahna gacanta ku wada. Wax uu soo galay meeshii uu ka talin jiray, wuu codsaday in loo oggolaado, ugu danbayntii waa loo sii daayey.

Wax uu u tegay boqorkii wax uu yidhi: "wiilkaygan aad buu kuu jecel yahay, waxa la rajeeyaa in uu ku maqlo talaabadiisana lamahadiyo. Wuu i maqli waayay, muddo dheer ayaan waaninayay, khamriga ayuu si xun u cabbaaye bal ka waani." Boqorkii in badan ayuu aamusnaa, hoosta ayuu eegayay wuu fikirayay, wax uu ku yidhi: "iska noqo oo sannad ka dib igu soo laabta." Odaygii waa yaabay: "adeer meel

fog baan ka imi iminkaba dirqibaan ku imi. Markaa asxaan ii samee oo laba eray uun ku dheh.” Waa uu diiday boqorkii, wuuna iska tegay ninkii isaga oo cadhaysan. Wiilkiina sidiisii ayuu khamriga u cabbaa wuuba ka sii daray, sannadkii markii uu dhamaaday ayaa odaygii soo celiyey wiilkii ileen weli dhibaatadii xal umuu helin e. Sidii si leeg ayuu codsaday waa la soo daayey. Wax uu u yimi isaga oo dadbadan la fadhiya wuu soo kacay, wax uu ku yidhi: “sow ma tihid ninkii sannadka aan u qabtay?” iyo “haa”. Wiilkii ayuu waaniyay wax uu ku yidhi:

- Sow ima jeclid?
- Haa!
- Ma ii ballan qaadaysaa in aad iska daynayso khamriga ?
- Haa, waa ballan.

Odaygii ayaa ku yidhi: “maxaad iga soo lug goynaysay ee aad berigiiba intaa ugu odhan wayday.” Wuu aamusay muddo dheer, wax uuna ku yidhi: “adeer aniga ayaa cabbi jiray khamriga, markaa wax aan doonayey in aan iska daayo anigu, si aanan wax aanan samaynayn aanan dadka u farin, ilmaha yar aanan been ugu sheegin.”

Nebigu(NNKH) wax uu arkay haweenay ilmo yar ku leh; “kaalay waxbaan ku siinayaaye.” Wuu wayddiiyay oo ku yidhi: “maxaad siinaysaa?” wax ay tidhi: “timir ayaan siinayaa.” Wax uu yidhi: “haddii aad been u sheegi lahayd waa lagu qori lahaa.” Halkaa waxa aynnu ka qaadanaynaa in aan ilmaha yar been loo sheegin.

Samirka iyo sadaqada:

B. Samirka:

Samirku waa waa adkaysi, xejisasho iyo dulqaad badan, waana shay aad u muhiim ah runtii, noloshana

suurogeliya. Qoysku in uu samir ku dhisnaado waa muhiim, in labada lamaane isu samraan, carruurta loo samro, haddi macal aanay carruur dhalin samraan. Waayo, illaahay baa yidhi: “ illaahay wax uu la jiraa kuwa samra.” Mar kale wax uu allah yidhi: “dadka oo dhami way qasaareen ilaa kuwa illaahay rumeeyay, camal wanaagsana la yimi, xaqqa isu dardaarmay iyo kuwa samirka isku dardaaray mooyaan e.”

Nebigeennu (N.N.K.H) wax uu yidhi “samirku waa jugta u horaysa ama marka u horaysa.” Inta uu soo maray gabadh qof yar oo ay dhashay dhintay oo ka dul barooranaysa.

Waxa kale oo dhici karta in carruurtu ay kaa dhimato ama ay kugu dhib badnaadaan iyada oo lagu jirrabayo. Haddii carruurtu kuu saqiirtona way kuu shafeeco qaadayaan idanka Alle. Wax aad ogaataa in ay ubadku aanay marnaba khasaare ahayn akhiro iyo Aduunkaba. Waana in aad ilmaha ku tarbiyadaysaa samir, si uu u noqdo qof deggan oo noloshiisu ay noqoto mid lamahadiyo dhib walba oo soo wajahdana uu u adkaysan karo. Uga sheeke samirka iyo derajada lagu gaadho. Anbiyadii dhibka ay soo mareen in ay

samirka kaga baxayeen marka ay noloshu ku adkaato, oo adduunka aanu ahayn meel aan dhib lahayn laakiin ay tahay in loo adkaysto oo loo samro. Waa in aad ilmaha bartaa samirka si uu ula dhaqmi karo dadk kale .

Aynnu soo qaadano qiso aad u cajiib badan oo dhex martay aabbo xikmad badan iyo wiilkiisa yar. Wiilka yar aad buu u cadho badnaa runtii, markasta wax uu ahaa mid xanaaqa, marka qof la hadlo wuu caayi jiray dadka aflagaadayn jiray illaa dadkii oo dhan ay naceen. Sidaas oo ay tahay wiilka yari kuma faraxsanayn dabeecaddiisa ee wuu ka qoomayn jiray. Wax uu dadka ku samaynayo markasta dadka qaraabadiisa ah ayuu u sheegi jiray dhibkiisa.

Maalintii danbe ayuu aabbihii u sheegay oo ahaa Aabbo xikmad badan. “aabbo maxaan sameeyaa?” Aabbihii baa yidhi: “mar kaste oo aad cadhooto afka xidh. Beerteena gidaarka ku yaalana wax aad ku dhufataa, mar kaste oo aad cadhooto hal-musbaar.” Wiilkii wax uu u diyaar garoobay in uu fuliyo taladii aabbihii, maalinkasta wuu ku dhuftaa musbaarkii illaa

maalmihii danbe aanu waxba ku dhufan, dabeeto aabbihii ayuu ku soo laabtay qisadiina wuu u sheegay. Aabbihii ayaa ku yidhi wiilkiisa: “aabbo orod bax gidaarkii kasoo fuji masaabiirtii aad la dhacday.” Wiilkii waa baxay, daal dabadii wax uu keenay masaabiirtii oo uu wado. Aabbihii baa ku yidhi: “aabbo gidaarkii sideed uga soo tagtay?” wiilkii wuu fahmay ujeedka aabbihii, fikir kadib wax uu yidhi: “Aabbo wax aan qudha ee aan awooday in aan masaabiirtii ka soo fujiyo gidaarka laakiin raadkii ay ka tagtay masaabiirtaasi gidaarkii way ka muuqataa wayna adag tahay in aan ka masaxo ama ka baabi’iyo.” Aabihii xikmaawiga ahaa ayaa yidhi: “haddaba waa sidaas dadka aad aflagaadayso ee aad xumayso quluubtoodu. Sidaas bay dhaawac ugaga tegaysaa, wayna adag tahay in la suuliyo ama la masaxo.!

T. Sadaqada.

Sadaqadu maalka way badisaa waxbana kama nusqaamiso, wax ay ku darto mooyee. Markaa waxa laga rabaa waalidka in ay ku dedaalaan, weliba ay u

dhiibaan ilmaha yar si uu u bixiyo isagu si looga
ilaaliyo bakhaylnimada ula qabsado wax bixinta, taasi
muhiim ayay u tahay ilmaha yar in lagu tababaro.

Bal aynnu soo qaadanno qiso yar oo dhab ah oo ka
dhacday jasiiratul carab.

Nin baa wax uu lahaa xilliligii barwaaqada geel aad u
fara badan. Geelu waa wada dhalay. Nirgihii yaryaraa
ayaa daba socda. Dhulku waa barwaaqo cirka roob baa
ka socda. Wuu faraxsan yahay. Geeliisii ayuu sidaa
idhaha ula raacay. Wax uu soo xasuustay oday
waayeel ah oo jaarkiisa ah oo sabool ah oo wiilal
badan hastaysta oo maalina qada maalina qadeeya.
Wax uu qalbiga geliyay sida uu u faraxsan yahay in uu
uga farxiyo. Wax uu kaxeeyey hal iyo neefkeedii yaraa
ee ay dhashay, dabadeed wuu u tegay. Wax uu ku
yidhi: “hashan iyo neefkeeda waa hadiyad xaggayga
ka timi ye iga hooya.”

Markii aan ku wareejiyay farxadda wejigiisa ka
muuqatay ma malaysan kartid. Waa farxad qalbiga ka
soo go’aday. Waayo badan ka dib ayaa waxa dhacday
abaar. Waa sideenan oo kale; waa reer guuraa. Wuu
guuray meel daaqu ku soo hadhay ayay tageen iyo

biyuhu. Odaygii ayaa helay god ama ceel biyo ku jiraan. Wax uu yidhi: “sii jooga wiilashaydiiyow aan soo eego godkan e, mana soo laaban ilaa habeenkii.” Habeenkii oo dhan ayay ooyayeen oo qaylinayeen. Wax ay iska dhaadhiciyeen odaygii waa dhintay, xoolihii ayay kaxaysteen.

Berigii uu aabbahood odayga jaarka siiyay hasha iyo neefkeeda raalli kama ay ahayn, markaa wax ay yidhaahdeen waa in aan ka soo ceshanaa hasha oo aynnu awr ugu beddelaa odayga, madaama uu aabbo dhintay. Waayo hashu way inoo badanaysaa.

Odaygii ayay u tageen: “awrka hoo, oo nasii hashii” ayay ku yidhaadeen. Wax uu ku yidhi: “sidee idiin siiyaa, aabbihiin ayaan idiin sheegayaa.” Wax ay yidhaahdeen: “beri hore ayuu aabbo dhintay e, hasha noo soo celi.” Wax uu yidhi: “ma rabo ee wada qaata, laakiin illaahay baan idinku dhaarshee i tusa halkii idiinku danbaysay aabbihiin. Sidee ninkaa qalbiga fiican geeridiisa loo ogaan waayaa ee sidaas wax ula baxay?” Way tuseen. “Orda oo iska taga”, ayuu yidh.

Inta uu xadhig qaatay ayuu godkii galay. Sidii uu u raadinayay waa laablaab dhulka hoostiisa ah. Sidii uu u qaylinayay ayuu markii u danbeeyay taahiisii maqlay, ogaadayna in uu nool yahay. Wuuna soo jiiday dibedda ayuu u soo saaray. Su'aal buu wayddiiyay: "toddoba cisho ayaad dhulka hoostiisa ku jirtay e maxaad cunaysay ayuu ku yidhi?" Wax uu yidhi: "haddii aan kuu sheego waad yaabaysaa! Horta afartii cisho ee u horaysay biyo ayaan cabbayey. Biyihii markay gaajadii iga goyn waayeen ayaan markii danbe, wax aan dareemay in aan dhimanayo waxaan isu diyaariyay geeri, wax aan u seexday qadaadka illaahay ayaan u bandhigay arrinkaygii. Waan talo saartay. Habeenkii markii la gaadhay ayaa wax dhibco caano ah ayaa afka igaga dhacay, afkiibaan kala qaaday mise caano ayaa igu socda. Saddex jeer ayaa la ii keenayay, afartii cisho ii ugu horeeyey caano ayaan cabbayey, labadii cisho iigu danbeeyay ayay caanihii iga go'een, dhibkan iyo rafaadkani waa caano iyo quud la'aantii aad igu aragtii." Wax uu yidhi odaygii faqiirka ahaa: "haddii aan kuu sheego sababta lagaaga gooyay caanihii waad yaabaysa! Ilmahaagii ayaa ii yimi, hashii aad igu

sadaqadaysatay, ee aad hadhkeeda iyo hooskeeda hadhsanaysay ayay iga ceshadeen.” Carrurtii ayay u caqli celiyeen qisadii ayaa looga sheekeeyay, wax ay noqdeen markii danbe kuwa wax bixiya.

Labo shay ayaynu ka qaadanaynaa qisadan: kow in sadaqadu ay fadligaa leedahay iyo in carruurta xaggooda haddii dhib kaaga yimaaddo in aad u samirto oo aad waaniso.

Kalsoonida nafta iyo wax akhriska:

B. Kalsoonida nafta.

Ilmaha in aad u oggolaatid in uu naftiisa uu ku kalsoonaado, wax uu doono uu diidi karo, wax uu rabo uu dhihi karo, waan rabaa, maya ama haa waa in

uu isticmaali karo, waa in uu su'aalaha si bilaa cabsi ah uga jawaabo, waa in uu waalidka marmarka qaar la doodi karo sida inuu yidhaahdo; waxaasi maxay sidaa u noqdeen oo kale, waa in uu waxa uu yaqaan aannu ka gabban iwm. Haddii ilamaha cadaadis iyo cabudhin uu ku soo barbaaray lama mahadin doono in uu naftiisa ku kalsoonaado. Haddii aad markasta ilmaha garaacdo ama aad canaanta ku badiso ama aad markasta caydo oo tidhaahdo waxba ma garanaysid iyo in waxkasta laga caawiyo. Ilmuhu bilaa kalsooni ayuu noqonayaa, waa in inbadan ilmaha lagu dhiirrigeliyaa in uu isku kalsoonaado.

Culimada baratay cilmiga tarbiyaddu wax ay sheegaan in ilmaha xataa haddii uu kufo aan la kicin ee lagu yidhaahdo kac. Haddii aad marwalba kiciso hadhow marka uu weynaado ee dhibaato adduun qabsato oo aanu xalkeeni karin ileen wuxuu sugayaa marwalba in la kiciyo oo gacanta la qabto. Haddii aad mushkilad walba u xalliso adigu, keen qalinka kuu qoree, keen badhanka kuu xidhee iwm, ilmuhu waxba hadhow ma qabsan karo.

Beri baa nin baa wiil yar ayuu lahaa markaa isagaa wax walba u samayn jiray. Wax uu ku odhan jiray aabbo haddii aynnu kaynta aadno oo aan seexdo haddii bahal aad aragto yaanu ina cunin e dhagax ku tuur. Ileen waa wax aan ilmihii ficil ahaan aan la barin e iyo in uu falcelin sameeyee. Maalintii danbe ayay aadeen kaynta, aabbihii waa iska seexday. Wiilkiibaa arkay yey ku soo socda. Hadalkii aabbihii waxba umuu tarin waxna kama beddelin. Inta uu kiciyay ayuu yidhi: “aabbo, waa kan bahalkii yimiye maxaan sameeyaa?!”

T. Wax akhriska

Waxa waajib ina saran ah in ubadka aynnu ku carbino in wax la akhriyo waxna qoraan. Muhiimad weyn ayey u leedahay ilmaha yar, waana in lagu barbaariyo lana jeclaysiiyo wax akhriska, kolay Soomaali ahaan ma nihin ummad wax akhris ama qoris, ummad hadal ayaynu nahay, laakiin bal aynnu isku dayno in aynnu qaybta danbe ku carbino wax akhriska iyo qorista.

Ilmuhu marka uu akhriska barto wax badan ayuu ogaanayaa faa'iidooyin badan ayay u leedahay umadda. Xilligan dalalka horumaray wax ay sameeyaan akhris badan iyo in ay wax cusub ogaadan cilmigaas ayay ku horumareen. Wax aqrisku faa'iidooyin badan ayuu u leeyahay ubadka, waxaana ka mida ah: aqoon badan oo uu helo, maskaxdiisa oo balaadhata ama korta, wax badan in uu oggaado, hadalka oo uu ku barto, ku ababo akhriska iwm.

Sidee baynnu u jeclaysiin karnaa dhallaanka wax akhriska? In aad u samayso dhowr qodob oo kala ah:

In aad ilmaha u samayso, goob akhris iyo xilli akhris.

Ilmaha yar waa in aad haddii aad awooddo aad u samayso goob akhris, oo miiskii iyo kursigii leh, oo aan buuq iyo qaylo lahayn. Waa in loo sameeyo xilli aqris sida galab ama subax iyo in aad u samayso amin cayiman oo uu ilmuhu wax akhriyo saacado gaar ah. Marka aan aqris ka hadlayno macnaheedu ma aha in ilmuhu uu aqriyo uun wixii dugsiga loogu dhigay, laakiin waa in uu helaa buug dheeraad ah oo uu

akhriyo xiiso gelinaya, sawiro leh caqligiisa la jaan qaadi karta oo uu fahmi karo, marba marka ka danbaysa uu sii jeclaanayo in uu sii aqriyo.

Akhris wadareed:

In aad ilmaha yar la samayso aqris wadareed. In uu waalidku marka uu firaaqada helo uu ilmaha u akhriyo ama la akhristo buugta, uu dhegaysto oo uu ku yidhaahdo, hooyo ama aabbo ii akhri buugga. Maalin walba ula samee ilmaha akhris wadareed si joogto ah ilaa inta uu kala qaybsanayo akhris si ay dhaqan ugu noqoto, taas oo xiisagelinaysa ilmaha yar. Ku dedaal in uu ilmuhu la saaxiibo buugga.

U soo iibi buugta uu jecelyahay:

Ilmaha yar u kaxee meelaha lagu iibiyo buugta carruurta, u daa ha doorto isagu buugga uu jecel yahay. Laakiin adigu talo uun baad ku leedahay haddii uu buuggu mid xun yahay kala tali sababtana u sheeg ilmaha. Ilmaha yar u soo iibi marmar buug aad adigu u soo doortay oo sawirro xiiso leh wata. Inta badan wax ay jecel yihiin in ay buugga sawirrada ku yaala daawadaan, si aqriskuba ugu fududaado.

U kexee ilmaha goobaha akhriska ee magaalada:

Ilmaha marka aad fursad u hesho sida khamiista oo kale soo kaxee si aad u geyso goobaha akhriska ee magaalada aad degantahay. Si uu ugu dhiirrado wax akhriska marka uu arko dad badan oo wax aqrinaya, kuwaas oo laga yaabaa in uu sameeyo, isla goobtana waa in ay ku soo wada sameeyaan aqris wadareed ama mid ay midiba waxa uu jecel yahay akhriyo, taasi wax ay fursad u siinaysaa in uu soo yara dalxiisay, wax aanu arki jirin arkay, arkay in ay dadkuba sameeyaan akhris, taas oo ku dhiirrigelinaysa in uu xiiseeyo akhriska marwalba.

U samee hadiyado kala duwan xilliga uu hal buug dhammeeyo. U same ilmaha hadiyado kala duwan oo uu ku mutaysanayo wax akhriska, taas oo dareensiinaysa dhaxalsiinaysana jacayl akhris iyo xusuus waarta. Marka uu hal buug dhammeeyaba ka farxi ilmaha. Hadiyad sii haba yaraatee, marmarna u keen mid aanu kaa filanayn. Markaa ilmaha yari aad buu u jeclaanayaa wax akhriska, marmarna goobaha

dalxiiska gee oo u sheeg sababta aqriska badan awgii in uu ku mutaystay in goobtan aad keentay.

U sheeg in uu masuul yahay:

Haddii aanad ilmaha tusin masuuliyad in uu qaadi karo halkaa wax fool xunbaa ka soo baxaya. Wax aad arkaysaa nin 18 jir ah oo farxalkii la daba sido siiba dadka qurbaha ku nool. Waa dhib wayn oo carruurta haysata, wakhtigii soomaalidu miyiga ku noolayd ilmaha yar isaga oo saddex sanno ah ayay ku halayn jireen maqasha, iminka taas cagsigeedii ayaa muuqata, maantaba haddii aad ilmaha wax ku aamini waydo wax u diran waydo isaga uun u shaqayso waa dhib baaxaddeeda leh. Wax uu noqonayaa qof aan weligiiba isku filnaan karin. Haddii aad ilmaha bari waydo in uu isku filnaado adiga ayaa gacantaada ku dilay ilmahaas.

Heerka la gaadhsiiyay marka laga hadlayo in uu ilmuhu uu isku filaado oo uu ka maarmi karo qof walba, wax ay culimada caruurta ka faalootaa tidhi; macal marka uu socod baradka yahay ee uu dhaco ha

isku deyin in aad kiciso laakiin u sheeg in uu kaco, wax u diro ilmaha oo ku aamin waxa uu kuu soo qabanayo kuna hallee si uu u dareemo masuuliyad. Wax u dhiibo sida lacagta, inta badan ilmaha lacagta aad u dhiibto iyo ka laga qariyo isku mid ma noqdaan, kaad ka qarisaa wuu xadaa inta badan marka uu ilka qaado, ka kalena wuu kuu hayaa marka uu helo macal adiga oo aan ogayn.

Haku maamulin nususaacaha aad siiso laakiin wixii dhibaya in aad u sheegto uun baa kula gudboon, wax ha u doorin sida dharka ama kabaha adiga oo u tilmaamaya ama kula talinaya ka wanaagsan marka aad aragto in uu qaldamay.

Baridda sida dhib loo xalliyo:

Ilmayowga soomaaliyeed badankooda siiba kuwa qurba joogga ah, ma aha in aad ilmaha wax walba u qabato, waa in aad bartaa si uu u xalin lahaa dhibka yar yar ee soo wajaha ee nolol maal-meedkooda ah. Haddii aad markaste wax u xaliso noloshiisa heer gaadhi maayo, sida in aad badhimada u xidho,

siibadda u xidho, buugta u ururiso iwm. Waxa la rabaa in uu waxaaas oo dhan xallin karo isaga oo aan cidina caawin.

Maaraynta wakhtiga:

Waalidka soomaaliyeed wakhtiga ma mareeyaan, waxoodu waa is dhexyaac ma laha xili la seexdo oo cayiman, wax la cuno, la aqriyo, TV la daawanayo, giim la ciyaarayo iyo dhammaan wixii hawl maalmeed ah ee la qabano. Waxa fiican in carruurta loo sameeyo jadwal (time table) si ay wax badan u qabsan karaa adigana kuu caawin karaan.

Wax ay indhahaagu qabanayaan carruur dhowr sacadood TV ku qaadanaysa daawashadiisa iyo kuwo sidii ay giim u ciyaarayaan halkii waagu ugu baryay laga yaabo in gabalku ugu dhaco, waxa habboon in ilmaha la baro sidii uu wakhtigiisa sida ugu habboon u isticmaali lahaa, waayo wakhtigu waa cimrigiisa oo dhan ilmaha. Haddii aanad baran sida ugu macquulsan ee uu sida ugu haboon uga faa'iidaysto wax uu ku bixin doonaa, meelo badan oo aan adduun iyo akhiro midna aan faa'iido ugu jirin, waa in carruurta loo sameeyaa xilli wax aqris, cunis, seexasho,

daawasho TV, cibaado iyo xilli uu ciyaari karo si aan waxba uga qasaarin. Waa in labada waalid ay korniinka carruurta qorshe midaysan ka leeyihiin.

Baridda sida qorshe loo yeesho:

In aad ilmaha bartaa sida qorshe loo yeeshaa wax ay ku xidhan tahay sida guriga qorshe loogu sameeyo. Haddii guriga qorshe lagaga dhaqmo iyo jadwal maalmeed waa hubaal in aad ilmaha tustay sida qorshe looyeesho, laakiin haddii gurigu yahay jaantaa rogan dee sidaas uun buu ku soo korayaa si kasta oo aad ugu sheegto in uu qorshe yeeshana way adag tahay in aad ku guullaysataa.

Ilmo kusoo koray guri xilli walba TV-ga la daawado, la ciyaaro, internetka la iskaga jiro, giim la ciyaaro iwm sideebay suurogal u tahay in uu qorshe samaystaa? Noloshiisiiba bilaa qorshuu ku soo barbaaraye, weligiiba muu arag sida wakhtiga loo ilaaliyo laakiin wax uu bartay oo keli ah sida wakhtiga loo dilo ee la iskaga yareeyo ama loo rido, laakiin lama barin sida ugu macquulsan ee uu uga faa'iidayasan lahaa. Haddii aan la barin ilmaha sida hawluhu u kala muhiimsan

yihiin in uu u kala hor qabtona; taasina wax ay ka mid tahay qorshe la'aanta. Haddii hawl is la maanta laga doonayay aanu qaban ee uu qabto tu doraato laga doonayey waa dhibaato balaadhan. Waa in ilmaha lagu adkeeyaa in uu hawlaha u qabto sida ay u kala muhiimsan yihiin una kala horreeyaan.

Dhiirrigelinta ilmaha:

Ilmaha yari wax uu u baahanyaahay dhiirrigelin , kamana maarmo sida aanu uga maarmin biyaha ama cuntada, sida uu ugu baahan yahay qofka wayni wax riixa si uu u gaadho halka uu doonayo ama higsanayo, ilmaha yarina kama soo hadho dhiiri-gelinta lasiiyo si uu u noqdo haldoor bulshada ka dhex tilmaaman iyo tusaale nool oo lagu dayan karo. Haddii ubadku hagaagaan waxa hubaal ah in bulsho wayntuna hagaagi doonto, dhiirrigelintu wax ay ilmaha ku riixdaa in uu halyey noqdo halka dhiiri-gelin la'aantuna ay tahay taa kasoo horjeedkeeda.

Bal aynnu soo qaadano labo sheeko oo ina tusaya ilmo dhiiri-gelin helay iyo mid aan helin.

Badhaadhihii Axmed:

Axmed waa wiil yar oo ku nool meel tuulo ah oo la yidhaa magaalo la mood. Axmed wax uu dhigtaa dugsi ku yaal meel ku dhow gurigooda. Axmed wax uu dhigtaa fasalka labaad ee dugsiga hoose. Axmed waa wiil caqli badan aadna ugu dedaala waxbarashadiisa. Axmed hooyadii Caasha iyo aabbihi Xasan wax ay labaduba aad ugu dadaali jireen hagaajinta akhlaaqda wiilkooda iyo sidii ay u fari lahaayeen wax kaste oo wanaagsan oo anfacaya wiilkooda. Wax ayna ka reebi jireen waxyaabaha xun xun ee luminaya wiilkoodan toosan. Caasha oo ah hooyada dhashay Axmed wax ay u tafaxaydatay sidii ay wiilkeeda, uga dhigi lahyd mid wanaagsan oo umadda iyo waalidkiiba wax tara. Wax ayna markasta la garab taagnayd waano iyo wax-sheeg kaas oo ka dhigay Axmed mid caqligiisii wanaagsanaa usii kordhiyey.

Hooyo Caashi wax ay wiilkeeda u sheegi jirtay hal ku dheg iyo maahmaaho ay ugu duur xulayso hadba hawsha ay rabto in uu markaa qabto sida marka ay u

kicinayso dugsiga, marka uu ka yimaado iyo marka ay rabto in uu dib uga shaqeeyo casharradii iyo laylisyadii maanta looga soo diray dugsiga. Tusaale ahaan; marka ay kicinayso oo ay odhan jirtay "kac hooyo nin yaraan ku loofaray wuxuu lumiyay raacdeeye ", taas oo ay ku tusaysay in uu waqtigiisa ka faaiidaysto inta uu yar yahay waxbarshadiisana si fiican u wato.

Sidoo kale marka ay rabto in uu ka shaqeeyo laylisyada loo soo diray wax ay ku odhan jirtay: "Hooyo Axmadow fadhi iyo fuud yicibeed la isku waa, ama xaglo laaban xoolo kuma yimaaddaan" taas oo ay ku tusaysay in qofka oo iska fadhiya aanu aadyar guul gaadhi karin ee loo baahan yahay in uu qofku dedaalo, si uu u gaadho heerka uu rabo in uu nolosha ka gaadho. Sidaa iyo si la mid ah ayay hooyo Caashi ula garab taagnayd wiilkeeda Axmed hiil iyo hooba si uu wiilkeedu meel fiican ugaadho. Sidaas si la mid ah Xasan oo ah aabbaha dhalay Axmed isaga oo ka soo baxay masuuliyaddii aabbanimo ka sakow wax uu u ahaa dhiirigeliye ku dhiirigaliya wax kasta oo wanaagsan iyo saaxiib dhow labadaba.

Aabbo Xasan waxa uu wiilkiisa uga sheekayn jiray qisooyinka dadkii guulaystay si uu ugu daydo uguna noqdaan tusaale wanaagsan oo uu ku dayan karo. Aabbo Xasan waxa uu wiilkiisa aad ugu dhiirigelin jiray waxbarashada. Si uu wiilkiisu uga soo dhex baxo qayrkii, dhiirigelintaa iyo wax u sheegidda faraha badan ee Axmed uga imanayay dhanka aabbihii iyo hooyadiiba wax ay sabab u noqotay in uu Axmed ka soo hooyo guulo la taaban karo waxbarashadiisii isaga oo markasta noqon jiray wiilka kaalinta u horeysa ka gala fasalkiisa.

Aabbo Xasan mar kaste oo uu wiilkiisu ka gaadho guul waxbarashada waxa uu u samayn jiray wiilkiisa waxyaabo ka farxiya sida in uu wiilkiisa geeyo goobaha lagu dalxiiso ee tuulada gudaheeda iyo meelaha ka baxsan. Sidoo kale wax uu u qaban jiray wiilkiisa xaflado uu ku dhiirigelinayo iyo waxyaabo kale oo badan oo uu kaga farxinayo wiilkiisa iyo in uu siiyo hadiyado kedis ah oo aannu Axmed ku talo gelin si looga farxiyo loona dhiirrigeliyo, inta badan dhiirigelintaa waanadaas iyo waxsheeggaa aabo iyo hooyo

uga imanayay kadib Axmed waxa uu si farxadi ku dheehan tahay ku soo af meeray geedi socodkiisii waxbarasho ee dugsiga hoose dhexe isaga oo imtixaankii shahaadiga ahaa ee dawladdana uu Axmed ka soo hooyey guul ballaadhan.

Axmed intii aanu gelin dugsigiisii sare waxa uu u baxay fasax iyo dalxiis dheer oo dad iyo dal barasho ah kaas oo qaatay in muddo ah, socdaalkii dheeraa kadib Axmed waxa uu ku soo noqday tuuladiisii waxaana uu la kulmay reerkoodii oo uxadhko xidhay in ay u guuraan magaalada si uu wiilkoodu halkaa uga galo dugsigiisii sare una sii wato waxbarshadiisii Axmed aad ayay u farxad gelisay in aabbihii iyo hooyadii sidaa ugu dedaalayaan waxaanu u arkay in uu ku wayn yahay waalidkii.

Axmed waxa uu ka bilaabay fasalki koobaad ee dugsiga sare dugsi ku yaal magaalada waxaana uu aad ugu dedaali jiray in uu noqdo qof aqoon leh isaga oo iska dhisay aqoon diini iyo mid maadi labadaba sidii hore si la mid ah. Axmed wax uu guulo ka soo hooyay waxbarshadiisii dugsiga sare afarsano oo dedaal dheeri ah uu Axmed sameeyay kadib, waxa uu

u fadhiistay imtixankii shahaadiga ahaa ee dugsiga sare maadaama oo uu Axmed aad u dadaali jiray waqtigiisa badankiisana ku qaadan jiray, aqrinta iyo baadhista waxyaabaha la xidhiidha hadba maadada uu dhiganayo oo weliba ay u dheerayd dhiirigelinta ay mar walba la garab taagnaayeen waalidkii, wax ay sabab u noqotay in uu Axmed noqdo wiilka u sarreeya imtixaanaadka dalka, waxaana uu Axmed helay deeq waxbarsho bilaasha oo debedda ah halkaasi oo uu ku soo qaatay waxbarshadiisii jaamacadeed isaga oo soo dhammaystay illaa heerka labaad ee wax barashada.

Muddo kadib Axmed waxa uu ku soo noqday dalkiisii iyo dadkiisii uu jeclaa oo aad ula soo dedaalay wiilkooda qayb libaaxna ka qaatay horumarkiisa aqooneed iyo tiisa nololeed ee kalaba. Hadda Axmed waxa uu diyaar u yahay in uu anfaco dalkiisa, waalidkii iyo naftiisaba waxaana ay gaadhay waqtigii wuu gacantiisa ku ciil bixi lahaa una abaal gudi lahaa aabbihii iyo hooyadii noloshiisana ugu filaan lahaa. Axmed waxa uu shaqo ka helay mid kamid ah goobaha ganacsi ee gaarka loo lee yahay isaga oo ka noqday madax iyo masuul loo igmaday

inuu maamulo hawlaha ka socda goobtaa ganacsi waxaana uu si hufan u waday hawlaha loo igmaday.

Muddo kadibna Axmed waxa uu noqday mulkiile oo waxa uu aasaasay goob ganacsi oo uu isagu leeyahay. Axmed muu ilaabin abaalkii aabbihii iyo hooyadii wax uu u sameeyey aqal weyn oo ay ku noolaadaan kadibna waxa uu geeyay xajka. Hadda Axmed waalidkii wax ay noqdeen kuwo uu anfacay oo abaalkii ay galeen ayay maalayaan wax ayna wiilkooda la garab taagan yihiin duco taas oo sabab u noqatay Axmed in uu nolosha ka gaadho heer aad u fiican.

Balanbalkii Cali:-

Cali waa wiil yar oo waqtiga iyo waayuhu ku xumaadeen. Waa wiil yar oo ku nool magaalada. Waxa uu huwadaa cirka waxaana uu gogladaa dhulka. Waayaha adduunka ayaa ka dhigay Cali mid aad u liita oo aan awoodin in uu ku noolaado nolol farxad leh. Cali hooyadii iyo aabbihii oo ah Canab iyo Cumar iyaga ayaa qayb ka qaatay nolol xumada soo wajahday

wiil-kooda yar. Sababta oo ah iyagu wax ay ahaayeen laba waalid oo markasta is haysta loo garqaado laakiin aan waxba iska beddalín kamay fikiri jirin caqabadda ay wiilkooda yar ku keeni karto dagaalkan joogtada ah ee iyaga ka dhexeeya iyo is qabsashada badan ee ka dhexeeya.

Cali waxa uu ku garaadsaday in badana usoo joogay nolol ku salaysan khilaafaad joogto ah oo dhex maraya waalidkii iyo culaysyo badan oo ay ka mid ahaayeen daryeel la'aan waalid iyo dhiiri-gelin la'aan taas oo sababtay in Cali noloshiisu sii xumaato marba marka ka dambaysa. Cali waalidkii waxa ku adkaatay in ay nolosha usii wataan si wada-jir ah aakhirkiina wax ay talo ku gooyeen in ay kala tagaan iyaga oo aan eegin sida uu go'aankaasi u saamayn doono nolosha wiilkooda yar, sidaana waxa ku af jarmay rejadii Cali ee uu ka qabay in mar uun uu ka dhammaan doono mushkiladaha nololeed ee soo wajahday intii ay qoyskoodu wada noolaayeen.

Cali markii aabbihii iyo hooyadii kala tageen waxa uu aabbihii ku hanjabay in uu wiilkiisa isagu haysan doono isaga oo ku cadaadinaya Canab oo ah hooyada

dhashay Cali. Hooyo canabna way uga tagtay wiilkii. Intaa kadib mid waliba wuxuu ku fikiray in uu samaysto nolol si uu u helo nolol tii hore ka wanaagsan. Nasiibdarro se mid waliba waxa uu iloobay masuuliyaddii ka saarnayd wiilkooda yar.

Hadda Cali aabbihii wax uu guursaday gabadh kale. Cali na waxa ay dantu ku qasabtay in uu ku noolaado gurigii cusbaa ee aabbihii. Cali aayadii may ahayn qof fiican ee durbadiiba wax ay ku qaabishay wiilkii yaraa xumaan iyo colaad hor leh iyo caqabad nololeed oo cusub. Cali muu helin waxbarasho uu noloshiisa ku dhiso. Muu helin jacayl waalid. Waanadii wax sheeggii iyo dhiirigelintii uu xaq ugu lahaa midkoodna. Waxa se kaga sii darraatay aayadii oo noqotay mid bilaa arxan ah oo disha, diliinkana ugu darta in ay u dirto hawlo adag oo aannu wiilka yari qaban karin. Kuwaas oo waxyeelo u leh jidh ahaan iyo maskax ahaan. Waxa kale oo u dheerayd wiilka intaaba canaan badan iyo cay joogto ah oo wiilkii yaraa qalbigii ka dishay kuna noqotay boog aan weligii bogsanayn. Wax ay had iyo jeer aflagaadayn jirtay wiilka yar hooyadii, waxayna usheegi jirtay in ay hooyadii tuurtay oo ay nacday

wiilkeeda, taasina wax ay keentay in uu Cali u qaado colaad hor leh hooyadii.

Dhanka kale wax ay Cali aayadii ku diri jirtay aabbihii markasta iyada oo ka been abuuri jirtay, waxyaabo badan oo xun oo aanu samayn. Aabihiina waxba muu habsan jirin e waxa uu budhka u qaadan jiray wiilkii yaraa, waxaana uu u dili jiray sida xoolaha mana uu siin jirin wax daryeel aabonimo ah iyo wax beerjileec ah midna. Intaa waxaa u dheerayd isaga oo aan cunto fiican la quudin jirin.

Cali waxa uu ka daalay noloshaa qadhaadh ee ka soo wajahday qoyskooda dhinac walba isaga oo aan weli ka rejodhigin nolosha wax ay dantu ku kaliftay in uu Cali ka tago gurigii aabbihii una baxo suuqa. Cali waxa uu noqday baalashle, wax aannu isku dayey in uu noloshiisa kafeeyo, hase ahaatee waxa mushkiladi kaga timi bulshadii oo badh kamid ah markasta oo uu adeegga kabo nadiifinta u qabto in ay siiyaan mushqaayaddii iska daayoo ay dagaal ugu dari jireen. Cali masaariifta uu maalintii ka helo adeeggaasi may ahayn mid ku filan in uu ku noolaado, waxaana qasab ku noqotay in uu hudheellada ku yaala suuqa cunto u

raadsado. Hudheelladiina wax ay ku xidheen si ay u siiyaan cunto in uu weelka u nadiifiyo. Markii uu Cali noloshaa ku jiray muddo dhibkastana ha ku ahaatee uu iskaga nool yahay, wax ay isku barten goobtii asxaab dhawr ah oo sidiisa oo kale waayuhu ka soo saareen guryahoodii oo iyaguna nolosha ka dhacay kuwaas oo ku nool waxyaabaha ay dadka suuqa jooga ka soo dhacaan ama ay tuugonimo ku soo helaan.

Wiilashan danyarta ahi wax ay Cali ku hoggaamiyeen noloshee xumayd ee uu ku jiray mid kasii daran waayo iyagu wax ay ahaayeen dad xabagta dhuuqa waxaanay sababeen in uu Cali xabagle noqdo. Cali waxa ku dhabowday maahmaahdii soomaaliyeed ee ahayd "wax aan caano iyo nabad ahaynba waa la kala qaadaa." Cali saaxiibbadii wax ay uga sii dareen noloshee Cali ee markii horeba aan cagaha adag ku taagnayn, sidaasna waxa uu ku noqday Cali qof nolosha ka dhacay oo xumaanta iyo samaantu ay isugu mid tahay waxbana aan xeerinayn.

Cali waalidkii iyaga ayaa masuul ka ah nolol xumada soo wajahday wiilkooda waayo, wax ay gabeen xilkii ka saarnaa wiilkooda ee ahaa in ay si wada jir ah uga

qayb qaataan sidii wiilkooda ay ugu barbaarin lahaayeen si wanaagsan oo u horseedda nolol fiican oo uu gaadho wiilkoodu iyo in uu yeesho mustaqbal wanaagsan si uu u hiigsado qayrkii waxaase eeddaa iyana aan ka maqnayn aayadii xumayd ee wiilka heshay iyada oo aanay asxaabtiisii danbana uga rayn Cali. Waxa iyana qayb laxaadle ka qaatay in Cali sidaa ku dambeeyo bulashadii uu la noolaa oo iyagana aanu ka helin wax soo dhawayn iyo arxan darro ah waxyaabahaa oo isu biirbiirsaday Cali aakhirii waxa uu ka mid noqday tuuugadii ugu waynayd ee ku noolayd magaalada.

Abaal mari ilmaha marku wax fiican sameeyo:

Ilmaha yar kama maarmo in aad abaal marin u samayso marka uu wax wanaagsan sameeyo, waayo waxa isku mid u noqonaysa markuu xumaan sameeyo iyo markuu wanaag sameeyaa, waa waajib in aad ilmaha abaal marin siiso markuu wax fiican sameeyo ama derejo fiican gaadho dhinaca naftiisa. Wax aan kale oo meesha ka madhnayn iyana in ilmaha aad

waaniso ama ciqaabto marka uu ku kaco falal aan fiicnayn, waxyaabaha aad u samayn karto waxa ka mid ah:

- 1) sida in aad xaflad u qabato: markuu kaalingalo ama qalin beddesho. Taasi wax ay xusuus ku reebaysaa maskaxdiisa wax uuna noqonayaa mid halkii kasii kordhiya dedaalkii uu waxbarashada ugu jiray.
- 2) Waxa kale oo ka mid ah in hadiyado kedis ah la siiyo oo aan loo sii sheegin. Taasi wax ay ku abuuraysaa jacayl iyo farxad joogto ah. Wax uuna isu aqoonsanayaa in uu yahay qof qiimo ku leh waalidkii agtiisa. Waa in aan waalidku ka xishoon hadiyadu macal haday yar tahay sababta oo ah ilmaha yar agtiisa waa wax ku wayn.
- 3) In dalxiis la geeyo: waxa fiican in ilmaha dalxiis la geeyo sida marka uu natijada imtixaanka wax fiican keeno. Ama uu sameeyo wax badan oo wanaagsan sida baarinimo badan aad ka aragto laakiin ma aha in aad cadaalad darro samaysid. Waa in aad u sheegtaa kuwa kale in uu waxaa ku mutaystay in la abaal mariyo si ay iyaguna ugu daydaan oo ay ugu tartamaan, waxa kale oo ilmaha raad ku reebta marka

qoyska aabbihii, hooyadii iyo carruurtii si wadar ah ay meel dalxiis leh u tagaan, in loo sameeyo dalxiis kaas oo aynnu labo u kala qaadayno:

KOW: in magaalada dhexdeeda loo dalxiis geeyo sida toddobaadkii mar ama bishii sida meelaha ay carruurtu ku ciyaarto oo kale ama in laga soo cuntaysiiyo hudheelada iyo maqaaxiyaha waawayn ee qurxoon ee magaalada.

LABO: in magaalo kale la geeyo ama laga saaro meesha uu ku nool yahay sannadkii ama labadii sannoba mar, haddii ay awoodan.

4) Sheekooyin dhiirigelinta:

Waa in aad ilmaha u sheekaysaa sheekooyin dhiirigeliya, sida dadkii guulaystay ama dadkii aan guullaysan. Kaas oo uu ka barankaro casharro ama khibrad kala duwan. Marka aad u sheegto dadkii guullaystay sida rasuulkeenii, asxaabtiisii iyo dadyowga kale ee dunida kagaadhay guulaha la taaban karo; waxa uu isku deyayaa in uu ku daydo, sidoo kale kuwa guuldarraystay marka aad uga

warranto wax uu isku deyayaa in uu ka baydho dariiqii ay ku guul-darraysteen.

Tusaale ahaan dadkii hore ee reer guuraaga ahaa wax ay carruurta uga sheekayn jireen sida loo noqdo qof adag oo geesi ah. Sababtu wax ay ahayd noloshii adkayd ee markaa lagu jiray, kuguma inaad ilmaha ku dhiirigeliso adadayg ama nolol qalafsan uga waranto, laakiin waa in aad wax badan dunida ka ogaysiisaa ilmaha yar uga sheekaysaa dadkii hore iyo dadka danbe labadaba. Waa in uga jawaabtaa ama uga warrantaa wax badan oo uu is wayddiin lahaa. Bar in ay la fadhiistaan dadka waaweyn; sida awoowayaashood ama ayeeyooyinkood iyo kuwo kaleba, waayo wax ay ka baranayaan waayo aragnimadii ay soo mareen markay u sheekeeyaan ilmaha yar.

5) In la baro qof uu ku daydo:

Ilmaha yar inta uu ka yar yahay toban, wax uu ku daydaa hooyadii iyo aabbihii. Waayo, cidkale ma yaqaanno saaxiib ma laha cidkalena ha sheegiba taas baa ugu wacan, taas beddelkeeda markuu waynaado

wax uu baadigoobaa sidii uu u helilaa qof uu ku daydo, waa in aad tustaa qofka ugu wacan ee lagu daydaa in uu yahay Rasuulkeena (NNKH), waa in aanu ku dayan gaalada iyo Yuhuudda siday wax u cunaan, cabbaan iyo siday u lebistaanba.

Sida aynnu ka aragnay dhalinyadeena badanka ama ubadkeenaba, waa in aad tusi kartaa ilmaha qof wanaagsan oo uu ku daydo adiga oo is barbar dhigaya tusayana qofkaasi wax uu ku wacanyahay ama ku xun yahay, laakiin waa in marka hore uu kala garanayaa wanaagga iyo xumaanta oo aad soo bartay. Bar geesiyadii islamka sida: Abu-bakar, Cumar, Cisman iyo Cali. Dhammaan umaddii wanaagsanayd, ilmaha in aad barto tariikhda islaamka waa waajib saaran waalidka, si uu u barto taariikh nololeedka umaddii wanaagsanayd ee nooladay xilligii nebigeena. Wax aad kaloo bartaa inuu in badan wax aqriyo si uu waxbadan u ogaado.

Baridda go'aan qaadashada:

Ilmaha yar waxa kale oo muhiim ah in uu barto go'aan qaadasho ama sida go'aan adag loo qaato. Ilmayaan wax aad arkaysaa la baray uun erayga "haa" oo keliya, oo aan maayadaba aqoon. Taasi waa mushkilad weyn oo ilmaha haysata, ilmuhu waa in uu diidi karo waxa aannu rabin in uu sameeyo oo uu go'aan ka qaadankaro, laakiin haddii uu wax walba yeelo waa dhibaato. Wax ay dhibaato ku tahay naftiisa. Waalid kulul oo aan ilmaha yari hadal ku soo celin karin, oo haddii uu soo celiyo na uu nabarku saaran yahay ayaa ku badan umadda soomaaliyeed meel ay joogaanba. Waa in ilmaha cabudhintu laga daayo. Ilmuhu waa in uu diidi karaa wax uu khalad u arko yeelina karaa wax uu wanaag u arko, laakiin adigu ha isku deyin in aad labadaba adigu tusto, laakiin waa in uu cabsi uga buuxdaa oo aanay isugu kalsoonayn taasina wax ay ka turjumaysaa habka loo soo barbaariyay.

Wax kaydsashada:

Maskaxdiisa aad u soo carbisay in uu kala saari karo xumaanta iyo samaanta labadaba. carruurta

soomaalida siiba badan kooda. Waa in aad ilmaha yar bartaa sida wax loo kaydsado ama loo ilaashado. Waayo, haddii wixii uu heloba cuno waa mushkilad. Marka uu ilmuhu u dhaxeeyo 5-8 jir, wax aad lacagtiisa nususaacaha siisaa saddex casho oo ka mid ah una sheeg in aanad waxba siinayn saddexdaa cisho ee uu dhowrto wixiisa. Haddii maalmaha hore cuno wax aad arki doontaa isaga oo la soo qabsanaya oo kaydsanaya. Marka uu gaadho 8-12 sii lacagtiisa nususaacaha toddobaad sidii si leegna u sheeg. 12-15 xilligaasna bil u dhiib, markuu dhaafo xilliga qaan-gaadhnimada wadasii, waxbana ha u xisaabin. Waayo iminka wuu isku filan yahay.

Soomaalidu ma laha ama ma barto ubadka in ay lacagtaa yar ee nususaacaha ilmuhu in uu wax ka kaydsado laakiin wax ay bartaa in uu cuno lacagta la siiyo ee soo gashaba. Wax aad arkaysaa dalkeena ilmo 20 jir ah oo aan waxba kaydsan oo weli waalidkii sidii dhallaanimo weli wax ka sugaya. Taasina layaab ma laha oo dalkeena ayaa badanka dadku gacanta waxba ku hayn. Laga yaabee in aan ilmayaasha badankoodu aanay helinba wax lacag nususaace la yidhaahdo.

Bal aynnu tusaale u soo qaadano waddanka Malaysiya carruurtooda. Ilmuhu marka uu waxbarashada bilaabo, sannadka koowaadba waxa hooyada iyo aabbuhu baraan in uu lacagtiisa badh ka mid ah in uu meel dhigto si ay mustaqbalka u anfado, oo uu wax uun ugu qabsado, taasna waxa u suurogeliyay baynnu dhihi karnaa dhaqaalaha reerka ayaa u saamaxaya in waxna la cuno waxna la kaydsado. Innaga kaydsi daaye wixii la cunayay baaba ku yar laakiin waynnu gaadhi doonaa xilligaa isaga ah. Ilmahaasi lacagtaa wuu dhigayaa illaa uu dugsiga sare ka baxo, waxaa la yidhaahdaa ilmo walba oo reer Malaysiya ah maalinta uu dugsiga sare ka baxo, wuu haystaa lacagtii uu cumrada iyo xajka ku tegi lahaa.

Taas macneheedu waxa weeye ilmo walba oo reer Malaysiya ah wuu xajiyaa marka uu dugsiga sare dhammeeyo isaga ayaana iska bixiya lacagtii uu soo kaydsan jiray iyada oo aan cidi caawin. Waana arrin fiican oo ku dayasho mudan. In aad ilmaha bartaa wax kaydsashada iyo in aannu dadka baryin, islaamkuna wuu dhiirigeliyay in wax la kaydsado waxna la bixiyo.

Islaamku in aad waxaba wada bixisana ma ammaanin in aad waxaba haysatana ma ammaanin laakiin labadaa dhexdooda ayaa la ammaanay. Markaa arrinkan waa arrin u muhiim ah ilmaha yar. Wax uu kale oo baranayaa sida lacagta loo maamusho marka ay soo gasho. Marka ay mid badan soo gasho in uu wax ka kaydsado oo aannu wada cunin ayuu baranayaa. Wax aad kale oo baraysaa in wax la bixiyo. Waxa kale oo wanaagsan baa la yidhaahdaa, ilmaha yar isaga oo kula socda haddii qof wax ku wayddiisto ama aad niyootid in aad sadaqo la baxdo ilmaha yar in loo dhiibaa wanaagsan si uu ugu barbaaro wax bixinta iyo in dadka tabaalaysan la caawiyo. Sida sanduuqyada masaajidda oo kale, waa in aad u dhiibtaa ilmaha yar si uu isagu ugu rido uguna barbaaro wax bixinta iyo gacan furnaanta, taasina wax ay baraysaa in aan wax uun la kaydsan ee wax la bixiyo oo la sadaqadaysto; waxaana fiican in aad u sheegto oo fahansiiso macnaha ay ka dhigan tahay sadaqo ee aannu u qaadan uun in wax la bixiyo uun sida gaalada, laakiin waa in waalidku u sheegaan

carruurta fadliga ay leedahay wax lagu helayo ee abaal
ah.

Cutubka 5aad

Carruuraha baahiyaha gaarka ah leh:

Waxa jira ubad badan oo baahiyo gaar ah leh, taas aan bulshadu ku baarugsanayn, kuwaas oo aan helin daryeel ku filan. Wax ay ku dhex dayacan yihiin

bulshada dhexdeeda, qofkastana waxa ka saaran masuuliyad. Waxa ka mid ah ubadka baahiyaha gaarka ah leh, kuwa naafada ah, derbijiifka, kuwa labadii waalid ka dhinteen, agoonta iyo rejadaba, wax ay u baahan yihiin in xil culus la iska saaro daryeelkooda iyo ka war hayn toodaba.

Aynnu soo qaadano qisooyin ku saabsan. Suugaan wixii abwaanadu ka tiriyeen iyo diinteena islaamkana innaga oo ka eegayna:

Darbijiifka oo ah ubad la dayacay siday noqotaba kuwaas oo aan haysan meel ay galaan, wax ay cunaan, wax ay cabbaan iyo cid daryeesha oo xaalkooda ka war haysa. Ubadka lama dhalo oo qudh ah laakiin daryeelkoodu, wax uu dul saran yahay waalidiintii dhalay sifo uu doono ha ku dhashee, waayo ilmaha yari marnaba denbi ma laha, haddii la waayo waalid kafaalo qaata oo ay dayacan waa in bulshadu ka war hayso. Bal aynnu soo qaadano gabayga derbijiifka laga tiriyaay kaasoo aad u xanuun badan qofkii damiir lehna ka ilmaysiin doona. Waxa uu suugaanyahan kani toosh wayn ku ifiiminayaa kana hadlinayaa derbijiifka iyo nolosha ay ku nool yihiin:

**“Duruuf adag baan ku koray
Daryeel hooyana ma helin
Dedaal aabbana ma arag
Tol iyo xidid ii damqada
Dadkana kuma lihi walaal
Wax aan u hoydaa derbiga
Baahida dacalkayga taal
Ayaa dawarsiga i baray
Darxumo badan baan qabaa
Dubkayga waxaa ku shidan
Dab kuu waayuhu i sudhay
Han door ah mar baan lahaa
Damiir togan baan lahaa
In aan darka caawiyoo
Digtoor noqdo waan jeclaa
Waxseen la dakaamayaa
Dantiyo waayaha i xidhay
Dulliga nolosheen ku jiro
Diiftayda wax aan arkaa
Da’daydu markay tagaan
Dugsiga iyagoo qurxoon
Ayaan qudha deeq ma helin
Farxadda waan kala didnaa
Wax aan gashadaa dirays**

Maryaha duugeed qubtaan
Dux iyo iidaan ma cuno
Dugaag wax aan qaybsanaa
Hambada aad daadisaan
Badh baa daacuun u go'ay
Markay waayeen dabiib
Badh bay dhaxamuhu dileen
Dufaankiyo qabowga daran
Badh baa daad soo rogmaday
Habeen dumay uu la tegay
Naftooda badh baa deldelay
Markay dunidii naceen
Aqoon yahan nama dersaan
Xaaladda derbi-jiifku yaal
Digriga culimada wadaa
Dar alle nooguma hadlaan
Dastuurkuna wuu na gabay
Qoraaguna wuu na dagay
Dad weynaha uma bandhigo
Ciilkiyo dacas kaa na dilay".

Xigasho: Cabdirixiin Sidiq "Heello"

Qiso ku saabsan carruurta aan hooyada iyo aabbaha midna lahayn ee kusoo koray dhibaato; nolosha adagna ay la soo deristay aynnu bal jaleecno. Mar waa wiil yar oo da'ahaan jira 10 gu' wax uu ka mid yahay ubadka ku xaraysan xarrumaha agoomaha ee magaalada Hargaysa. Waa wiil aamusan oo aan jeclayn in uu la sheekaysto ubadka kale, ma jecla in uu qofna ka helo ama dareensiyo kalgacayl, naxariis ama dareen waalidnimo iyo walaalnimo ku dheehan tahay, waa keligii socod in badan cadhaysan, cidkasta oo ka soo ag dhowaata, wax uu maqashiiyaa kelmado laga naxayo sida: "waan ku neceb ahay, waan ku dili iyo kuwo la mid ah." Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa si naxariisleh ula hadashay macalimad ka hawl gasha goobta uu joogo, wax ay ugu yeedhay eray aannu maqlin muddo sannado ah, wax ay dhegihiisa maqashiisay eray uu ifka ugu jeclaa haddana uu ugu neceb yahay, wax ay ku tidhi "HOOYO WAAN KU JECELAHAY ILA HADAL." Waxa uu ugu jawaabay ilmo (oohin) kulul oo dhabannadiisa yar yar ee wayihiisu ka muuqdaan buuxisay, waxa uuna ku yidhi: "ma tihid hooyaday, ma noqon kartid hooyaday, mana rabo inaa noqoto hooyaday"

Waxa ay dedaal dheer u gaadhay wiilka xaalkiisa iyo sheekadiisa, muddo ka dib ayuu hadlay una sheegay wixii soo maray, waxa uu yidhi: “ waxa aan ahaa ilmaha keliya ee ay dhaleen hooyaday iyo aabbahay. Wax aan ahaa calaamadda keliya ee ay ka haystaan jacaylkooda. Wax aan ahaa adduunkooda oo dhan aad baan u jeclaa inta ay i jeclaayeen ayaa ka badan, wax kasta oo wanaagsani ma waaran aniga oo arkayo ayay iga tageen, indhahayga oo shan ah ayay hortayda ku geeriyooden.” Mana rabin in uu dhacdadaa dul istaago isaga oo xanuunka dhacdada is dhaafinaya, hadalkiisa ayuu sii watay waxaana uu yidhi: “ safar dheer oo xanuun badan ayaan galay, qoyskii ii dhowaa oo dhan ayaa diiday in ay i kafaalo qaadaan, dibna halkan maanta joogo ayaan ku danbeeyay, maalmo ka dib ayaan xaruntan dhex joogay ayaan la kulmay labo wiil oo naftaydu aad uga heshay, wax aan ka dhex arkay in ay ila dareemayaan wax aan dareemayo, waan jeclaaday iyaguna sidaa si ka daran ayay ii jeclaadeen, wax ay ahaayeen aniga oo kale waxa ay waayeen waalidkood, si kooban wax ay ahaayeen naftayda oo laba jidh oo kale ku jirta.

Ubadka iyo ciyaarta waxa ka dhaxeeya xidhiidh aad u fiican. Wax ay maalin maalmaha ka mid ah u dabaal degeen, ceel kuyaal dooxa Hargeysa wax ay ku soo raaxaysanayeen jewiga degan ee magaalada, wax ay naftooda kaga soo bi'inayeen daalka biyaha darayga ah roobka xalay, waxa la gaadhay wakhtigii ay carruurta kusoo noqonayeen xarunta, dhammaan ubadkii way soo noqdeen balse labadaydii saaxiib iyaga waxa la keenay kobta iyagoo la leeyahay waa mayd. Halkiisii wax uu Marwaan ku soo gunaanaday: "macallin fadlan ha i jeclaan, haddii aad i jeclaatid waad dhiman." Sheekadan wax aan kasoo xigtay Barnaamijka Aqoon-Maal ee shirkadda Telesom.

Waa in aynnu u damqanaa kuweenna jilicsan una naxariisanaa dhibkaa iyo kuwo kale oo badan ba, way jiraan oo ay ubadka yar yari qabaan. Ubadka bilaa hooyada ah iyo kuwa agoonta ah waxa iyagana haysata dhibaato badan in kastoo haddii mid u nool yahay uu kaasi uu dhibkasta uu dhabarka u rito, oo uu dhaamo kuwa labada waalidba ay ka dhinteen ama derbi jiifka ah, waa in bulshadu iska ilaaliso xoolaha

agoontu leedahay ee ay leeyihiin ubadka yaryar ee aabbayaashood dhinteen, taas oo uu ilaahay xaaraan timeeyey cuniddooda uuna u yaboohay naar kuwa ku xadgudba.

Bulshadu way iska dhayalsadaan arrinkan isaga oo ah, labadaada waalid haddii uu mid ka mid ah uu noloshaada ka maqan yahay waxa kala dhantaalan farxadda ilmaha yar, ha u sii darnaato waayista hooyada oo ilmihii uu noqonayo bilaa daryeel. Kaalin teediina aan cid u buuxin kartaa aanay jirin macal haddii uu aabbuhu dedaalo aannu buuxin karin kaalinta ay ilmaha ugu jirto.

Aynnu soo qaadano sheekadan xannuunka badan buug ay qortay gabadh la yidhaahdo Harso buuggaas oo magiciisu yahay: wuxuu jacaylku muhiim u yahay? Wax ay tidhi: “waxkasta oo ilmaha yar noloshiisa soo marta waxa muhiima in uu jacayl ka helo. Haddii aanu ilmaha yari helin jacayl; noloshiisa raad xun bay ku yeelanaysaa, wax ay tusaale usoo qaadatay nin caan ah oo ku nool dalka Maraykanka. Wax uuna leeyahay dhakhtar caana oo daweeya cudurka

kansarka (cancer) kuwooda ugu fiican ee daweeya cudurkaas oo magiciisa loogu magac daray. Wax ayna ku bilowday markii uu soo gadhay fasalka shanaad macallimaddiisa ayaa aad ugu fiirsatay noloshiisa. Wax uu dugsi ku yimaaddaa dhar jeex jeexan. Timo taagtaagan oo aan fidhnayn. Wax ay kale oo aragtay in uu yahay ilmo aan qoslin oo aan carruurta kale la ciyaarin, oo inta badan murugaysan. Wax ay kale oo u fiirsatay in uu imtixaanada uu ku liito uu dhaco oo tacliintiisu aad u hoosayso.

Maalin maalmaha ka mid ah oo ku beegnayd dhalashada macalimadda, ayaa ardaydii wax ay macallimaddaa ukeeneen hadiyado badan oo qurux badan. Laakiin wiilkii yaraa wax uu u keenay hadiyad Bac madow oo kuwa qashinka ku duuban oo ay ku jirto dhalo cadar oo in yari ku jirto oo intii kale la isticmaalay iyo silsilad yar oo kuulihii badhka daateen. Markaa carruurtii kale ayaa ku qoslay, iyada oo macallimaddu dhiirrigelinaysa wiilka yar ayay xidhatay silsiladdii cadarkiina way isku buufisay, wax uuna yidhi wiilkii yaraa oo faraxsan: “maanta wax aad u egtahay hooyaday. Sideedii oo kalena waad u

udgoon tahay.” Taasi wax ay macalimadda ku dhalisay in ay wiilka yar xogtiisa daba gasho oo ay ogaato oo xafiiska maamulka ay baadho oo ay aqriso wixii warbixin laga qoray wiilka yar ee macallimiintii ka horreeyay ay qoreen, wax ayna qoreen; wiilkan waa wiil aad u dedaal badan laakiin maalmahan hooyadiibaa aad u xannuunsanaysa; mid kale wax uu qoray hooyadii way dhimatay wiilkan yar, wuu is beddelay maalmahan, waxba ma dhigto. Mid kale wax uu qoray wiilkan yar aabbihii ma daryeelo oo aad buu u murugaysan yahay. Wax ayna ogaatay dhibka ilmaha yar haysta. Markaas bay bilowday in ay la dedaasho oo ay hooyo labaad u noqoto.

Marka uu dugsiga yimaado ayay timaha u feedhi jirtay, u cadayi jirtay, quraac siin jirtay oo ay dharka ka beddeli jirtay. Ilaa uu qalin jebiyey noqdayna dhakhtar caan ah way garab taagnayd. Wax uuna yidhi in aan halkan soo gaadho maanta waxa ka danbaysay Hooyadayda labaad marna ah macallimadaydii.

Bal arrinka u fiirso dalalka xogta la diiwaan geliyo weeye waxa sidaas ahi. Bal kuweenen aan cidi ka war

hayn day ee dayaca nolosha ku dhammaystay, carruurta waayey hooyadood yaraan wax ay la soo daala dhacaan dhibaato aan dhammmaad lahayn noloshooda. Immisaa la dhibayaa oo murugo la jooga dhulka dushiisa cid caawisana aanay jirin.

Sidaa si la mid ah marka aabbuhu dhinto waxa carruurta soo wajahda dhib aabbo la'aan oo aan kaalintiisii cidi buuxin karin, haddiiba ay hooyadu dedaashoo oo ay buuxiso kaalintii aabbaha oo carruurta masaariiftii u raadiso ay ka dayacmayaan oo hab barbaarineedkii uu ka lumayo ileen hooyadii suuqii ayay gashay e. wax ay idhahaagu qabanayaan hooyooyin badan oo shaqo tegaya oo ilmahoodii ay ka raaceen dadka xun xun ee daroogada cuna. Sababtu waxa ay tahay hooyo wax ay imanaysaa iyada oo maanta dhan shaqo adag ku soo jirtay oo ay daalan tahay. Hawsha ay ciyaalku guriga ka wadaan ma oga inta badan wax caawiyana ma helaan hooyooyinkaasi.

Labada waalid kii maqan booskiisii waa banaan yahay carruurtana saamayn taban ayay ku yeelataa. Waxa la gudboon umadda in ay carruurtaa caawiyaan kana war qabaan qofkasta oo dhib qaba xil weyna la iska

saaro. Waxa kale oo ka mid ah kuwa ku dhasha aabbo la'aanta ama soomaalidu u taqaano garac (wicil). Ilmahan yari isagu denbi ma gelin laakiin waalidkii ayaa denbiga sameeyay, waxaa waajib ina saarana ah in carruurtaas la siiyo xaq ay innagu leeyihiin sida kuwa kaleba ay u helaan.

Inta badan carruurta bilaa aabbaha ku dhalata waa in lasoo xaaqo, ladilo markuu dhasho, la tuuraa markuu dhasho oo ay bahaluhu cunaan ama qof helo, ama si fiican looma koriyo. waana dhibaato haysata carruurtaas. Taas macmeheedu ma aha in aan xaaranta dhiirrigelinayo oo aan lee yahay waa sax in la dhalo, laakiin carruurta wax denbi ay galeen ma jirto.

Waxa waajib ah in aan la dilin oo kollayba denbi way sameeyeen waalidkiiye in aanay midkalena kusii darsan ee ay ilmaha siiyaan xaqiisii barbaarineed kana toobadkeenaan wixii ay sameeyeen. Waa kii rabi yidhi (carrurta ha laylina ilaahay ayaa irsaaqa idinka iyo ubadkaba). In aad dhasho ilmo xaaraan ah, waxaa kasii weyn oo ka denbi badan in aad disho ilmo yar oo aan waxba galabsan.

Waayo, sinada waa denbi aad Alle ha gashay marka aad ka toobad keento waxa suuro-gal ah in Alle ku saamaxo laakiin kani waa xaq qofka yari leeyahay ama xaq bini'aadam ilaa aad isaga cafis waydiisatona tobadi ma jirto markaa halayska ilaaliyo, ilmaha marka la tuuro marka cidda ka agdhow uunbuu waalid u yaqaanaa laakiin markuu waynaado uunbuu dadka ka maqlaa (waa garac), waa kaa noloshee ka siibtay ee derbi-jiif noqday. Intaa waxa u dheer hagar daamada bulshada dhexdeeda kaga imanaysa marka laga yimaaddo ta waalid la'aanta.

Bal ila dhugo sheeko yar; Warfaa waa wiil dhashay bilaa aabbo intaa waxa u sii dheer waa la tuuray, aabbo iyo hooyo wanaagsan ayaa helay wayna koriyeen, kuwaas ayuu ku soo barbaaray nolol fiican ayuu ku noolaa. Markii uu waxbarashadii jaamacad geli rabo oo uu labaatankii gaadhay, ayaa odaygii xannuunsaday. Xannuun kadibna wuu dhintay. Islaantiibaa gacanta kusii haysay, iyana wakhti ku dhow ayay dhimatay. Wax ay ka dhinteen xoolo badan wax ayna ka tageen labo carruur ah wiil iyo gabadh. Markii la damcay in la dhaxlo ayaa loo

sheegay in aanu waxba kulahayn oo aanay dhalin labada waalid. Waxa ku bilaabmay walaac, werwer iyo murugo hor leh; wax uuna bilaabay in uu ka fogaado bulshada uu la noolaa.

Wax uu waayey, wax uu cuno, cabbo iyo hoyba. Wax uu kale oo bilaabay Warfaa in uu mukhaaddaraad cabbo si uu isku ilowsiiyo dhibka aannu filanayn ee ku dhacday. Warfaa iminka wax uu ka mid yahay darbi-jifka u baahan in la caawiyo oo la gacan qabto.!

Waalidka iyo hawlaha ka reebban :

Shaqaalanimada hooyada:

Hooyooyinka oo ka mashquula barbaarinta ubadkooda sannadaha ugu horreeya ee cimriga dhallaanka, dhab ahaantii waa dhibaato weyn, waana arrin u baahan in lag feejignaado, wuxuuna la kulmayaa ilmaha yari dhibaatooyin badan oo maskax iyo jidh ahaanba ka soo gaadha. Cilmi baadhis lagu sameeyay xarunta agoonta ee wadanka Roomaniya ku taala; ayaa lagu sheegay carruurta oo saacado badan ooyi jiray xoolka dhexdiisa oo aan cidi qaadi jirin, cidina aamusiin jirin, markii ay waynaadeen ee maskaxdoodii la baadhay oo kombuyuutar(Computer) la saaray ;waxa la arkay meelo badan oo maskaxdooda madow. Meelahaa waa meelaha masuulka ka ah naxariis, jacayl, qurux iyo farxadda ay dareemaan noloshooda.

Ilmaha yar caqligiisu wuxuu koraa hal sanno ilaa toddoba sano inta u dhexaysa, waa in ay waalidku ilmaha siiyaan naxariis, jacayl iyo in uu ilmuhu aqoon helo si uu u noqdo bini'aadam dhammays tiran.

Prof.**George** wax uu yidhi: “ Hooyada reer Jabbaan waa cunsur muhiimad u leh saamayn ballaadhanna ku leh barbaarinta ubadkeeda, maxaa yeelay? Waxa ay aaminsantahay in iyada kaligeed saran tahay

mas'uuliyadda waxbariddooda. Wax ayna si xoog leh u taageertaa kaalinta iskuulka, ilmaha barbaarintooduna waxa ay si dhab ah u bilaabantaa marka uu dhasho".

Ubadka waa in lagu barbaariyaa jacayl iyo caawinta umadda muslimiinta ah lana dareensiyo in uu noqdo mid wax ka beddeli kara waa in la farxad geliyaa ubadka oo ay dareemaan in aad tahay garabkoodii oo ay isku kaa hallayn karaan. Aabbayaal badan ubadkooda ka ma war qabaan wax ay qabaan wax ay doonayaan iyo dareemayaan toona la saaxiib ubadkaaga ku barbaari diinta islaamka. Wax uu Nebigu yidhi (N.N.K.H): "ku barbaariya ubadkiina salaadda amra marka ay toddoba jir yihiin ku garaaca marka ay toban jir gaadhaan jiifkana ku kala geeya wiilasha iyo hablaha si dhaqankoodu u fiicnaado." Bar ubadkaaga salaadda, soonka, sadaqada iyo caawinta dadka liita ee muslimiinta ah, dareensii in uu yahay halyey usoo kacaya muslimiinta una sheeg in waajibaadyo badani sugayaan oo ka saaran umadda muslimiinta ah .

Nebigu (N.N.K.H) isaga oo barbaarinaya mid ka mida asxaabtiisa kuwii ciyaalka ahaa wax uu ku yidhi: “marka aad cuntada cunayso bismillaahi dheh, midigtana ku cun, dhinaca ku xigtana ka cun.” Waa in aad bartaa ubadka waxyaabaha wanaagsan.

Nebigu (N.N.K.H) waakii mar kale ku lahaa wiil yar maku baraa kelmado: “illaahay ilaali haku ilaaliyee, marka aad cid wax su’aalanaysid alle su’aalo, marka aad cid magan gelaykana Alle magangal.” Ubadka waxa la rabaa in allahooda lagu xidho si ay kuu anfacaan adduun iyo aakhiraba. Nebigu (N.N.K.H) wax uu yidhi: “saddexdii sadaqatul jaariyada ah waxa ka mid ahaa ilmo saalixa oo kuu soo duceeya marka aad dhimato.

Ubadku waa hantida koowaad ee bini’aadamku leeyahay. Nimco Alle bixiyo waa tii ugu qaalisanayd. Ka warran haddii aad dayacdo ubadka u sheeg, in aad jeceshahay si ay kuugu xisaabtamaan, mar walbana ha cadaadin laakiin bar oo ka qaybgeli oo wax ka wayddii talooyinka si uu u dareemo masuuliyadda iguna barbaaro musuuliyadnimo bar ixtiraamka iyo xaqdhowrka dadka waawayn.

Ibnu Khaldun waxa uu yidhi: “ardaygii ama addoonkii kusoo barbaaray cadaadis waxa ka qaalib noqda cadaadiskii, naftiisuna mar walba cidhiidhi ayay dareentaa, firfircooniduna waa ay ka guurtaa, waxa uuna ku qasbanaadaa been iyo shaqsiyad xumo. Cabsi uu ka qabo cadaadis hor leh, waxa ay dhaxalsiisaa in uu barto khiyaano iyo wax isdaba marin.” Aabbayaasha qaar waxa ay ku doodaan in barbaarintu tahay in la muujiyo ad adayg iyo weji macbuusnimo. Wax aad arkaysaa aabbo weji kaduudan guriga dhexdiisa wax aad mooddaa aalad ama qalab loo sameeyay aargudasho, ama in uu tusaale u yahay argagxisnimo, waxa ka kala cararayo ilmihiiisa isaga oo mid waliba ku gabanaayo daafaha guriga meel ka mid ah mana ahan in ay ixtiraam iyo xishood ah oo ay u hayaan aabbahood u ga gabanyaane waa cabsi iyo argagax ay qabaan carada wejigiisa ka muuqata, waana dhaqan aan waafaqsanayn xeerka barbaarinta, xaaraanna ku ah islaamka.

Nebiga (N.N.K.H) wax uu yidhi: “kuwiina yar yar u naxariista kuwiina waaweyna ixtiraama.” Ciyaalku wax ay aad ugu baahan yihiin wanaaggaaga iyo naxariistaada, wax ay rabaan aabbo ay lasaaxiibaan ku kalsoonaan karaan oo ay wax u sheegan karaan booska aad bannayso aabbo, hooyadu ma buuxin karto ilmuhuna debedda ayuu u baxayaa si uu u raadiyo naxariista, jacayl iyo wanaag.

Ha cadaadin ilmaha:

Soomaalida inteeda badan carruurta way cadaadiyaan sida marka ilmahu yar yahay oo kale lugtay ka xidhaan ama intay qolal yar yar galaan ayay inta banaana quraarado dhigtaan qofkii yaraa maantaba kaa ha taaban taas baa lagu hayaa, qofka yari wax uu leeyahay tamar badan carruurtuna tamarta ma kaydiso waxaa loogu talo galay in ay markiiba gubaan. Qof yar oo socod barad ah marka aad maantaba joogtid haahdo dee adiga ayaa ku dawaqaya. Wax ay kale oo sameeyaan in ay ka qariyaan wax ay u diidayaana ma og tahay haddii aanad ilmaha aaminin wax u dhiiban wax aad u diidaysana aanad ku qancin dhibka uu leeyahay

suurtogal ma aha in aad ka mancido, waayo maantaba wuu raadin wax uuna is wayddiinayaa sababta loogu diidayo.

Ilmaha oo aad wuxuu jecelyahy u diido wax ay keentaa in uu waddo qaldan u maro sidii uu ku heli lahaa marka aad waalidka wax aynnu kula talinaynaa in aanay ku cadaadin ilmaha in ay u diidaan wax ay jecelyihiin. Hablaha si gaar ah ayay dadka qaar u cadaadiyaan ama ku qasbaan in ay wiilasha u shaqayso. Qaar guryaha ayay ku ilaaliyaan dabagal wayna way ku sameeyaan ka dibna wax aan la mahadinbaa inantaa ka soo baxa.

Ilmaha ugu yar ayay soomaalidu aad u koolkoolisaa kuwa kalena ku cadaadisaa in uu wax walba isagu leeyahay. Lama baro in uu waxa leeyahay waxaasna walaalaha ka waawayni leeyihiin. Wax walba waa la siiyaa marka uu ku ooyo ilaa uu jaarka ciyaalkooda ku qabsado woxooda. In ilmaha lagu cadaadiyo in uu qabto shaqo adag oo aannu awoodin, haku cadaadin in uu qaato shay aannu rabin sida dharka ama kabaha.

Ha u kaydii ilmaha xumaan:

Ilmaha yar hadba wixii aad ku dhaqanto ayuu inta badan dhaxlaa oo siddii aad waalidkaa iyo dadka kale u la dhaqmi jirtay uun bay ubadkaaguna ay kuula

dhaqmayaan. Marka aan leenahay ubadka xumaan ha u kayd in wax aan ka wadnaa iska ilaali sinada. Waayo, ubadkaaga ayay u danbaysaa haddii aad waalidkaa caasi ku ahaydna adiga ayay kugu noqonayaan caasi waalid. Waakii abwaan Hadraawi kaga faallooday maansadiidsii Hablaha geeska markii uu lahaa:-

**“Gocashada xannuunka leh
Waxaan uga gol leeyahay
Godob aabbe falaybaa
Ubadkiisa gocondhiyo
Gumarshiga ku noqotee
Gabi dheer ku dumisee
Ninka inan ma geyda
Golqaniin ku maalee
Gurrac kaga daneystow
Wax aad gaax sanaysiyo
Gashigaad cunaysiyo
Xumahaad galaysaa
Ruuxay ka go’an tahay
Gabadhaada weeyee
Gefka aad falaysiyo
Waxaad geysanaysaa
Galab kale ka sheekayn”**

Maansadan waxa aynnu ka dheehan karnaa, in ay sinadu tahay sida daynta oo kale hadhow lagaa gudanayo oo kale. Waxa laga gudayaa oo laga sinaysanayaa maanta haddii aad sinaysato gabadhaada, inantaada iyo walaashaa. Waxa habboon in uu qof ka fogaado sinada iyo waxa keeni karaba. Aynnu soo qaadano gabaygii kale ee cadho waalid ee uu tiriyeey Abwaan Laabsaalax.

**Weli dunida maad caban
Kugumay cadaan talo
Maad arag cidhiidhiga
Cidlo wheel kamaad dhigan
Wakhti caasha kuma sudhin
Dhibta maad cawaysimin
Qofay hayntu ciishoo
Welwel ciilay maad noqon
Cisha qudhana maalmuhu
Dacar kuma cabsiinoo
Cibro kuuma tababarin
Cashar kuuma dhigin adag**

Dadka caamo iyo mudan
Qof la cawlan maad noqon
Cisigaagu muu lumin
Calafkaagu muu gudhin
Cawadaadu may dumin
Cidhibtaadu may go'in
Cududaad ku faantiyo
Xoogiyo cadaankani
Cidla kaagamay iman
Waxaad tahay curuuqaha
Cadka aabbe laga jaray
Imisuu ku ciiltiray
Intuu dhiilka soo culay
Caano dhay ah kugu habay
Cadaadiyo qasaxa daran
Cagta qodaxda kaa jaray
Imisaa sir iyo caad
Cadka kaad u qalantiyo
Canbaar iyo mid quudheed
Si cadaana kuu faray
Koluu celiyo xoolaha
Koluu ceel biyoo shubo
Koluu dhiso cariishyada
Koluu maydho calalada

Koluu caday uu soo guro
Koluu daas yar calafsado
Koluu gaadhi gacan culus
Curuuquhu ku daalaan
Cimaarado rag leeyahay
Koluu ciid u kala rogo
Casho kuuli laga dhigo
Camal baadidoonkii
Carabaha koluu tago
Koluu albaabka soo celi
Sii celi ku xoogsado
Siduu kuugu helo ceesh
Muxuu kuu caraaboo
Ceeryaamo iyo dhaxan
Dhado caal madow iyo
Cadceed iyo kul kuu maray
Cimidh kayna kuu maray
Caska waaga kuu kacay
Kuu guday cirjiidhaha
Curad taabo qaadiyo
Inaad noqoto ciiltire
U xamilay cidhiidhiga
Maadaa cadhoon kara
Maadaa caddibi kara

Misna cunaha qaban kara
Eray qudha ku celin kara
Calooshaada oo madhan
Weligii wax muu cunin
Adoon caafimaad qabin
Cawdiisa kuma ledin
Isagoon ku ciidsiin
Dhar cusayba muu gadan
Cabsi iyo dagaal jira
Cidla kaaga muu tegin
Culays heer kastuu yahay
Niyad xumo kumuu celin
Itaal ceelkasta uu dhigo
Caynaano muu dayn
Cabin hawl uu kuu galay
Cagtaa daashay muu odhan
Ceeb waxa aad leedaha
Weli calool kumuu qaban
Xaajo kaa cawaran weli
Cid kumuu halayn kale
Cuud iyo camaladuun hayn
Uu hayn nolosuna cakiran tahay
Oo jeebku caaydh yahay
Caano maal kumuu gamin

Cimrigoo siyaado ah
Cawaraaya taagtee
Waa ciroole taagdaran
Culays weeye ruux qaba
Gabow caasha saara
Ciirciirka badayoo
Wuu lumay codkiisii
Wuu tegay cadkiisii
Wuu dhego cuslaadoo
Caadbaa fuulay dhaayaha
Bukaan weeye cuduriyo
Cuskadeen xanuunadu
Maaha caydi kula mida
Haddii uu cad fududaa
Beri caafimaad qabay
Cararkana ku fiicnaa
Aabbahaa cadweeyaan
Maanta caawimaad iyo
kaa mudan cisayntee
Damiir ceebta diidiyo
Caqli maanu kugu jirin
Cashar maanka koriyo
Cilmigiyo shareecada
Ma waxaad ka tahay caydh

Umuusoo ciyaar ku gudin
Caradani shisheeyee
Duqan caguhu barareen
Taws buu la ciiree
Aabbahaa ma cudurkaad
Ku cananaysaa
Caamiyo nin liitaa
Hadal daran ku celiyee
Cadow mooda kii dhalay
Agtiisan karha oo ka cararee
Yaan cisayntu kaa lumin
Waalid caasi haw dhuran
Inkaar lagu casuumoo
Laga naco carshiga sare
Nin hortaaba caasiyey
Waalidkiina ciil baday
Oo calaamo lagu ridin
Caro edeg laguma arag
Cagu waalid liitoo
Hadeer ciirsimaad baday
Cuskashada ul jabaysiyo
Waayeel lama canaadee
Marna lama canaadee
Cirkan kaa sareeyaa

Inuu caawa kugu dumo
Ama ciidda hoosiyo
Dhulka caadil kula jaro
Cidhib laawe kaa dhigo
Manaad kaba cabsoonayn
In aad dhega cuslatoo
Cududaha laxaadkiyo
Ka curyaanto dhaayaha
Ama ciidda miistoo
Xisku kugu ciladooboo
Aad tuurto calalada
Miyaad kaba cabsoonayn
Noloshuba cibaariyo
Culays ma waydoo
Wakhtaa hoos u soo celin
Adna waad cag fududee
Miyaa cududo waynaan
Calankaagu taagnaan
Weligaa cudoonaan
Cadceedaa dhacaysiyo
Maal-mahaa cartamayaa
Ayaa ku caraabin doonoo
Cajil iyo da'a baad noqon
Seediyo carjawdiyo

Wuu tegi cadkaagani
Beri baad canbuusnayd
Sidii caday u dhuubane
Ha dhitaysan cuqubada
Adoon hadalka celin Karin
Cawradaada dedan Karin
Carrabkaagu talax gabay
Carruurtiyo dhashaadaa
Kugu cariigsan doontoo
Waad cabasho badatee
Naga daa catowgiyo
Kugu odhan cabaadkee
Yaan cadhada eebiyo
Cadho waalid kugu dhicin
Ku cuskanin inkaaruhu
Caydh iyo saboolnimo
Yaan cidhif lagu sudhin
Dadyaad qof caanoo
Farta lagu cilaaloo
Yaad noqon canbaar qaba
Carabkaagu yuu baran
Hadal caabuq keenoo
Yaan colaad u joogiyo
Belo caashaq lagu qorin

Haku noqon xumaha caan Hana galabsan caalwaa!

Dhinaca kale aynnu eegno marka waalidka baari loo noqdo. Qisadan wax ay ku saabsan tahay baarrinimada wax ayna ka dhacday waddanka Sucuudiga. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa wiil baa yidhi: "wax aan imid guriga hooyaday, gurigayga ayaan ka imid, waxaan u tegay hooyaday oo meel fidhida, murugona ay hareeraysay, iyada oo dhan ay murugaysantahay oo ay ka muuqato, wax aan ku idhi; 'hooyo maxaa kugu dhacay ee aad la murugaysantahay? Max ayse yihiin warqadahan aad gacanta ku haysaa.'

Hooyo ayaa tidhi: 'murugadu wax ay ii haysaa waraaqahan aan gacanta ku hayo waxay ka timi shirkadda korantada oo ah dhowr bilood oo is gaadhay, lacagta la iga rabaana waa 500 oo riyaal, lacagtaasna ma hayo, wax aanse la murugaysanahay weliba waraaqda waxa ku qoran muddada oo la cayimay haddii lagu soo bixin waayo in korantada la goosanayo. Hoos ayaan eegay oo aan fikiray. Wax aan

ku idhi: 'hooyo maxaad ula hadli wayday hebel iyo hebel waxa laga yaabaa in ay ku caawiyaan e.' inta ay sidaa xabadka gacanta iiga saartay ayay igu tidhi: 'kuwaas adiga ayaan kaaga kalsoonahay.' Kelmaddii ayaa i taabatay. Inta aan hoos fiiriyay waan damqaday, wax aan dareemay dhibka hooyaday haysta iyo inta ay leegtahay.

gurigayga aan hadda ka soo tegay ilmahayga iyo xaaskayga 500 oo riyaal ayaa uga soo tegay, wax shaqo ahna ma hayo, meel kalena ma filayo ay wax iga soo gelayaan, 500 ee aan islahaa xaaska iyo carruurtu biil haka dhigtaan bishan, hoos intaan fiiriyey oo aan muddo dheer fikiray ayaan is idhi, ilmahaaga iyo xaaskaaga miyaad gaajaysiin, lacagta korantada cid uunbaa bixinaysee, haddii xataa korantada la jaro maxaa ka macno ah, xaaskaaga iyo carruurtaada yaanay kaa rafaadin. hooyo ma sidan ayaad uga tegay?

Wax aan bilaabay sidii aan u qancin lahaa hooyo. Hooyo khayr baa ilaahay ka dhigayaa lacagtana waa la bixin doonaa. Hooyo 'macasalaama' ayay iga dabo tidhi. Gaadhigayga ayaan furaha ku rogtay waanan dhaqaajiyay. Su'aal ayaa madaxayga ku soo dhacday,

wax ayna i leedahay haddii qof marti ah kuu yimaaddo maanta sow maad marti soori lahayn, jawaabtu waa haa, hooyadaa miyay ka liidataa qofkaa martida ah, gaadhigii ayaan dib u soo celiyey. Hooyaday ayaan albaabka ku soo garaacay. Hooyo macaan warqadda keen ilaahay hakaa raali noqdee. Muu dhibsan culays kasta oo saaran hooyadii. Wuu soo qaaday warqaddii. Waxa uu yimi gurigiisii. Markii uu warqadda soo qaadanayey muu ogayn in uu account illahay wax dhiganayey, wuuna soo bixiyay lacagtii. Wax shaqo ah oo uu sugayaa ma jirto. Labo maalin ka dib ayaa lagu casuumay xaflad ka dhacaysay gobolkii uu markaa degdanaa.

Xafladda waxa joogay madax ka mid ah madaxda waddanka ugu saraysa. Markii xafladdii dhammaatay ayaa qof waliba qof la sheekaystay. Nasiib wanaag wax uu la kulmay ninkii madaxda ahaa ee xafladda ka soo qayb galay ayay sheekaysteen oo way is xaal warraysteen. Ninkii madaxda ahaa ayaa si xogogaalnimo ah u warraystay ninkii laakiin wax dhib ah muu sheegan ee wax uu yidhi: “alxmdulilaah illaahay ayaa na asturay.” Ninkii madaxda ahaa wax

uu ahaa nin aad u caqli badan wuuna fahmay in xaaladdiisu adagtahay, wuxuuna jeebkiisa ka soo saaray 50,000 oo riyaal wax uuna siiyey ninkii.

Wax uu si degdeg ah u tegay gurigii hooyadii isaga oo faraxsan, wuxuuna ku garaacay albaabka, hooyadii ayaa tidhi: “maxaa ku helay, waa maxay xilliga aad socoto?” hooyo waxba intaan kaa bixinayey 5000 maan kaa bixiyo 1000 si aan u helo 10,000 oo riyaal, 5000 riyaal wuxuu dhalay 50,000 oo riyaal. Waataas baarinimada marnaba laguma qasaaro waala helaa abaalkeeda.

Qiso kale oo dhab ahna aynnu eegno oo ka dhacday wadanka Masar, gaar ahaan magaalo madaxda Qaahira. Guri ay degganaayeen gabadh, carruurteedii iyo hooyadeed oo duq ah ayuu dab qabsaday. Gabadhii wax ay bilowday in ay daabusho ciyaalkii oo badbaadiso ugu danbayntii dabkii wuu soo dhowaaday wax aana u hadhay hooyadeed iyo cunug yar oo naas jaqayey. Wax ay samayso ayay garan wayday. Ma hooyadeed mise ilmaheeda? ayay badbaadisaa ayay uurka ka tidhi, waa arrin culus

gabadhii wax uu illaahay waafajiyay in ay hooyadeed qaaddo oo ilmaheeda ay ka tagto, markii damdamiskii yimi ayaa la raadiyay maydhkii ilmaha yar, waxaana loo yimi ilmihii oo aan saxar soo gaadhin, ilmaha yar ilaahaybaa badbaadiyay sababta oo ah wax ay horaysiisay xaqii waalidka.

Waa maxay caqabadaha haysta ilmaha iminka:

Carruurta maanta joogta, caqabado kala duwan ayaa haysta kuwaas oo saameeya ilmaha yar maskax iyo jidh ahaanba kaas oo uu marka uu korayo laga dareemayo. Dhibka uu la soo koray, taas oo aan ka hadhin macal marka uu waynaado wuuna saamayntaa

u sii gudbiyo carruurtiisa, halka qaarna ay waashaan ama xisku uu ka tago.

B) Labada waalid oo is fura (kala taga):

Kalatagga qoyska waxa keena siyaabo badan dhibaatooyin badan, sida dhibaatooyin dhaqaale, dhaqanka ama dabeecadda oo lamaanuhu isku fahmiwaayeen, balwadda, faragelin kaga timaadda qoysaskooda, guurka fudud, yaraan oo lamaanuhu isku guursadaan iwm. Dhibaato baahsan ayay ku haysaa ubadka marka ay waalidiintu kala tagaan, sida in ay ku dhacaan daryeel la'aan oo waalidiintu isku haleeyaan ama in hooyadii qudha ay ku soo baxsato biilkii carruurta. Waxbasharasho la'aan oo ku dhacda iyo tarbiyo la'aan baahsan taas oo sabab u ah kala tagga lamaanaha. Wax yaabaha ay ka dhaxlaan carruurta burburka qoyska waxa ka mid ah:

- In ay carruurta waalidiinta ka waayaan xaqii ay ku lahaayeen oo ah tarbiyad, waxbarsho, daryeel waalid, quudkii ay noolaan lahaayeen, lebiskoodii iwm, oo ay waalidiinta ka waayaan.

- In ay haleesho cudurro xagga nafsiga ah oo ay bulshadii ugu faafto waalidkood baa is furay oo dib u dhac dhan walba ahi uu soo wajaho in ay ka kala go'odo ama laga joojiyo waxbashadoodii.
- Carruurta waalidoontood is fureen wax ay halis u yihiin in ay ku dhacaan cudurro waawayn oo ka nafsiga ahi ugu horreeyo.
- Iyaga oo aan helin ama ku qancin su'aalo badan oo ay qabaan oo marka furriin dhaco carruurta waalidiinta ay wayddiiyaan sida meeshii ay ku noolaan lahaayeen, waxbarashadooda halkii ay kasii wadan lahaayeen iwm.
- Lammaanaha oo aan carruurta danayn marka ay labada qof is furayaan oo cadhadooda ay xakamayn kari waayaan ama in uu midba mid ku haleeyo.
- Carruurta marka ay arkaan waalidiinta oo is furay waxa ku dhacda naxdin iyo niyad xumo farxadda ayaana ka guurta.
- Carruurta qaar ciil iyo calool xumo awgeed in ay dabeecaddoodu is beddesho oo falal xun xun ku kacaan, gebi ahaanba qaraabada xiddhiidhka u jaraan. Qaar wax ay saamayn weyn ku yeelataa guurkooda

danbe. Qaar iyaga oo wax barashada ku wacnaa ayay noloshaba ka dhacaan.

T)Waalidka oo khilaaf joogto ah:

Dhibaatooyinka ay carruurtu la kulmaan waxaa jira lammaanayaal aan is furin isna qabin oo intaa noloshoodii ku dhammaystay buuq iyo wareer. Kuwaas oo kale carruurta wax ay ku yeelataa dhibaato ka badan tii furniinka taas oo aanay carruurtu xallin karin. Waalidiin badan ayaa wax ay sameeyaan qilaafkoodu waa mid soo noqnoqda oo aan carruurta ka qarin. Heerka isqabqabsiga lammaanahu iyo dagaalka dhexdooda oo aan carruurta laga qarin dhaawac wayn ayay ku abuurtaa, wax ay ku abuuri kartaa in ay labada waalid nacayb u qaadaan, in ay ku jahwareeraan qilaafkaas waalidka iyaga oo aan midna raacayn iyo in ay labada waalidba nacaan oo ay noqdaan ku cuqdadaysan, niyad jabsan, aamusan, markasta fikira, colaadi ay ka buuxdo iwm.

Waxa waajib ku ah in lammaanuhu khilaafkooda ay ku xalliyaan meel aannay ka ag dhowayn carruurtu.

Mararka qaar furniinka maslaxad iyo danbaa ugu jirta qoyska, khaasatan carruurta haddii isla joogiddu ay ka dhib badan tahay furiinka. Aabbaha oo xaaskiisa ku dhex canaanta carruurta marka ay qalad samayso. Wax ay sababtaa waxyaabo badan oo colaad iyo calool xumo ah oo carruurtu qaadaan. Sida inay tusaale xun halkaa ka qaataan, in ay bilaaban in ay dhinac la saftaan labada waalid. In kalsoonidii qoysku burburto. In ay daciifto midnimadii qoyska iyo in ay labada waalidba nacaan iwm.

J) Carruurtii qaar oo aan la gayn goobo waxbarasho:

Taas oo ay ugu wacan tahay waxyaabo badan, sida waalidkii oo aan haysan wax ay ku geeyaan ama aan fahansanaynba qiimaha ay leedahay, carruuraha sida derbi jiifka iyo kuwa aan haysan wax ay wax ku bartaan, waa kuwa ugu badan ee aan weli la gayn goobo waxbarasho. Waxa ku waajib ah dadyowga samafalada ah ama dawladdu in ay hoos u eegaan inkaste oo ay jiraan dedaalo badan oo la sameeyay haddana weli baahidii way jirtaa.

X) Baraha bulshada ama internet:

Baraha bulshada oo iminka u noqday carruurta tusaale xun ama meel ay wakhtiga ku lumiyaan, halkaas oo muddooyinkii u danbeeyay wixii ay ka dhex arkaan in ay sameeyaan. Kaas oo ah tusaale xun oo ay iminka carruurta da'aahan yar ay ka qaataan sida film xun ama heeso taas oo saamaysay da'ayarta maanta joogta. Wax ay in dhahaagu qabanayaan ilmo yar yar oo isticmaalaya oo aan cidina ka ilaalin ama loo samayn wakhti ku habboon kaas oo uu sida ay jecel yihiin u isticmaalaan, qaar baa jira ka raaca diimo qaldan iwm.

KH) Aabbo la mood:

Maanta bulshadeenna waxa ku badan aabbo la moodka ubadkoodii dayacay ee gidaarrada qaad iyo sigaar la fadhiya. Badanaa aabo nool laakiin ubadkiisu ay dareemayaan aabbo la'aan. Maalin kaste marka ay arkaan carruur aabayaashoodii la ciyaaraya ama uu

jacayl u muujinayo way qoomamoodaan. Badanaa hooyo meel silcaysa ee aan weli ka quusan ninkeedii oo uu gidaar kasoo eegayo iyada oo carruurta la daaladhacaysa sidii ay ugu heli lahayd nolol maalmeedkooda, carruurta dareemaysa aabbo la'aanta ee haddana aabaha leh way ku badanyihiin bulshadeena dhexdeeda.

Taasi wax ay raad kaga tegaysaa maskaxda ubadka marka ay arkaan aabbahood oo meel iska fadhiya hooyadood oo la silcaysa ay moodaan in ay agoon yihiin sida carruurta bilaa aabbaha ah iyo marka ay arkaan carruur aabbahood gacanta hayo subax walba, waxaa ku dhacaysa niyad xumo iyo moral-jab aad u wayn. Waxa laga yaabaa aabbahaasi in aanu kala aqoon carruurtiisa magacyadooda. Xilliga ay dhasheen, iskuulka ay dhigtaan, in ay wax cuneen iyo inkale, inta carruura ay yihiin ma yaqaan, wax ay xidhaanna ma yaqaan. Wakhti lama qaato, noloshooda wax kama oga, sida xilliga seexdaan ama maqan yihiin iwm. Aabbaha noocaas ah wax aan odhan karaa waa aabbo la mood. Hooyada ayaa ilmaha masuuliyaddiisa qaadda oo la daala-dhacda dhib iyo dheefba, sida

xaaladdaha gaarka ah iyo dhammaan noloshiisa oo u gashay kaalintii hooyo iyo tii aabbahaba buuxisay. Nolosha noocan ah ayuu Abwaan Hadraawi ku cabbiray maansada Awaal-tiris waxa uu yidhi:

**Intaydu ku deeqi mayso
Intaada ku biirin maysid
Hantida arladoo dhan taala
Hadaad irbad nooga keento
Ducaa ku asqayn lahayde
Inkaar naga waayi maysid**

Maansadani wax uu ina tusaysaa ama hogo tusaale u tahay, in marka ay hooyadu soo shaqayso aanu ku filnayn qoyskii, aabbihiina aanu wax gacan ah siinayn oo uu masuuliyaddiisii gabay, oo aannu aduunka waxa yaala oo dhan wax uga keenayo aannu jirin macal irbadna alle haka yeelee oo qiimaheedu aynnu ka war qabno. Sidaas oo ay tahay hooyadii haddii uu wax uun ku soo biirin lahaa duco ayay ugu dari lahayd sida maansadu tilmaamayso, waxaase meel taala ama sugaysa masuuliyadda uu dayacay cigaabteedii oo xagga illahay u noqonaysa haddii aanu

ka toobadkeenin. Wax aan soo qaadanaynaa xadiiskii rasuulkeena (N.N.K.H) “dhammantii masuuliyad baa idin saran qof walbana waa lagala xisaabtamayaa masuuliyadaas.”

Hooyadu marnaba ma buuxin karto labo kaalmood ama laba masuuliyadood, haddii ay mid buuxiso tii kale ayaa dayacmaysa, marka ay raadiso nafaqadii carruurta waxa meesha ka baxaysa barbaarintii habboonayd ee ay ku tarbiyadaynaysay. Wax aynnu aragnaa inta badan carruur dayacan ayaa kuu muuqanaysa ee suuqyada yaacaya, laga yaabee in aanu macal aabbuhu haddii uu kasoo hor baxo aanu garan, ama aannu ogayn in ay noolyihiin iyo inkale waakii Haadraawi lahaa:

**“Ugaasadu meeday heedhe
Dorraato miyaan la aasin
Miyaan kafan loo amaahan
Miyaan axan loo yaboohin
Markii araggaa la waayey
Miyaan jinku qaylo oogsan
Miyaan insigii gadoodin**

**Miyaan ologeenu yaabin
Ishaaro san kaama hayno
Shidaad naga loolin maysid
Ogaal nagu caymin maysid
Itaal nagu xoojin maysid
Qudhaanjo afuufi maysid
Dalool naga awdi maysid
Xashiish nala ururin maysid"**

Waxaa halkaa ka muuqata dhibka iyo musiibada halkaa ka muuqata ee qoyska haysata baaxadda ay leedahay. Waxa ka fiican in waxaas ay ka waantoobaan aabbayaashu, dhakhtarada, dugsiyada goobaha carruurtu ku ciyaarto iyo gooba kale carruurta laga helo iyadaa ay joogaan oo keliya hooyooyinka halka aabbayaashiina ay qaad suuqa u fadhiyaan habeen iyo maalin. Wax ay indhahagu qabanayaan oo aan badanka aragnaa hooyooyin xamaalaya oo la silcaya ubad aabbayaashood nool yihiin oo ay dayacan yihiin masuuliyadii la saaray.

Taasba waxa kasii yaab badan in uu isagiina kuwa biilka loo raadinayo ku jiro oo uu carruurtii ka mid

yahay. Hooyooyinka soomaaliyeed waa hooyooyinka caalamka ugu wanaagsan baynnu odhan karaa. Waa marka aynnu ka eegno dhinacyo badan. Aabbaha ugu fiican ee qaadka cunaa waa ka ilmaha dhakhtarka keena marka hooyadu biilka doonto ee marka dhakhtarku wayddiiyo ilmaha yari waa imisa jir odhanaya isug aan hooyadii Waco oo aan wayddiiyee, waa wax lala yaabo runtii wayna dhacdaa in badan runtii.

Dhinaca kale haddii aynu eegno aabbaha wanaagsan qisadan baa innagaga filan warkiisa:

Sheeko male'awaal ah ayaa tidhaa: Beribaa waxa jiray geed tufaax ah oo aad u wayn. Geedka waxa ku dheeli jiray wiil yar oo aan xataa hal maalin ka maqnaan jirin. Wax uu kori jiray laamaha geedka. Wax uuna cuni jiray midhihiisa markuu doonana hoostiisa ayuu seexan jiray. Cunuggu aad buu u jeclaa geedka, geedkuna aad buu u jeclaa cunugga. Wakhti ka dib cunuggii waa uu waynaaday. Waxa uu noqday mid aan u iman geedka oo aan ku ciyaarin.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu soo laabtay wiilkii isaga oo murugaysan geedkii ayaa ku yidhi: “kaalay

ila dheel.” Wiilkii ayaa ugu jawaabay: “ma ihi carruur kulamana dheeli karo, wax aan rabaa baaskiil waxaan u baahan ahay lacag aan ku iibsado.” Geedkii ayaa ugu jawaabay: “anigu lacag mahayo, laakiin wax aad qaadan kartaa midhahayga oo aad iibin kartaa si aad lacag uga hesho.” Geedkii ayuu koray midhihi oo dhan ayuu soo gurtay isaga oo faraxsan ayuuna baxay. Geedkii wax badan ayuu cidlooday oo wiilkii uma soo laaban wakhti dheer.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu soo laabtay wiilkii, laakiin nin weyn ayuu noqday! Geedkii aad ayuu ugu farxay soo laabashadiisa wax uuna ku yidhi: “kaalay oo ila dheel.” Wax uu ugu jawaabay wiilkii: “ma haysto wakhti aan kugula ciyaaro waxaan ahaynin qoys sugayo wax aan u baahan ahay guri aan degno ee ma i caawin kartaa?” Geedkii baa yidhi: “anigu guri ma hayo laakiin wax aad guran kartaa dhammaan laamahayga si aad guri uga dhisato.” Wuu gurtay dhammaan laamihii geedka, wax uuna baxay isaga oo faraxsan. Geedkii markale ayuu keli noqday oo ninkii wuu u soo laaban waayay.

Maalin qoraxdu kulushahay ayuu ninkii soo laabtay. Geedkii aad ayuu ugu farxay soo laabashadiisa wax uuna ku yidhi: “kaalay oo ila ciyaar.” Ninkii ayaa ugu jawaabay: “da’ayaan ahay kulamana ciyaari karo, waxa aan u baahan ahay in aan doon samaysto si aan ugu shaqaysto ee ma i caawin kartaa.” Geedkii ayaa ugu jawaabay: “qaado salkayga (geedka salkiisa) oo doon ka samayso!” Ninkii geedkii ayuu salkiisii goostay wuxuuna ka samaystay Doon.

Geedkii waxa ku soo hadhay xididadii oo keli ah. Wax badan oo uu maqnaa ayaa ninkii soo laabtay laakiin geedkii ayaa ku yidhi: “waan ka xumahay wiilkaygiigow ma haysto wax aan ku siiyo! Ma igu yaalo tufaax. Laamo aad kortaana iguma yaaliin.” Ninkii ayaa yidhi: “dhib ma laha, iguma yaalaan ilko aan midho ku cuno, waana aan duqoobay ma awoodi karo in aan geed koro.” Geedkii ayaa yidhi: “waxa keli ah ee ii hadhay waa xidido dhintay.” Ninkii ayaa yidhi: “waxa keliya ee aan u baahan ahay waa meel aan ku nasto.” Geedkii ayaa yidhi: “xididdada geedaha duqoobay waa meesha ugu wacan ee lagu nasto ee kaalay oo fadhiiso.” Wuu

fadhiistay ninkii, geedkii aad ayuu ugu faraxsanaa, farxad ayuu la ilmeeyay! Ma garanaysaa waa ayo geedkan? Waa aabbaha wanaagsan! Waxkasta ayuu u hurayaa si uu u farxad geliyo carruurtiisa. Waxa sheekadan turjumay Yuusuf Axmed Yuusuf.

D) Dhiirigelin la'aan:

Ilmaha soomaaliyeed inta badan ma helaan cid dhiirigelisa, waayo waalidiinta ayaan markii ay yaraayeen ayaanay ku soo korin dhiirigelin taas ayaa dabada ka riixaysa in aanay carruurtoodana dhiirigelin siin, carruurta soomaaliyeed waxyaabaha dib u riday ayay ka mid tahay ee ay waxyaaba baray muqaadaraadka ama in ay noqdaan laayaan, ma helaan cid tabaabolshaysha oo is garab taagta badan oo dhiirigelisa, ilmo walba soomaalidu wax ay keliya oo ay ka saacidaan wuxuu cuni lahaa ama huwan lahaa oo keliya, lama eego dhibka haysata si uu u helo dhiirigelin ama in talo iyo tusaale la siiyo, mushkiladaha haysta ubadka ee jecel in lala qaybsado si uu uga baxo marka uu waayo cid dhiirigelisa ama

ka caawisa ayuu bilaabaa inuu xal helo, taas ayaa keentay in uu dariiq qaldan maraanidba , ma helaan cid ku dhiirigelisa aqris iyo qoraalka inta iskuulka la iskaga diro waaba kuwa fursada u helee ayaan cidiba hoos u eegayn ilmaha, badanka inta waxbarataana waa in iskood wax isku baray, waalidiinta qaar baan ka warqabin macal in ay iskuulka tagaan iyo inkale ama aan ogaynba iskuulka ay dhigtaan, taasna waxa ugu wacan waalidiinta oo aan iyagu aqoon lahayn taas weeye sababta ugu wayn ee jirtaa, hooyooyinka qaar baan ogayn in buugta carruurta wax ku qoraan iyo inkaleba, qaarna ma garanayaan tariikhdiisii loo dhigayna oo ay tusaan kii bishii hore iyaga oo aan bishanba tegin iskuulkii waxaas oo dhan waa dhibaatooyinka carruurta ku xeeran ee u baahan in xal laga gaadho, wax ay indhahaagu qabanayaan hooyooyin ama aabbayaal ilmahii yara ku garaacaya wax aqri isaga oo aan niyad u hayn, oo wax ku dhiirigeliyaa aanay jirin in uu aqriyo oo aan la jeclaysiin wax aqriska goob wax lagu aqriyana aanu lahayn lana geyn goobaha wax lagu aqriyo.

Hooyadiina waataa la dul tagtay ul isaga oo laga yaabo inan bilba waxbarashadii tegin ama aanu garanaynba wax la leeyahay aqri. Waa in ilmaha lagu dhiirigeliyaa in uu wax aqriyo amin wax aqrisna loo sameeyo ka warran haddii aad marwalba tidhaahdo wax aqri oo aanad siinba xilli uu ku nasto isaga oo laga yaabo in uu daalan yahay. Wax aad kale oo arkaysaa ilmo wax loo dirayo oo lagu qasbayo sida iskuul, madarasadda ama shaqo, kaas oo aan haysan wax ku dhiirigeliya in uu tago ama qabto shaqadaas. Laga yaabee inta uu guulo fiican ka soo hooyay dhanka waxbarashada in aadan u hanbalyayn ama aanad ku dhiirigelin in uu hore uga socdo oo uu u arkoba haddii uu wax fiican keeno iyo haddii uu iska daayo in ay isku mid tahay.

R) Cabudhin ama cananta badan:

Ubadka waa in aan la cabudhin oo loo oggolaada in uu wax diidi karo ama wax dooran karo. Wax aad arkaysaa ubad qaan gaadhay oo lagu qasbayo wax

aanu rabin sida dharka, kabaha iyo cuntooyinka. Waxa kale oo loo diidaa in ay wax ka doodaan ama ka hadlaan ay u arkaan ubadku qalad, waxba lagama talogeliyo ilmaha sida arrimaha qoyska. Wax uu dareemayaa in aan qiimo ku lahayn waalidkii agtiisa, lama dhegaysto ama waxna lagama maqlo ubadka soomaaliyeed taasi waa mid aan sax ahayn, ubadka waa in aad dhegaysataa, waxna aad ka qaadataa waxyaabaha qaar macquul ah oo laga yaabo in uu kaaga saxan yahay, waa in ubadka loo oggolaadaa in ay wax dooran karo sida dharka, kabaha, cuntada iwm.

S) Ballan ka bax ama been u sheegid:

Ilmaha yari haddii aad ballan u qaaddo ma ilaawo sida dadka waawayn laakiin isagu wuu sugayaa uun, ilmaha hays odhan wuu ilaaway. Ballan aad u qaadday ee u samee waayo wuxu ku baranayaa beenta iyo balan kaga baxa, wax aad arkaysaa ubad oo been lagu maaweelinayo ama balan qaad beena waxa ii keen hooyo waxaasaan ku siine hadhowna lama siinayo, waa dhibaato jirta bal aynnu eegno.

Ma aha ilmaha in aad been u sheegto adiga oo aan waxba siinayn ama u qabanayn in aad balan qaad samayso, wax aad arkaysaa hooyo uu ilmihii diiday wax ay u diranaysay markaa leh kaalay hooyo ii keen waxaas baan ku siinayaaye hada waa been. Wuu kaa aaminka baxaya ilmuhu oo dib kuuma aaminayo, beentana wax uu moodaya wax iska caadiya, adigana wuu kuu sheegayaa been ileen adigaa u sheegaye, wuxuuna kaaga baxayaa haddii aad balan wada gasheen ileen adigaa kaga baxaye.

Waxa fiican in waxaas oo dhan ay ka taxadiraan waalidku oo ay iska ilaaliyaan si ay u toosto barbaarinta ubadku, waalidku waa in ay fuliyaan balan qaadada ay carruurta u sameeyeen, ilmaha yari marka aad balan qaad u samayso wuu farxayaa wax uuna sugayaa inta ay ka gaadhayso ama la siinayo haddii kale oo la siin waayo waxaa ku dhacaya murugo ama niyad jab, waxaa hoos u dhacaysa filashadiisii wax walbana wuxuu noqonayaa mid ka caajisaysan oo aan niyad fiican u haynin, ilmaha yar mar walba ha isku deyin in aad canaanato oo aad ku qayliso waxbay u

dhimaysaa maskaxdiisa, waxaa fiican in si degan wax loogu sheego oo la fahansiiyo, waxaa dhici karta fal uu isagu wanaag uga jeedo in aad adigu xumaan u aragto, fal aanad ogayn sababta ka danbaysa haku canaan ilmaha yar horta ogow sababta ku kaliftay aynnu soo qaadano qisan. Wiil yar ayaa u soo galay qol aabbihii iyo hooyadii ku jiraan labada gacmoodna wax uu ku sidaa labo xabo oo tufaaxa, dabeeto hooyadii ayuu ku yidhi hooyo labadaa mid qabso (labada tufaax mid dooro) markaasay mid dooratay, markaa suu markiiba hudhay oo uu dhadhamiyay, markaasaa odaygii aabbihii ayaa maagay oo canaantay oo ku yidhi ceeb waxay edeb darradaasi ma midhka hooyadaa dooratay ayaad iska cunaysaa, markaasuu wiilkii yar ahaa baa ku jawaabay aabbo mayee edebdarro umaan cunayne hooyo ayaan ka dhadhaminayey oo wax aan is lahaa ka macaan sii hooyo, ha ku degdegin qofna falalka uu samaynayo oo haku qiimayn ee waa in aad ogaataa sababta keentay.

Sheekadan wax aan kasoo xigtay Yuusuf Axmed Yuusuf.

Shaqada adag ee ilmaha loo diro:

Shaqada adag ee ilmaha loo diraa wax ay dhaawacdaa maskaxdiisa iyo jidhkiisaba, waayo ilmuhu wax uu qaadi karaa ama qaban karaa oo keliya inta uu awoodo. Markasta oo loo diro waxa ka awood weyn waxay dhaawac u gaysanaysaa maskaxda ilmaha iyo jidh ahaanba, meelaha qaar ubadka waxaa loo diraa wax culus sida biyo ama xaabo taas oo ilmaha yari aanu awoodin, waxa kale oo ilmaha dhibi kara masuuliyad adag oo la saaro taas oo maskaxda ilmaha yari aanay u diyaarsanayn ama aanay qaadi karin masuuliyadaha adag sida haddii ilmaha waalidkii dhinto oo kale sidaana ay ugu soo wareegto masuuliyaddii qoyskooda.

Sidaa si lamid ah waxa ilamaha yar dhibi kara in loo diro shaqo ilmaha damiirkiisa dhiba sida in ilmuhun in uu baalashle noqdo. In kasta oo ilmaha shaqada noocana ay duruufi ku kaliftay haddana dadkii sidaa uma fahansana oo way ku caayayaan oo way ku aflagaa daynayaan waxaaba usii dheer in dilid loogu daro mushqaayaddii ay ku shaqaynayeena aan la siin.

Wax ay indhahaagu qabanayaan ilmo carruur yaryar oo aan haysan cid daryeesha oo ka shaqaynaya hudheellada ama maqaaxiyaha cuntada taas oo loo dirayo shaqo culus sida weel waawayn oo u maydho ama nadiifinta goobta cuntada oo aan ilmaha yar ku habboonayn in loo diro maadaama uu qaban karo hawshaa qof weyn, taasna ilmaha yar wax ku kalifaya duruufo la soo gudboonaaday waxaas oo hawl ahna wax uu u galayaa sidii uu uraadsan lahaa quutal daruurigii uu ku noolaan lahaa waxa kale oo jirta in ilmaha loo diro hawlo intaa aynnu soo sheegnayba ka adag sida askarayn.

TALO BIXIN

Runtii markii aan u qalin qaatay qoridda mawduucan barbaarinta carruurta waxa jiray sababo badan oo igu dhaliyay ama igu kallifay in aan qoro taasina wax ay la

xidhiidhaa dhacdooyin aan arkay ama aan la kulmay taas oo i tustay in weli baahi loo qabo mawduucan oo aysan ku fillayn wixii laga qoray hore, barbaarinta ubadku ma aha wax sahlan wax ay leedahay barbilow laakiin bardhamaad keedu waa sida badwaynta uu ka baxo oo keliya qofkii si wacan dabaasha u yaqaan allena wakiishay, xilligan ay joognona wax aynnu arkaynaa in barbaarin toolmoon baahi loo qabo siiba dadka qurbejooga ah iyo kuwii dalka joogayba.

- ✓ Qaar Tahriiba.
- ✓ Qaar Ciyaalo kooxeedyo samaystay.
- ✓ Qaar Tuug ah.
- ✓ Qaar nolosha ka dhacay oo balwadi riftay mustaqbal koodii.

Intaba indhahaagu way qabanayaan iyo waalid rafaadsan oo noloshu ay ku dhiban tahay haddaba iyaga oo aynnu og nahay in waxaa soo dhibi jirto waxa habboon in si xigmadaysan, xeeladaysan, naxariis iyo jacaylba ku jiro in ubadka la toosiyo loona dhibriyo oo loo sama falo si waalidkuna aanay u dhibaatoon ilmahana aan dhib loo gaadhsiin.

Haddaba taladaydu wax ay tahay:

- ❖ Waxa habboon in dawladdu ay u samayso ama cidwalba oo danaynaysa ubadka ama carruurta yar-yar xabsi ama jeel ama goob dhaqan celin u gaar ah oo loogu sameeyo dhaqan celin ama anshax toosin. Sababta oo ah marka xabsiga dadka waawayn lagu xidho wuxuu soo baxayaa isaga oo kasii daray laga yaabee in aad balwad u xidhay wax uu kasoo bixi doonaa badanaa isagoo tuugnimona ku darsaday.
- ❖ Waa in xabsiga dhexdiisa ay kusii wataa wax barashadooda.
- ❖ Lagu baraa xirfad gacmeed uu hadhow intifaacsan karo.
- ❖ Waa in diinta iyo dhaqan celin lagu sameeyaa ilmaha yar.
- ❖ Xabsigu waa in uu noqdaa meel hab fikirkooda lagu beddello ilmaha yar.
- ❖ In derbi jiifka loo sameeyo dhaqan celin.
- ❖ In la daryeelo kuwa aan lahayn cid ay ku abtirsadaan.
- ❖ Hooyooyinka ilmaha lagu jeexo bilaa sababna wax aan kula talin lahaa in ay hoos u dhacayso xidhiidhkii iyada iyo ilmaha ka dhexeeyey jacaylkii ay u qabtayna uu yaraanayo ilaan dhibtii fooshaba may arag intaasoo

aan dhib ka yarayn haddana saamayn bay keeni ii halayska daayo ciddii aan duruufi u geyn.

- ❖ Waa in goobaha waxbarashada bilaash looga dhigaa ilmaha aan haysan dhaqaale uu wax ku barto. Sida jamacadaha, iskuullada iyo dugsiyada intaba sababta oo ah ilmaha haddii looga saaro arrin dhaqaale waxa aad tustay in uu faqiir yahay waana sababta dhallin badan ku kallifta tahriibka iyo in ay waddanka ka baxaan, haddii bilaash looga dhigo waddanka ayuu jeclaanayaa laakiin idinku haka eryina carruurta dalka waa haddii ay jirtee.

19/1/2019 mar aan booqday xabsi ku yaalla magaalada Hargaysa oo aan arkay saddex carruur ah oo rag waawayn oo tuugo lagu soo eedeeyay kula xidhan. Xabsigan waan ka naxay arrinkaas haddii xabsi gaar ah carruurta loo waayey ama aan loo dhisin maa qol gaar ah carruurta lagu xidhin, hadhowbuu soo bixi doonaa isaga oo bartay intii loo xidhay in ka badan.

Arrintan waxaa ugu dhaliyay dhacdooyin badan oo aad u xannuun badan oo damqaya qof walba oo caqli iyo garaadba leh oo ku dhaca ubadka ama ay la

kulmaan marka ay xabsiyada dadka waawayn galaan ee ay kasoo baxaan, taas oo dhaawac weyn u gaysata maskax ahaan iyo jidh ahaan ba ilmaha yar. Kadib taladani wax ay ugu soo dhacday markii aan arkay aabbo xidhaya ilmihiisii oo aan da'ahaan ku qiyaasay 8 ilaa 11 jir kuna xidhayo xabsi dad waawayn taas oo igu kalliftay in aan ka fikirayay saacado badan. Hadhow isaga oo sidee ah baa laga soo saari doonaa, waalidku waa in ay marka hore isku dayaan in ay ubadka hagaajiyaan barbaarinta ubadka.

“carruurtu waa nimco illahay ina siiyay ee si wacan u dayac tir”

Allaa mahad leh

Tixraac

- ❖ Waraysi macallin Cabaas Axmed Nuur oo madarasad barbaarin gacanta ku haya.
- ❖ Buugga hooyada ee uu qoray Prof. Maxamed Jaamac Rooble.
- ❖ Buug tarbiyatul awlaad ee ku qoran afka-carabiga ee uu qoray Maxamed Siciid Marsi.
- ❖ Dhegaysi Sheikh Mustafe X. Ismaaciil Haaruun.
- ❖ Dhegaysi Sheikh Cabdiraxmaan Bashiir.
- ❖ Dhegaysi Sheikh Kenyaawi.
- ❖ Dhegaysi Sheikh Yaasiin ibraahin.
- ❖ Dhegaysi Naasir Cadceed.
- ❖ Qoraal uu qoray Dr Ahmed Isse Mohamud (xiin)
- ❖ Qoraal uu qoray Cabdifataax Cawed Cali.
- ❖ Dhegaysi qisas badan oo ah Drs Hibaaq Buubaal.
- ❖ <http://doyoupraysalaah.blogspot.com/p/barbaarinta-toosan-ee-caruurtaada.html>

- ❖ <https://www.infofinland.fi/so/nolosha-finland/qoyska/caruurta/barbaarinta-ilmaha-dalka-finland-gudihisa>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=qWFTuTndeZg>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=wJWkAhSmImg>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=K3et98EZ0CI>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=-FWT2rZypkk>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=NDb142qiVjw>
- ❖ https://www.hiiraan.com/comments2-op-2008-jan-barbaarinta_ubadka.aspx
- ❖ <https://biikolesom.wordpress.com/2014/08/18/barbaarinta-ubadka-boqol-qodob-oo-muhiim-ah/>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=-FWT2rZypkk>
- ❖ <https://www.youtube.com/watch?v=bRoO1HQEcdY>